




San Diego Unified
SCHOOL DISTRICT

Maclumaadka Loogu Talagalay Waalidiinta (Facts for Parents)



2021-2022

Waxyaabaha Muhiimka Ah Oo La Cusbooneysiiyay Sannadkaan iyo Foomka Loo Baahan
Yahay Ee Loo Yaqaano Universal Form

Taariikhaha Muhiimka Ah Ee Sannad Dugsiyeedka

2020-2021

Waxaa laga yaabaa inay taariikhaaha 2021-2022 is bedelaan. Dugsiga cunugooda ayaa ogeysiin doono waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda marki ay jiraan maalmaha waqtiga gaaban (mínimum days) iyo maalmaha loogu talagalay Horumarka Shaqaalaha oo aysan joogin ardayda.

SANNAD DUGSIYEEDEKA CAADIGA AH (TRADITIONAL SCHOOL YEAR)

Ogosto 30 Maalinta Koowaad Ay Ardayda Bilaabayaan Dugsiga

Setembar 6 * **Faysto:** Maalinta Shaqaalaha (Labor Day)

Noofembar 11 * **Faysto:** Gudashada Maalinta Dadka Ciidamada Ku Jiri Jiray (Veterans Day Observance)

Noofembar 22-26 * Fasaxa Mahadcelinta

Diseembar 20-31 * Fasaxa Jiilaalka

Janaayo 3 Waxaa Lagu Soo Laabanayaa Dugsiga

Janaayo 17 * **Faysto:** Maalinta Martin Luther King Jr.

Febraayo 17, 21 * **Faysto:** Maalinta Madaxweynayaasha

Maarso 28-Abriil 1 * Fasaxa Guga

Abriil 4 Waxaa Lagu Soo Laabanayaa Dugsiga

Maajo 27 * Wax Barasho Ma Jirto Maalintaan

Maajo 30 * **Faysto:** Maalinta Xusuusta Dadka Dagaalada Ku Dhintey (Memorial Day)

Juunyo 14 Maalinta Ugu Dambeysa Dugsiga

* MA JIRO DUGSI

Dadka La'la Xiriiraayo Oo Muhiimka Ah

Tusiyaha Waaxda: www.sandiegounified.org/departments

Nidaamka Guddiga (Board Policy [BP]) iyo Xeerka Maamulka (Administrative Regulation [AR]): https://sandiegounified.org/about/policies_procedures

LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA/DADKA ARDAYDA MASUULKA KA AH

Qayb-qaadashada Qoyska Iyo Bulshada (Family and Community Engagement)	619-293-4431
Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada	858-627-7340
Dugsiyada Xaafada Iyo Xulashooinka Is-qoritaanka	619-260-2410
Kal-kaaliyaynta Caafimaadka Iyo Wanaagsanaanta.....	619-725-5501
PrimeTime Extended Day Program (Barnaamijka Primetime Oo Lagu Bixiyo Caawinaad Dheeraad Ah)	858-503-1870
Xafiiska Hubinta Tayada (Quality Assurance Office)	619-725-7211
Booliiska Dugsiga (24 saacadood)	619-291-7678
Cadaalada Wax Barashada Gaarka Ah	619-725-7700
Title IX Educational Equity (Cadaalada Wax Barashada Oo Ka Mid Ah Title IX).....	619-725-7225
Gaadiidka	858-496-8460

XAFIISYADA KALE

Guddiga Wax Barashada (Board of Education)	619-725-5550
Xafiiska Koormeeraha Sare (Office of the Superintendent)	619-725-5506
Xafiiska Adeegyada Sharciga (Legal Services Office)	619-725-5630

AKHBAARTA GUUD

Caawinaadka Tusiyaha Degmada Dugsiga (District Directory Assistance).....	619-725-8000
---	--------------

Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego
Eugene Brucker Education Center
4100 Normal Street
San Diego, CA 92103

Hadii aad rabto faahfaahin dheeraad ah tag websaytkeena oo laga heli karo https://www.sandiegounified.org

Jadwalka Tusmooyinka

A. Soo Dhawoow.....	1
B. Xuquuqda Iyo Waajibaadka Waalidka Ama Qofka Mas'uulka Ka Ah Ardayga .	2
C. Nidaamyada Kala-sooca, Cabsi-galinta Iyo Xoog-sheega, Hab-raaca Cabashada Guud . . .	5
D. Faraxumeynta La Xiriirta Galmada Ee Ardayda Iyo Nidaamyada Cabashada.	6
E. Marki La Joogo Dugsiga	9
F. Xuquuqda Iyo Diiwaanka Ardayda.....	12
G. Shuruudaha Caafimaadka Iyo Wanaagsanaanta.	16
H. Nidaamka Edbinta Dib Wax U Hagaajinta.....	19
I. Soo Xaadiritaanka	20
J. Tignoolojiga.....	21
K. Luuqada Iyo Barnaamijyada Barashada Luuqada.....	22
L. Foomamka iyo Tilmaamaha	25
Foomka Guud (loo baahan yahay).....	26
Foomka Ogeysiinta Iisticmaalka Sunta Cayayaanka (waa ikhtiyaari) .. .	27

A. Soo Dhawaada Waalidiinta Iyo Dadka Mas'uulka Ka Ah Ardayda



Maadaama aan bilaabeyno sannad dugsiyeedka 2021-2022, waxaan rabaa inaan si gaar ahaan adiga iyo qoyskaaga idin ku soo dhaweyyo dugsiyada ka tirsan Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diego (San Diego Unified). —Koormeeraha Sare Ee Ku Meel-gaarka Ah Lamont Jackson



Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan idin kusoo dhaweyyo sannad dugsiyeedka 2021-22. Wuxuu bilowga sannad dugsiyeed kasta la imaadaa rajo iyo xiiso oo wato caqabado iyo fursado cusub. Si kastaba ha ahaatee, sannad dugsiyeedkaan ayaa si gaar ah muhiim u ah maadaama uu ka daba yimid waxyabaha aan la wada kulaney uu keenay cudurka faafayo.

Wuxuu qof kasta oo ka mid ah Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ku faraxsan yahay in lasoo labto iyadoo si toos ah loo dhiganaayo wax barashada shan maalmood asbuuci, iyo ay jiraan xulashooyin intarnetka oo laga helaayo dugsigeena intarnetka ee loo yaqaano Virtual Academy oo diyaar u ah ardayda oo aan diyaar u ahayn inay kusoo laabtaan galaaska.

Iyadoo uu sannad dugsiyeedka 2021-22 noo keenaayo dhammaanteen fursado cusub, waxaa sidoo kale la socdo mas'uuliyad ah in lasii wado hab-maamuuska amniga uu sababey COVID-19. Si dhab ah ayaan u qaadanaa mas'uuliyadahaan waxaana kaaga mahad-celineynaa amniga aad nagu aamiintay wax barashada caruruuttaada.

Fadlan akhri buuggaan gacanta ee Maclumaadka Loogu Talagalay Waalidiinta iyo u hayso tixraax ahaan intuu sannadka socdo. Waxaa kaloo jiro maclumaad qimo badan oo ku jiro websaytka degmada dugsigeena, sandiegounified.org, oo ka mid ah maclumaad ku saabsan dugsiyadeena, barnaamijyada kala duwan aan bixino, dhaqaaq-yadeena xaga jaaliyada, khiddad-keena iyo nidaam-yadeena, iyo khayraad badan oo loogu talagalay waalidiinta.

Intuu sannadka socdo, fadlan noo sheeg sidaa wax u wadno. Xafiiskeena Hubinta Tayada (Quality Assurance Office) ayaa diyaar u ah inuu ka jawaabo su'aalaha, inuu bixiyo maclumaad iyo inuu xaliyo waxyabaha laga walwalsan yahay.

Mar labaad waxaan kaaga mahad-celineyaa doorashada aad Degmada Dugsiga Midsaysan Ee San Diyeego u dooratey wax barashada ardaydaada. Waxaa sharaf noo ah inaan u adeegno adiga iyo qoyskaaga.

Si daacad ah,

Lamont Jackson
Koormeeraha Sare Ee Ku Meel-gaarka Ah

B. Xuquuqda Iyo Waajibaadka Waalidka Ama Qofka Mas'uulka Ka Ah Ardayga

Qayb-qaadashada Qoyska

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo qaraabada kale waxaa lagu dhiiri-gelinayaa inay noqdaan kuwa ka qayb-qato wax barashada rasmiga ah ee ilmahooda. Baaritaano la sameeyay ayaa muuijey in hawlgalka xaga guriga iyo dugsiga oo xili hore ah iyo joogto ah ayaa ka caawino caruurga inay ku fiicnaadaan tacliinta iyo waxay keentaa dugsiga ku guuleysanaayo wax baritaanka dhammaan caruurga.

Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihii inay kamid noqodaan habkey u socoto wax barashada iyo inay heli karaan nidaamka ayagoo ku helaayo magaca carruurtooda. Sida soo socota ayaa Xuquuqdaan iyo waajibaadkaan loogu sharaxay gudaha Qayba 51101 Ee Sharciga Wax Barashada Kaaliforniya

• **Daawashada Galaaska:** Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihii inay booqdaan galaaska ilmahooda siday u daawadaan wax qabadka. Hore ula xirir dugsiga si aad u habayso waqtiga iyo taariikhda booqashada.

• **Shiraka Macalimiinta:** Waalidiinta iyo dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihii inay cadsadaan kulan ay la yeeshaan macalinka (macalimiinta) ama maamuleha ilmahooda. La xirir dugsiga si aad u qabsato maalin iyo waqtii.

• **Iskaa Wax U Qabsashada:** Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waxay xaq u leeyihii inay waqtigooda iyo khayraadkooda ikhtiyaarkooda ugu bixiyaa horumarinta dhismooyinka iyo barnaamijyada dugsiga. La xirir dugsiga sida aad u ogaato shuruudaha iyo xaaladaha adeegaan.

• **Soo Xaadiritaanka Ardayda:** Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihii in si waqtii fican loola socod siyo hadii ilmahooda uu dugsiga ka maqan yahay fasax la'aan.

Imtixaanada Gobolka Dhan

Waxay ardayda Kaaliforniya qaataan dhowr imtixaan oo loo xilsaarey gobolka dhan marki ay ku jiran heerar fasalo kala duwan oo ka bilaabmaayo fasalka 3'xaad ilaa 8'daad, 11'naad, iyo hal imtixaan saynis marki ay ku jiraan dugsiga sare. Waxay imtixaanadaan siyaan waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah, iyo macalimiinta, iyo dadka wax baro ardayda maclumaad wax oga sheegayo siday ardayda ku yihiin wax barashaddoooda iyo inay muuijyaan aqoon xaga fulinta heerarka u dajisan heerarka fasalada. Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihii in marki ay soo cadsadaan la siyo maclumaadka khuseeyo heerka guusha uu ardaygooda ka gaarey imtixaan kasta ee tacliinta ee gobolka. Natijjooyinka imtixaanka waxaa kaloo loo isticmaali karaa ujeedooyin ah la xisaabtan xaga deegaanka, gobolka, iyo dawlada.

Imtixaanka Kaaliforniya ee Hawl Fulinta iyo Horusocodka Ardayda (CAASPP):

• **Imtixaanka Loo Yaqaano Smarter Balanced Assessments (SBA):** Imtixaanka loo yaqaano SBA oo ah imtixaano lagu qaato kumbuyutarka ee su'aalaha lagu weydiinaayo ardayda ku xiran yihiin siday oga jawaabaan su'aasha ka horeysa wuxuu raacsan yahay habka cusub ee ardayda wax loo baro ee loo yaqaano Common Core State Standards (CCSS). Waxaa fasalada 3'xaad ilaa 8'daad iyo fasalka 11'naad lagu bixiyaa imtixaano ku saabsan cilimiga ama akhriska iyo qoraalka luuqada Ingiriisiga iyo imtixaano ku saabsan xisaabta si loo qiyasoo hadii ay ardayda ku taagan yihiin wadada ay diyaar ugu noqon lahaayeen jaamacad iyo shaqo. Waxaa natijjooyinka imtixaanada ELA iyo imtixaanada xisaabta ee fasalka 11'naad lagu ogaan karaa inay ardayda diyaar u yihiin jaamacada.

• **Imtixaanka Sayniska Ee Kaaliforniya (California Science Test [CAST]):** Waxaa imtixaanka loo yaqaano CAST lagu cabbiraa siday ardayda u baranayaan habka cusub ee wax loo baro ardayda ee loo yaqaano California Next Generation Science Standards. Waxaa lagu bixiyaa fasalada 5'naad, iyo 8'daad iyo hal mar dugsiga sare. Wuxuu imtixaanka CAST ee lagu qaato kumbuyutarka beddelayaa imtixaanada loo yaqaano California Standards Tests (CST) for Science oo ah imtixaano loogu talagalay sayniska.

• **Imtixaanada Beddelan Ee Kaaliforniya (California Alternate Assessments [CAA]):** Waxaa ardayda oo aad oga xanuunsan maskaxda la siyyaa imtixaanka lagu qaato kumbuyutarka ee loo yaqaano CAA oo loogu talagalay ELA iyo xisaabta, waxaanla la siyyaa ardayda ku jiro fasalada 3'xaad ilaa 8'daad iyo fasalka 11'naad. Waxay waxyabaha imtixaanka raacsan yihiin CCSS waxayna ku salaysan yihiin heerka laga rabo inay ardayda gaaraan ee loo yaqaano Core Content Connectors. Waxaa CAA'ga loogu talagalay sayniska (CAA for Science) oo ka mid ah wax barashada la siyyaa ardayda ku jiro fasalada shanaad iyo sideeedaa, iyo hal mar ayaa lagu qaataa dugsiga sare.

• **Imtixaanka Isbaanishka Ee Kaaliforniya (California Spanish Assessment [CSA]):** Waxaa CSA lagu qiimeeyaa xirfada ardayga ee ah xaga akhriska, qaababka uu wax u qoro iyo dhageysiga iyadoo la isticmaalayo heerarka loo dajiyay ardayda ee loo yaqaano Common Core State Standards en Español (oo ah Isbaanish). Ujeedada CSA waa in lagu cabbiro aqoonta cilmaa luuqada Isbaanisha ee ardayga marki uu ku jiro fasalka saddexaad ilaa fasalka sideeedaa, iyo dugsiga sare si loo soo bandhigo maclumaad heerka ardayga oo ah aqoonta Isbaanishka iyo si ardayda dugsiga sare loogu soo bandhigo qiyas ku habboon oo loo isticmaali karo si ah qayb ka mid ah Shaabada Akhriska iyo Qoraalka Labo Luuqad Ee Gobolka (State Seal of Biliteracy).

Siduu dhigaayo Sharciga Wax Barashada ee Kaaliforniya, waalidiinta ama dadka mas'uulka

ka ah ardayda ayaa sannad kasta dugsiga u soo gudbin karo qoraal ay ku codsanayaan in cunugooda laga dhaafu qayb ka mid ah ama dhammaan imtixaanada CAASPP.

Imtixaanada Aqoonta

Luuqada Ingiriisiga Oo Loogu Talagalay Kaaliforniya oo loo yaqaano English Language Proficiency Assessments for California (ELPAC)

Wuxuu ELPAC raacsan yahay Heerarka Horumarka Luuqada Ingiriiska Ee Kaaliforniya Ee 2012, wuxuuna ka kooban yahay labo imtixaan ee kala gooni ah ee loo yaqaano English Language Proficiency (ELP) assessments; hal mid oo loogu talagalay marka koowaad ee ardayda lagu tilmaamayo inay yihiin arday baranaayo Ingiriisiga iyo midka kale (summative assessment) ee loogu talagalay in sannad kasta lagu qiimeeyo ardayda oo lagu garto heerka aqoonta luuqada Ingiriiska ee ardayga iyo in lagu cabbiro horumarka ay ka gaareen barashada Ingiriiska.

Imtixaanka Jir-dhisnaanta (Physical Fitness Test [PFT])

Xaga ardayda Kaaliforniya, PFT'ga waa imtixaanka loo yaqaano Fitness- Gram waxaanla siyyaa ardayda ku jiro fasalada shanaad, todobaad, iyo sagaalaad. Hadafka imtixaanka ee ugu weyn waa in ardayda lagu caawino inay yeeshaan caadooyin noloshooda dhan jiro oo ah dhaqdhaqaqa jirka ee caadiga ah.

Doorashada Dugsiga

Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihii inay cadsadaan in ilmahooda lagu qori karo dugsi walbo oo degmada dugsiga ku yaalo. Loogama baahno degmada dugsiga inay ogolato codsigaas hadii uu dugsiga ahayn dugsiga ku yaalo xaafada cunuga. Hadii aad rabto inaad wareejiso ardaygaada, la xirir Xafiiska Dugsiyada Xaafada iyo Fursadaha Is-qoritaanka oo laga wici karo 619-260-2410 ama tag sandiegounified.org/departments/neighborhood_schools_and_enrollment_options

Deegaan Dugsi Oo Amaan Leh

Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihii iyo awood u leeyihii hubinta deegaan wax barasho amaan iyo taageer leh oo loogu talagalay ilmahooda.

Maclumaadka Khuseeyo Waxyaabaha ay Macalimiinta, ama Shaqaalaha Kale ee loo

diro shaqo ay shahaado u haysanin (paraprofessionals), ama Caawiyeyaasha (Aides) ugu qalmaan shaqooyinkooda

Waxay waalidiinta iyo dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin inay codsadaan maclumaad khuseeyo waxyaabaha ay macalinka ama macalimiinta, shaqaalaha kale ee loo diro shaqo ay u haysanin shahaado (paraprofessionals), iyo caawiyeyaasha ee ardayga ugu qalmaan shaqadooda ay xirfada u leeyihiin. Waxaa ka mid ah hadii uu macalinka fulinaayo waxyabaha oo xaga gobolka looga baahanayah inuu oga qalmo shaqadiisa iyo shuruudaha la xiriira wixi shati oo looga baahanayah xaga gobolka oona loogu talagalay fasalada iyo maadooyinka la dhigo; hadii uu macalinka wax dhigaayo haysto ogolaansho lagu siiyeh si degdeg ah ama ay jiro xaalad kale oo ku-meelgaar ah; shahaadada uu macalinka ka soo qaatey jaamacada; hadii uu macalinka haysto shahaadooyin sareeyo iyo maadooyinka uu ku haysto shahaadooyin kaas; iyo hadii ay shaqaalaha caawino macalimiinta (instructional aides) ama shaqaalaha kale ee loo diro shaqo ay shahaado u haysanin (paraprofessionals) wax u qabtaan cunugaaga iyo waxyabaha ay ugu qalmaan. Waxay degmada dugsiga sidoo kale ogeysiin doontaa waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda hadii cunugooda lagu qorey ama uu wax u dhigaayey macalin aan aad ugu qalmin shaqadiisa muddo afar asbuuc ama ka badan oo isku xigta ah. BP 4112.2, AR 4222

Qalabka Manhajka

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin inay baaraan qalabka manhajka oo galaaska ama galaasyada oo ilmahooda ku qoran yihiin.

Horusocodka Tacliinta Ee Ardayda

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin in laga wargeliyo horusocodka tacliinta ilmahooda xaga dugsiga iyo qofka ay la xiriiriyan hadey u baahan yihiin akhbaar dheeraad ama ilmahooda in laga caawino.

Dib U Haynta

Waxay waalidiinta iyo dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin in laga wargeliyo ugu horeeyo sannadka oo suurtgal ah hadii ilmahooda lagu tilmaamo inay halis ugu jiraan dib loo celiyo. Waxay xaq u leeyihiin inay waxbaaha ku saabsan go'aanada khuseeyo dib u celinta kala tashtaan shaqaalaha dugsiga, iyo inay rafcaan ku sameeyaa go'aanka noocaas ah.

Diiwaanka Ardayga

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin inay helaan diiwaanka ilmahooda iyo inay su'aal ka dhiibtaan wax walbo ay ka dareemaan inuu sax ahayn, run ahayn, ama ku xad gudbaayo waxa khaaska u ah. Waxay xaq

u leeyihiin jawaab waqtii ku socoto oo ka imaato degmada dugsiga oona khuseeyo su'aalahooda.

Sharciga Xuquuqdaa lio Qarsoodiga Wax Barashada Ee Qoyska (FERPA) ayaa siyyo waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo ardayda ka weyn da'da 18 nooc xuuq ayadoo ixirtaam siineyo diiwaanka ardayga. Xuquuqdaan waxaa ku jiro baartaanka diiwaanka, xaq lagu dalbado beddelka diiwaanka ardayda hadii ay aaminsan yihiin inuuusan diiwaanka sax ahayn, iyo xaq a y leeyihiin inay ogolaadaan siidaynta akhbaar shakhsiga lagu tilmaami karo oo ku jiro gudaha diiwaanka wax barashada ardayga waxaan ka ahayn ilaa xadka inay FERPA ku amar bixiso siidayn akhbaarta iyadoo jirin ogolaansho.

Heerarka

Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan akhbaar khuseeyo heerarka tacliinta oo laga filanaayo ilmahooda inuu fuliyo.

Sharchiyada Dugsiga

Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis qoran oo sharchiyada, nidaamyada imaanshaha, shuruucda labiska iyo nidaamyada dugsiga oo loogu talagalay booqashada dugsiga.

Imtixaanka Cilmi-nafsiq

Waalidiinta ama dadka ardayda mas'uulka ka ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan akhbaar khuseeyo kuli imtixaanada cilmi-nafsiq oo loogu talinaayo ilmahooda.

Socdaalka iyo Jinsiyada

Waxay dhammaan ardayda xaq u leeyihiin wax barashada dadweynaha oo lacag la'aan ah iyadoo ay ku xirneyn xaalada ay ku joogaan wadanka (immigration status), jinsiyada (citizenship), ama diinta ay aaminsan yihiin. Degmada dugsiga uma fasaxi doonto maclumaadka ardayda kooxo kale marki ay noqoto arrimaha khuseeyo ujeedooyinka fulinta socdaalka, hadii uu waalidka ama uu qofka mas'uulka ka ah ardayga ogolaado amu uu oga baahdo amar ka socdo maxkamad ama codsi ka socdo maxkamad oo dhigaayo in saas la sameeyo (subpoena) mooyee.

Hadii uu dugsi ogaado inuu arday waalidkiis ama qofka mas'uulka ka ah uusan joogin oona daryeeli karin ardayga, wuxuu dugsiga ku dadaali doonaa wixi tilmaam uu soo sheegay waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga oo la xiriir daryeelka ardayga oo uu kusoo sheegay maclumaadka la xiriirkha degdega ah. BP/AR 5145.13

Caruurta Qoysaska Milatariga

Caruurta qoysaska milatariga lama galinaayo boos uu soo gaaro khasaaro iyadoo ay sababtu tahay dhibaataadan xaga wareejinta diiwaankooda ay kala imaanayaan degmada dugsiga ee hore iyo/ama kala duwanaanshaha shuruudaha gelitaanka ama da'da. Marka la qoro, degmada dugsiga ayaa si degdeg ah oga codsaneyso ardayga degmadiisa dugsiga ee hore diiwaanka ardayga iyo waxay u ogolaaneysaa ardayga

30 maalmood oo laga bilaabaayo taariikhda is-qoritaanka inuu helo dhammaan talaalada loo baahanayah.

Marka uu cunug qoys milatari u wareegaayo meal ka baxsan degmada dugsiga, waxay degmada dugsiga siin doontaa waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda diiwaanka ardayga oo is haysto iyo dhammaystiran ama diiwaan aan rasmi ahayn ama "lagu qaadaayo gacanta". Marka uu soo codsada degmada dugsiga cusub, 10 maalmood gudhood ayaa degmada dugsiga cusub lagu siin doonaa koobiga diiwaanka ardayga. BP/AR 6173.2

Golayaasha lio Guddiyada

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda, oo kamid ah kuwa luuqadooda koowad aysan ahayn Ingiriisiga, waxay xaq u leeyihiin inay si xubin ahaan oga qayb-qaataan guddiyada la'talinta dugsiga, golaha gooba dugsiga, ama kooxha hoggaaminta maamulka oo goob ku saleysan si tixraaceyo sharchiyada iyo shuruucda la dajiyey oo loogu talagalay xubinimo. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxay kaloo xaq u leeyihiin inay imaadaan ugu yaraan labo shir sannadkii oo dugsiga uu jadwalka ku daro sida loo helo akhbaar khuseeyo arrimaha iyo wax qabadda dugsiga.

Ujrade Ardayda (Pupil Fees)

Dastuurka Kaliforniya wuxuu waajib ka dhigayaa in wax barashada dad weynaha kharash la'aan lagu siyyo ardayda, waxaan ka ahayn hadii kharaash si khaas ahaan u amro sharciga ayadoo loogu talagalay barnaamij ama wax qabab khaas ah.

Pupil fee waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn, waxyabaha soo socda

isku-qoritaanka dugsi ama galaasyo, ama ah shardi inuu ka qayb-qaato galaas ama wax qabadka dheeraadka oo manhajka ka baxsan, ayadoon la eegayn hadii galaaska ama wax qabadka uu Yahay mid doorasho ama khasab ah, ama loogu talagalay buundo; dabaaji dammaanad (security deposit), ama lacag kale oo la bixiyey, oo arday laga rabo inuu bixiyo sidu u helo quful, sanduuq, buug, qalabka galaaska, qalabka muusika, dharka, ama alaaboo ama qalab kale; wax gadasho loogu baahan yahay si loo helo wax yaabo, alaaboo, qalab, ama dhar la xiriira hawl wax barasho.

Waxaa cabashada ujaarada ardayda loo gudbin karaa maamulha dugsiga ama koormeeraha sare ama qof u xilsaaran.

Si qarsoodi ah ayaa loo gudbin karaa ujrade ardayda iyo/ama cabasho LCAP, haseyeeshee, waxaa khasab ah inuu cawdaha keenaa caddayn ama maclumaad u horseedaya caddayn si loo kaalmeeyo cabashada. Cabashada pupil fee waa in la gudbiyo kama dambeyn hal sano marki laga bilaabo taariikhda xad gudubka laga eed sheeganaayo uu dhacay. Lagama rabo doono arday ku qoran dugsi degmada dugsiga inuu

bixiyo ujro arday (pupil fee) si uu oga qayb-qato hawl wax barasho.

Iskaashi ay Labada Dhinac Is Taageerayaan iyo Is Ixtiraamayaan

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin iyo ah in lasiyo fursad ay si iskaashi labada dhinac taageero iyo xushmad leh ola shaqeyaan dugsiga, sida loo caawino ilmhooda inuu guul gaaro. Wuxuu Guddiga Wax Barashada (Board of Education) ku dhaqmi doonaa sharchi la isla sameeyey oo sharaxaayo siday waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda, shaqaalaha dugsiga iyo ardayda u wadaagi karaan mas'uuliyada ka saaran korinta caqliga, jirka, dareenka, bulshanimada iyo wanaagsanaanta ardayda.

Waxaa sharcigaan ka mid ah, laakiin uusan ku koobneyn:

- Sida waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo dugsiga ay u caawin doonaan ardayda inay gaaraan heerar tacliinta iyo kuwa kale
- Sida dugsiga uu kuli ardayda ugu soo bandhigti doono manhaj iyo wax barasho tayo badan oo uu ku bixinaayo deegaan wax barasho oo taageer leh
- Waxa ay samayn karaan waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda sida ay u taageeraan deegaanka wax barashada, oo ka mid ah laakiin uusan ku koobneyn la socodka kasoo xaadiritaanka dugsiga iyo dhammaystirka shaqada guriga (homework), ku dhiiri-gelinta ka qayb-qaadashada hawlaha kaxsaa manhajka, ka qayb-qaadashada hawlaha guriga oo taageero hawlaha galaska, iskaa wax u qabso ahaan looga shaqeeyo dugsiga, iyo ka qayb-qaadasahda nidaamyo go'aan gaaris marki la joogo dugsiga.

Si aad u hesho faahfaahin iyo khayraad dheeraad ah, tag websaytka Qayb-qaadashada Qoyska (Family Engagement) oo laga heli karo <https://sdusdfamilies.org/>.

OGOOW: Sharciga Wax Barashada Kaaliforniya ma u fasaxaayo dugsi inuu u sheego waalid ama qofka mas'uulka ka ah ardayga... ama ma ogalaanaayo qayb-qaadashada waalid ama qofka mas'uulka ka ah ardayga xaga wax barashada cunug hadii ay ka hor imaaneyso amar joojin, amar ilaalin, ama amar loogu talagalay haynta ama booqashada uu amro maxkamad awood xukumid karti u leh, oona wada saxsan.

Wal-walka Iyo Su'aalahaa Waalidka

Xafiiska Hubinta Tayada (Quality Assurance Office [QAO]) ayaa qaabilan su'aalahaa, walwalka, iyo cabashooyinka rasmiga ah ee waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga, wuxuuna ku qaabilaa waqtii fiican iyo si waafaqsan nidaamaya iyo hab-raaca degmada dugsiga ee khuseeyo. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa la xiriiri karaan QAO si looga caawino xalinta cabashooyinka aan laga xalinin dugsiga.

Waxaa hab-maamuusyada iyo hababka wax-qabadka QAO lasoo geliiya www.sandiegounified.org/academics/quality_assurance_office. Si aad u hesho caawinaad, la xiriir QAO oo laga heli karo 619-725-7211 ama qualityassurance@sandi.net.

Adeegyada Turjumaadka

Adeegyada turjumaadka oo lagac la'aan ah ayey waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ku heli karaan luuqado badan. Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda la xiriiri karaan dugsiga cunugooda si ay u helaan maclumaad.

Koorsaha Wax Barashada, TK-12

California Ed Code ayaa u baahan in "Guddiga xukumo degmo dugsi kasta inuu diyaariyo iyo inuu arkiifyo ku haayo siday dad weynaha u baaraan koorsooyinka wax barashada uu maamulkeeda u qorey dugsiyada." Koorsaha Wax Barashada TK-12 ee Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego wuxuu yahay hal asal akhbaar oo muhiim ah oona ku saabsan barnaamijka wax barashada ee degmada dugsiga, sharaxaadka koorsaha iyo qalabka wax barashada oo la ogalaadey. Wuxuu kaloo soo bandhigaa akhbaar ku saabsan wax yaabaha ay u baahan yihiin gobolka iyo degmada dugsiga, imtixaanada ardayda, iyo wax yaabo dheeraad ah. Waxaa Koorsaha Wax Barashada (Course of Study) oo diyaar ah laga eegi karaa websaytka degmada dugsiga oo laga heli karo www.sandiegounified.org/graduation.

Qorsheynta Qalin-jabinta iyo Dugsiga Sare Ka Dib: Wuxuu arday kasta oo ku jiro fasalada 7-12 sannad kasta ka qayb-qaadan doonaa doorashada koorsooyinka uu dhigan doono sannad dugsiyeedka soo socda. La'taliyaasha dugsiga ayaa u sheegi doono ardayda wax yaabaha qalin-jabinta looga baahan yahay, koorsooyinka Wax Barashada Shaqada Farsamada (Career Technical Education [CTE]), wax yaabaha loo baahan yahay in lagu galoo jaamacada iyo ikhtiyaaraada dugsiga sare kadib oo kale oo loogu talagalay ardayda iyadoo la raacayo sharciga gobolka. Si looga qalin-jabiny dugsiga sare ee degmada dugsiga, waa inuu ardayga dhammaystirka shaqada koorsooyinka "a-g", shaqada koorsooyinka mawduuca oo dheeraadka ah oo looga baahan yahay gobolka, ugu yaraan 44 buundo, iyo fasalada 9'laad ilaa 12'naad oo lagu helo Celceliska Heerka Buundooyinka Miisaanka Badan (Weighted Grade Point Average [WGPA]) oo ah ugu yaraan 2.0. Si aad u hesho maclumaad faahfaahsan oo ku saabsan shuruudaha qalin-jabinta ee degmada dugsiga, tag www.sandiegounified.org/graduation.

Degmada dugsiga waxay soo bandhigtaa barnamij Wax Barashada Jaamacada, Shaqada iyo Farsamada (College, Career and Technical Education [CCTE]) oo ku dhex-jiro koorsooyin isku xiga oo dhowr sanno oo isku daraayo tacliinta asalka ay iyo cilimiga farsamada iyo shaqada sida ardayda loosoo bandhigo wado ay u mari karaan wax barashada iyo shaqada dugsiga sare kadib. Barnamij wax barasho oo CCTE wuxuu fulin karaa wax yaabaha "a-g" oo looga baahan yahay

UC, sababi karaa shahaado laga aqoonsan yahay shaqooyinka la xiriira wax barashada, shahaado xaga heerka dugsiga sare kadib, shahaadada kulliyada (associate degree) iyo/ama shahaadada jaamacada (baccalaureate degree). Tag <https://sites.google.com/sandi.net/ccte/home> si aad u hesho maclumaad dheeraad ah.

Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waxay xaq u leeyihiin in wax looga sheego qorshooyinka wax barashada iyo shaqada ardayga ee degdega ah iyo waqtiga dheer. La'taliyaaha dugsiga ee ardayga ayaa bixin karo maclumaadkaan. Intas waxaa dheer, waxaa khayraadka dugsiga sare ka dib ka mid ah:

- Nidaamka Jaamacada Gobolka Kaaliforniya: www.2calstate.edu
- Nidaamka Jaamacada Kaaliforniya: <https://admission.universityofcalifornia.edu/>
- Nidaamka Degmada Kulliyada Bulshada San Diyeego: www.sdccd.edu
- Kalmada dhaqaalaha (Financial aid): www.studentaid.gov iyo www.csac.ca.gov/

Ikhtiyaarka Doorashada Dugsiyada Aan Amaan Lahayn

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda dhigato dugsiyo lagu tilmaamey si joogto ah inay khatar u yihiin waa la ogeysiin doonaa fursada ay u leeyihiin inay ka wareegaan dugsiga 14 maal mood ka hor intuu bilaabanin sannad dugsiyeedka. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda noqday mid lagu dhibaateeyey dambi xoog la isticmaaleyt asagoo jooga dhulka dugsiga waxay xaq u leeyihiin inay soo gubiyaan inay ka'wareeg dugsiga siday u dhiqtaan dugsi kale oo ku yaalo gudaha degmada dugsiga. Degmada dugsiga waxay xaaladaha khaaska oga fikirtaa si arrin'ba arrinteeda iyo la xiriirtaa wakaaladaha sharci fulinta ee deegaanka markey ku haboon tahay. Waxaa codsiyada laga soo gudbin karaa dugsiga cunuga ama in la'la xiriilo Dugsiyada Xaafada iyo Xulashooyinka Is-qoritaanka (Neighborhood Schools and Enrollment Options) oo laga heli karo 619-260-2410 ama eoption@sandi.net.

Wareega Degmada Dugsiga Gudaheeda Rukhsada Kasoo Xaaddiritaanka Degmada Dugsiga Gudaheeda

Hishiiyada rasmiga ah oo ka dhheeeyaa Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego iyo degmada dugsiyada kale oo Deegaanka San Diyeego ayaa sababo gaar ah dartood ogol kala wareega ardayda degmada dugsiyada dhextooda. Waa in lasso gudbiyo codsi Rukhsada Kasoo Xaaddiritaanka Degmada Dugsiga Gudaheeda si loo fududeeyo hawsha. Sababaha gaarka ah ee loo wareego iyo foom codsi ayaa ku jiro intartekha waxaana laga heli karaa www.sandiegounified.org/departments/neighborhood_schools_and_enrollment_options ama waxaa

Ogeysiiska Dugsiyo Duwan

Sharciga gobolka Kaliforniya wuxuu dugsiyada u ogolaanayaa inay soo bandhigaan dugsiyo duwan. Wuxuu Sharciga Wax Barashada "dugsi duwan" (alternative schools) ku qeexayaa inuu yahay dugsi ama koox galaa gooni ah oo ku dhix jiro dugsi oo hawshiisa loo fuliyo hab loo qorsheeyay in lagu:

- Badiyo fursada loogu talagalay ardayda inay yeeshaan qiyamka wanaagsan oo isku kalsoonida shakhsiga, karti, naxariis, wax lama-filaan ah la imaan karo, ku badan tabta iyo

wax xalinta, geesi-nimo, wax cusub soo saar, mas'uuliyada, iyo farxada

- Garto in wax barashada ugu wanaagsan ay dhacdo markuu ardaya wax u barto rabitaan uu qabo inuu wax barto
- Sii wado xaadal wax barasho oo badinayso is dhiiri-gelinta ardayga iyo ku dhiiri-geliyneynso ardayga inuu raaco waxyaabaha uu gooni u xiiseynaya ama ay gooni u xiiseyneynso. Waxaa laga yaabaa inay wax yaabaahaan ay xiisaynayaan ay yihiin waxyaabo ay ardayda keligood iyo goonidood ku fikiraan ama waxaa laga yaabaa inay ka imaadaan wax ay soo jeediyeen macalimiinta waxyaabaha ay doortaan inay bartaan

• Badiyo fursadaha loogu talagalay macalimiinta, waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda, iyo ardayda inay si iskaashi ah u samayaan habkay wax barashada u socoto iyo mawduuc yadeeda. Fursadaan waa inuu ahaado nidaam socdo iyo joogto ah.

• Badi fursada loogu talagalay ardayda, macalimiinta, iyo waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda inay si socoto oga fici celiyaan aduunka is beddelaayo, oo kamid ah laakiin aan ku xadidnayn jaaliyada oo dugsiga ku yaalo

C. Nidaamyada Kala-sooca, Cabsi-galinta, Xoog-sheega

Ogeysiis ah inaa Ardayda la Kala-soocikarin

BP/AR 5145.3

Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego (San Diego Unified School District) waxay u go'an tahay fursad is-le'eg oo loogu talagalay kuli shakhsiyada xaga wax barashada. Barnaamijiyada iyo hawlahaa laga sameeyo Degmada Dugsiga ma lahaan doonaan kala-sooc, dhibaateyn, cabsi-galin iyo xoog-sheeg oo sababta ay u dhici karaan noqon karta mid ka mid ah calaamadaha soo socda oo si dhab ah u jira ama loo maleeysto: da'da, abtirsiga, midabka, xanuunka maskaxada ama curyaanimada, jinsiyada, kooxda jinsiyada uu qofku isku tilmaamo, jaadka uu qofku yahay, jaadka uu qofku muujiyo, jaadka uu qofku isku tilmaamo, maclumaadka hidaha (genetic information), xaalada lagu joogo wadanka (immigration status), xaalada guurka ama waalidnimada, xaalada caafimaadka, dhalashada, qaranka laga soo jeedo, jinsiga dhabta ah ama uu qofka isku garto, jinsiga la iska dhigo, qoloda, diinta ama xirirka uu qof la leeyahay qof ama dad leh hal ama wax ka badan sifooinkaan.

Ardayda ku xad-gudbo nidaamkaan waxaa laga yaabaa inay hoos yimaadaan dishibiliin, gaarayso iyo ku jiro cayrin, ayadoo la tixraacyo nidaamka degmada dugsiga, habka loo qabto hawlahaa la xiriira maamulka iyo sharciga gobolka. Wuxuu sharcigaan khuseyn doonaa dhammaan waxyaabaha la xiriira hawlahaa dugsiga ama imaanshaha dugsiga ee dugsi hoos imaadlo xukunka koormeeraah sare ee degmada dugsiga.

Waxay shaqaalaha ku xad-gudbo nidaamkaan hoos imandoonaan dishibiliin gaarayso iyo ku jiro ruqsayn. Ficil kasta oo edbin ah waa inuu waafaqsanaado sharciyada dawlada, iyo gobolka, iyo/ama heshiisyyada gorgortanka oo wadajirka lagu yahay oo ku haboon.

Nidaamka Kasoo jeedka Xoog-sheega Iyo Cabsi-galinta

BP/AR 5131.2

Xoog-sheegashadu waa dhaqan dagaal badan oo aan la rabin oo ku lug leh dheelitirnaan la'aan oo dhab ah ama loo maleeyo. Inta badan wuu soo noqnoqdaa dhaqanka amu wuxuu leeyahay awooduu kuusoo noqnoqdo si tartiib tartiib ah. Xoogsheegashadu waxaa ka mid ah falalka sida hanjabaadka, faafinta wararka xanta ah, weerarka qofka loo weeraraayo si toos ah (physically) ama hadal ahaan, iyo in qof laga saaro koox iyadoo ay ulakac tahay.

Waxaa Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ka go'an inay usoo bandhigto dhammaan ardayda deegaan wax barasho oo amni leh oo qof walba loola dhaqmaayo si intiraam leh, iyo aan wax la yeeleynin jirka iyo dareenkun qofna. Xoog-sheega ama cabsi-galinta oo nooc walbo ah ayaa mamnuuc ka ah dugsiga iyo dhacdooyinka la xiriira dugsiga (oo ka mid ah dhacdooyinka dugsiga banaankiisa ah, hawlahaa la qabto uu dugsiga soo jeediyo, basaska dugsiga iyo wax kasta oo dhaco oo la xiriira hawsha dugsiga) ama kuwa ka baxsan saacadaha la dhigto dugsiga iyadoo ay ujeeddadu tahay in la sameeyo xili ka mid ah xiliyaasha hore loo sheegay. Waxay kaloo degmada dugsiga mamnuucday in dad kale lagu dhiiri-geliyo, ama lagu caawino, ama lagu qasbo, ama lagu hago inay sameeyaan waxyaabaha la xiriira xoog-sheega, xoog-sheega intarneetka (cyberbullying) ama cabsi-galinta.

Falalka noocas waxaa ku jiro kuwa si macquul ah loo tixgeliyo oo sababtooda noqoto sifooiyin dhab ah ama loo arko oo ku jiro laakin aan ku xadidnayn qoloda, diinta, caqiqidada, midabka, xaalada guurka, xaalada waalidiinta, xaalada hadii uu ciidamada ku jiri jiray, jinsiyada, nooca jinsiyada, jaadka qofku uu muujiyo ama isku arko, abtirsiga, qaranka asalka u ah, kooxda jinsiyeed la isku tilmaamo, da'da, itaal-la'aanta maskaxda ama jirka ama wixi sifo kale oo lagu garto.

Xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha oo arko, maqlo ama hadii kale marqaati ka noqdo fici noocas ah ama asaga ama ayada loo soo gudbiyo ficilada noocas waa inay la imaadaan ficil deg-deg ah iyo ku haboon sida loo istaajiyoo dhaqanka noocas iyo looga hortago dib u dhicitaan kiisa.

Ardayda arko, maqlo, ama sida kale marqaati

ka noqdo fici noocas waa inay u gudbiyaan xubin shaqaalaha. Waxaa waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo kuwa soo boodo degmada dugsiga lagu dhiiri-gelinayaa inay dhaqamadaan u sheegaan qof ka tirsan shaqaalaha. Xaga dugsi kasta, maamulaha ama qofka u xilsaaran maamulaha aaya mas'uul ka ah inuu helo iyo si dhakhso ah u baaro cabashooyinka sheeganaayo xadgudubyada nidaamkaan. Waa mamnuuc nooc kasta oo aargoosi ah oo looga jawaab-celinaayo war-bixinta fallalka noocas ah. Waxaa maclumaad dhammaystiran laga heli karaa https://sandiegounified.org/about/anti_bullying/anti_bullying_and_intimidation

Sida Loo Gudbiyo War-bixinta Xoog-sheega ama Dacwada Xoog-sheega

Ardayda, iyo waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waa inay gudbiyaan fal kasta oo xoog-sheeg ah oo ay u gudbiyaan shaqaalaha rasmiga ee dugsiga oo mas'uul ah, sida maamulaha dugsiga, maamule ku xigeynka, la'taliye, ama macalin. Sidoo kale waxaa war-bixinta laga xareyn karaa ciwaanka intarneetka [www.sandiegounified.org/bullying](https://sandiegounified.org/bullying). Waxaa sidoo kale la'l'a xiriiri karaa Xafiiska Hubinta Tayada (Quality Assurance Office [QAO]) ee degmada dugsiga oo laga heli karo 619-725-7211 ama qualityassurance@sandi.net.

Hadii qofka laga cabanaayo uu yahay maamulaha ama maamulka dugsiga, waa in ardayga, waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayda, qofka ka tirsan shaqaalaha ama qofka ka baxsan uu si toos ah war-bixinta ugu gudbiyo QAO. QAO aaya qaban doono baaritaan xaga cabashada oo deg-deg ah, dhammaystiran iyo eex la'an ah iyo waxay isku dayi doonaa inay xaliyaan arrinta.

Maamulaha ama QAO aaya diri doono jawaab qoran oo ku saabsan waxyaabaha ka soo baxay baaritaanka iyo dabagal kiisa marki uu dhammaado baaritaanka. Qofka cabashada qabo wuxuu waqtii 15 maal mood gudahooda ah ka dib marki uu helo jawaabta qoran codsan karaa racfaan khuseeyo go'aanka. Hadii ay degmada dugsiga go'aamiso in lagu xad-gudbey

nidaamyada degmada dugsiga, waxaa laga yaabaa in ardaya laga buriyo dugsiga in muddo ah ama in si toos ah looga ceyriyo dugsiga.

Waxaa talaabooyinka wax lagu haggaajinaayo loogu talagali doonaa in lagu istaajiyoo xoog-sheega iyo/ama cabsi-galinta, ama in looga hortago dib u dhicitaankooda, iyo in wax looga qabto saamaynta ay ku yeeshaan ardaya ay ku dhacaan. Dabagal ayaa la'la sameyn doonaa ardaya si loo hubiyo in la joojiyey dhibaateeynta iyo inayans jirin aargudasho.

Inta lagu jiro xiliigaan xalinta aan rasmiga ahayn, waxay ardayda ama waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda dooran karaan inay gudbiyaan Cabashada Guud ee loo yaqaano Uniform Complaint oo loogu talagalay kala-sooca, dhibaateynta, cabsi-galinta, iyo xoog-sheega lagu sameynayo ama ku dhacayo dabaqad ama koox la ilaalinaya (hadii ay ku haboon tahay). Arag "Sida Loo Gudbiyo Cabashada Guud" oo ku jirto qaybtaan si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

Arday Kor U Hadlaayo (Students Speaking Out)

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego iskaashi la gashey barnaamijka *San Diego County CrimeStoppers* "Students Speaking Out" si loo kordhiyo amniq dugsiyada iyo bulshadaha. Wuxuu barnaamijka loo yaqaano Students Speaking Out siyyaa ardayda hab amni leh iyo qarsoodi ah ay ku sheegi karaan dembiyada dugsiga, oo ka mid ah xoog-sheega, rabshada, iyo daroogada ama ku xadgudubka khamriga, iyadoo aan laga cabsaneyn aargudasho. Waxaa war-bixinada lagu sameyn karaa hadii la waco 1-888-580-TIPS (8477), fariin taleefoon loo diro (text) 274637, ama la tago ciwaanka intarnetka
<http://www.studentspeakingout.org>.

Sida Loo Gudbiyo Cabashada Guud

BP/AR 1312.3

Inta lagu jiro xili aan si rasmi ahayn loo xalinaayo arrinta dhacday, waxay ardayda ama waalidiinta, ama dadka ardayda masuulka ka ah si rasmi ah u gudbin karaan Cabashada Guud (UCP) oo loogu talagalay kala-sooca, dhibaateynta, cabsi-galinta, iyo/ama xoog-sheega la xiriira galma (waxaa kale oo ka mid ah faraxumeynta la xiriira galma); iyo/ama kala-sooca, dhibaateynta, cabsi-galinta, iyo xoog-sheega lagu sameeyo ama ku dhaco dabaqad ama koox la ilaaliyo.

Soo Gudbinta Cabasho

Waxaa cabashada soo gudbin karo arday ama waalid ama qofka mas'uulka ka ah ardayda waxayna kusoo gudbin karaan Foomka Cabashada Guud, oo laga heli karo dugsiga, Xafiiska Hubinta Tayada (Quality Assurance Office), Xafiiska Waafaqsanaanta Cabashada Guud, ama bogga intarnetka ee Cabashada Guud ee degmada dugsiga oo laga heli karo
https://sandiegounified.org/departments/uniform_

[complaints.](#)

Baaritaanka

Koormeeraha sare ama qofka u qaabilسان ayaa hubin doono in cabashooinka la helo lagu baaro si waafaqsan xeerarka maamulka degmada dugsiga. Shaqalo kasta oo ka shaqeeyo dugsiga oo marqaati ka noqdo dhaqan sharci doro ah, oo ka mid ah kala-sooc, dhibaateyn, cabsi-galint, aargudasho, iyo/ama xoog-sheeg, ayaa si degdeg ah u dhex-galaayo si loo istaajiyoo arrinta dhaceysyo marki si amni leh loo sameyn karo.

Waa la baari doonaa dhammaan cabashooinka, iyo war-bixin qoran ee go'aanka ayaa loo diri doonaa qofka cabashada qabo lixdan (60) maalmood gudahooda marki laga bilaabo helitaanka cabashada. Waxaa xiliiga lagu kordhin karaa heshiiska qofka cabashada qabo oo qoran. Qofka mas'uulka ka ah baaritaanka cabashada ayaa sameyn doono iyo dhammastiri doono baaritaanka isagoo u sameynayo si waafaqsan nidaamyada iyo hab-raaceena UCP'ga degmada dugsiga.

Wuxuu qofka cabashada qabo xaq u leeyahay inuu racfaan ku sameeyo go'aanka degmada dugsiga ee cabashooinka khuseeyo barnaamijyo iyo hawlo gaar ah oo hoos imaado UCP, ujradaha ardayda, iyo LCAP'ka wuxuuna racfaanka u dirayaa Waaxda Wax Barashada ee Kaliforniya (CDE) isagoo u maraayo inuu gudbiyo racfaan qoraal ah 15 maalmood gudahooda marki uu helo go'aanka degmada dugsiga. Waa inuu racfaanka la socdo koobiga cabashada asalkii hore la gudbiyay iyo koobiga go'aanka degmada dugsiga.

Si lacag la'an ah ayaa lagu heli karaa koobiyada Nidaamyada Cabashada Guud. Waa in Cabashooinka Guud (Uniform Complaints) loo gudbiyo:

Lynn A. Ryan

Isu-duweha Title IX iyo Qofka Qaabilسان Waafaqsanaanta Cabashada Guud

San Diego Unified School District
4100 Normal Street, Room 2129 San Diego, CA 92103
619-725-7225
lyran@sandi.net

War Bixinta Sanad Kasta Oo Nidaamyada Cabashada Guud (Uniform Complaint Procedures [UCP])

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diego (San Diego Unified School District) ugu horeyntii masuul ka tahay waafaqsanaanta shariyada iyo xeerarka dawlada iyo gobolka, oo ka mid ah kuwa la xiriira kala sooca sharci darada ah, dhibaateynta, cabsi-galinta ama xoog-sheega oo lagu sameeyo mid ka mid ah kooxa la ilaaliyo ee soo socda: da'da, abtirsiga, midabka, xanuunka maskaxda ama curyaanimada,

jinsiyada, kooxda jinsiyada uu qofku isku tilmaamo, jaadka uu qofku yahay, jaadka uu qofku muujiyo, jaadka uu qofku isku tilmaamo, maclumaadka hidaha (genetic information) xaalada lagu joogo wadanka (immigration status), xaalada guurka ama waalidnimada, dhalashada, qaranka laga soo jeedo, jinsiga dhabta ah ama uu qofka isku garto, jinsiga la iska dhigo, qoloda, diinta ama xiriirka uu qof la leeyahay qof ama dad leh hal ama wax ka badan sifooinka.

Barnaamijyada iyo hawlaho hoos imaado UCP ayaa ka mid ah Wax Barashada Dadka Weyn; Wax Barashada iyo Ammaanka Dugsiga Ka Dib; Wax Barashada Farsamada Shaqada Beeraha; Wax Barashada Farsamada Shaqada iyo Farsamada; Farsamada Shaqada; Tababarka Farsamada (Gobolka); Wax Barashada Farsamada Shaqada (Dawlada); Xannaanada iyo Horumarka Carurta; Wax Barashada loogu talagalay in Ardaya Wax Loogu Kabo; Xiisooyinka Wax Barashada Aan Waxba La Baranin; Wax Barashada Ardayda Dad Aan Waalidkood Ahayn Korsadaan, Wax Barashada Ardayda Guri La'aanta Ah, Wax Barashada Ardayda Hada Ka Hor Aadey Maxkamada Ilmaha oona xiliiga hada lagu jiro ku qoran degmad dugsi, iyo Carurta Qoysaska Milatariga; Sharciga Arday Kasta Wuu Guileysanayaama Sharciga Hal Cunug Dib Loogama Tagaayo (Every Student Succeeds Act / No Child Left Behind [Titles I-VII]); Meel Macquul Ay Ardayda U Baahan Ku Nuujiyaa Ilmahooda; Qorshooyinka Masuulyada iyo Xukunka Deegaanka (Local Control and Accountability Plans [LCAP]); Wax Barashada Ardayda Meel Kale U Guuro Shaqo Darteed (Migrant Education); Daqiqadaha La Dhigo Wax Barashada Jir Dhiska; Waxyaabaha Loo Habeyyo Ardayda Urka Leh Ama Waalidka Ah; Ujrada Ardayda; Xarumaha iyo Barnaamijyada Shaqooyinka Deegaanka; Qorshooyinka Dugsiga Oo Loogu Talagalay Guusha Ardayda; Qorshooyinka Amniq Dugsiga; Guddiyaasha Goobta Dugsiga (School Site Councils); Fasalka Xannaanada Ee Gobolka (State Preschool); Arrimaha Caafimaadka iyo Aminiga Dugsiga Xannaanada Ee Gobolka Oo LEAyaasha Laga Dhaafey Shatiga.

Maclumaadka Xiriirka:

Lynn A. Ryan, Qofka Qaabilسان Waafaqsanaanta Cabashada Guud (Uniform Complaint Compliance Officer)

San Diego Unified School District
4100 Normal Street, Room 2129
San Diego, CA 92103
619-725-7225
lyran@sandi.net

D. Faraxumeynta La Xiriirta Galmada Ee Ardayda Iyo Nidaamka Cabashada

BP/AR 5145.7

lryan@sandi.net

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego u go'an tahay inay dugsiyada ka dhigto kuwa xor ka ah dhibaateynta faraxumeynta iyo kala-sooca. Dhibaateynta faraxumeynta waxaa waaye nooc kala-sooc jinsiga oo hoos imaadoo Title IX oo Beddelka Sharciyada Wax Barshada (Education Amendments) oo Sharciga Xuquuqda Shacabka ee 1972 (Civil Rights Act of 1972) iyo waxaa mammuucayo sharciyada dawlada iyo gobolka labadaba. Degmada dugsiga wey mammuucday dhibaateynta faraxumeynta ardayda oo ka imaato arday, shaqaalo, ama dad kale, oo ka dhacdo dugsiga ama wax-qabad dugsiga kafaalo ama dugsiga la xiriira. Dhibaateynta faraxumeynta waxaa lagu qeexaa gudaha Sharciga Wax Barashada Kaaliforniya inuu yahay horusocod isu-taga oo aan lasoo dhawayn; codsi wax yaabo la xiriira isu-taga; ama dabci isu-tag oo ah mid hadal, aragti, ama dhaqan jirka, uu sameeyay qof ka socda ama jooga goobta wax barashada. Sharciga dawlada ayaa u macneeyo faraxumeynta la xiriirta galmada inuu ku jiro (1) shaqaalo degmada dugsiga oo ku xiraayo bixinta caawinad, faa'iido, ama adeeg degmada dugsiga ka qayb-qaadashada uu qof ka qayb-qaadanaayo dhaqan aan la rabin oo la xiriiro galmada; (2) dhaqanka aan raali laga ahayn oo uu go'aamiy qof macqul ah inuu yahay mid aad u daran, soo noqnoqonaayo, iyo sida xaqiqadu tahay gef ah oo u diideysa qof gelitaan loo siman yahay ee barnaamij amal hawl wax barasho ee degmada dugsiga; ama (3) taabashada la xiriirta galmada, rabshadaha ka dhex dhaco dadka is shukaansanaayo, rabshadaha guriga (domestic violence), ama dabagalka dadka (stalking).

Dhaqan kasta oo la mammuucay oo ka dhaca dugsiga banaankiisa ama meel ka baxsan barnaamijada iyo hawlahaa uu dugsiga kafaalo yaa loo tixgeliin doonaa inay yihiin faraxumeynta la xiriirta galmada oo ku xadgudbaayo nidaamka degmada dugsiga haddii ay si socoto u saamayso ama ay u abuurto deegaan dugsi oo cadaawad leh qofka soo cabanaayo ama wax lagu yeelay dhaqanka..

Isu-duweha Title IX

Qofka soo socdo ayey degmada dugsiga u qoondeysay inuu yahay shaqaalaha mas'uulka ka ah inuu isku dubarido dadaalkeeda ay ku waafafeysyo Waxyaabaha Laga Bedelay Wax Barashada Ee 1972 Ee Kaaliforniya iyo Sharciga Wax Barashada Kaaliforniya, iyo inuu sidoo kale baaro iyo xaliyo cabashoohinka faraxumeynta la xiriirta galmada oo hoos imaadoo Nidaamyada Cabashada Guud:

Lynn A. Ryan

Title IX and Uniform Complaint Officer
4100 Normal Street, Room 2129
San Diego, CA 92103
(619) 725-7225

Soo Sheegitaanka Cabashooyinka

Ardaygii ama waalidkiin ama qofka mas'uulka ka ah ardayga oo aaminsan in arday lagu sameeyay faraxumeynta la xiriirta galmada oo uu qofka ku sameeyeyn'ya yahay arday kale, shaqaalo, ama qof kale ama marqaati ka noqdey faraxumeynta la xiriirta galmada ayaa si aad ah loogu dhiri-gelinaya inuu arrinta dhacday u sheego macalin, maamule, isu-duweha Title IX ee degmada dugsiga, ama shaqaalo kasta kale oo la heli karo. Hal maal mood oo la dhigto dugsiga gudaheed oo laga bilaabaayo helitaanka war-bixin noocas ah, maamulaha ama shaqaalaha kale ayaa war-bixinta u gudbin doono Isu-duweha Title IX ee degmada dugsiga. Shaqaalo kasta oo ka shaqeeyo dugsiga oo arko faraxumeynta la xiriirta galmada oo dhacayso oo uu arday ku lug leeyahay, hal maalin oo la dhigto dugsiga gudaheeda, inuu wuxuu arkey u sheego maamulaha ama Isu-duweha Title IX, iyadoo aan la eegayn hidii uu qofka loo maleynaayo in wax la yeelay gudbiyo ama uusan gudbinin cabasho rasmi ah.

Marka war-bixin ama cabasho faraxumeynta la xiriirta galmada ay khuseyo wax ka dhacay dugsiga banaankiisa, Isu-duweha Title IX ayaa qii'meyn doono hadii uu waxa dhacay abuurista doono ama wax ku kordhin doono abuurista deegaan dugsiga ay ka jirto cadaawad. Hadii uu isu-duweha Title IX go'aamiyo inay abuurmi karto deegaan cadaawad ka jirto, waxaa cabashada loo baari doonaa iyo loo xalin doonaa isla habka hadii waxa dhacay ee mammuucu ah uu ka dhacay dugsiga.

Waa mammuuc dhaqanka ama ficiika aangoosiga ah oo lagu sameeyo qof kasta oo sheego, gudbiyo cabasho, ka marqaati fura, ama sida kale taageero qof soo cabanaayo markuu sheeganaayo faraxumeynta la xiriirta galmada.

Talaabooyinka Edbinta

Arday kasta oo ka qayb-qaato faraxumeynta la xiriirta galmada iyo rabshada galmada iyadoo la joogo dugsiga ama hawl uu dugsiga kafaalo ka yahay ama la xiriito dugsiga ayaa hoos imaan doono talaabooyin edbin ah. Xaga ardayda ku jiro fasalada 4'raad ilaa 12'naad, waxaa laga yaabaa inuu talaabooyinka edbinta ka mid noqdo burin iyo/ama cayrin.

Shaqaalo kasta oo lagu ogaado inuu ka qayb-qaato faraxumeynta la xiriirta galmada ama galmada rabshada oo lagu sameeyo arday kasta ayaa hoos imaan doono edbin oo gaareyso iyo uu ka mid noqon doono cayrin si waafaqsan nidaamyada, sharciyada, iyo/ama heshiisyyada gorgortanka oo wadajirka oo khuseeyo.

Haynta Diiwaanada

Waxay degmada dugsiga hayn doontaa diiwaanka dhammaan kiisaska lasoo sheego ee faraxumeynta la xiriirta galmada si ay u awood siiso degmada dugsiga inay la socoto, wax oga qabato, iyo oga hortago dhaqanka dhibaateynta ee soo noqnoqonaayo xaga dugsiyada degmada dugsiga.

Nidaamyada Cabashada Faraxumeynta La Xiriirta Galmada Ee Title IX

Marka la helo war-bixin faraxumeynta la xiriirta galmada, Isu-duweha Title IX ayaa u sheegi doono qofka soo cabanaayo nidaamka loogu talagalay soo gudbinta cabasho rasmi ah. Hadii uu qofka loo maleynaayo in wax la yeelay doorto inuu soo gudbinin cabasho rasmi ah, Isu-duweha Title IX ayaa weli xarayn doono cabasho rasmi ah marki ay noqoto xaaladaha uu jiro wax khatar ku ah amniga. Waxaa intaa dheer, waxaa laga yaabaa inuu Isu-duweha Title IX xareeyo cabasho rasmi ah iyadoo ay jiraan xaalado kale siday ogol yihiin xeerkarka Title IX. Marki ay jiraan xaaladahaan oo kale, qofka loo maleynaayo in wax la yeelay kama mid aha kiiska laakiin wuxuu heli doonaa ogeysiisyo. AR 5145.71

Talaabooyin Wax Lagu Taageeraayo

Xitaa hadii aan la gudbinin cabasho rasmi ah, Isu-duweha Title IX ama qofka u xilsaaran ayaa si dhakhsa ah ola xiriiri doono qofka cabanaayo si looga hadlo talaabooyinka wax lagu taageeraayo ee jiro oo aan ahayn kuwa edbin ah, ciqaab ah, iyo si aan macqul ahayn culeys u saareynin qofka kale. Waxaa laga yaabaa inuu talaabooyinka noocas ah ka mid noqdo, laakiin uusan ku koobnayn, la'talin, bedel la xiriiro koorsaha, wax bedel khuseeyo jadwalada galaaska, xiriirkha oo labada dhinacba laga xadido, amni ilaalinta oo la kordhiyo, iyo la socoshada qaar ka mid ah meelaha dugsiga. Wuxuu Isu-duweha Title IX tixgeliin doonaa waxyaabaha uu rabo qofka cabanaayo iyadoo la eegaayo talaabooyinka wax lagu taageeraayo.

Oga Saarista Dugsiga Si Degdeg Ah: Si ku xiran wax degdeg ah, waxaa laga yaabaa inay degmada dugsiga ka saarto arday barnaamij ama hawl wax barasho ee degmada dugsiga, iyadoo ay ku xiran tahay inay degmada dugsiga sameyso baaritaan amniga iyo halista ee gaar ah; go'aamiso inay ka saarista xaq tahay maadaama ay jirto halis degdeg ah oo ku wajahan caafimaadka jirka ama amniga arday kasta ama qof kale oo ka imaaneysyo cabashooyinka; iyo ay siiso ardayga ogeysiiln iyo fursad uu si degdeg ah ka saarista ka dib oga soo horjeesto go'aanka. Amarkaan lagu saaraayo ardayga waxbo kama

bedelaayo xuquuqda uu ardayga ku leeyahay Sharciga Wax Barashada Ee Ardayda Itaal-la'aanta (Individuals with Disabilities Education Act) ama Qaybta 504 Ee Sharciga Baxnaanista Ee 1973 (Section 504 of the Rehabilitation Act) of 1973.

Hadii uu shaqaale degmada dugsiga yahay qofka la eedayaayo, waxaa laga yaabaa inuu maamulka ka fadhiisiyo shaqada inta ay ay socoto hawsha cabashada rasmiga ah.

Diiditaanka Cabashada

Isu-duweha Title IX ayaa diidi doono cabasho rasmii ah hadii wawa loo malaynaayo inuu dhacay uusan u dhigmin faraxumeynta la xiriita galmada sida lagu qeexay gudaha xeerarka dawlada. Wuxuu sidoo kale Isu-duweha Title IX diidi doonaa cabasho kasta oo wawa loo malaynaayo inuu dhacay uusan ka dhicin barnaamij ama hawl wax barasho ee degmada dugsiga ama uu ku dhicin qof jooga Mareykanka.

Waxaa laga yaabaa inuu Isu-duweha Title IX diido cabasho rasmii ah hadii uu qofka soo cabanaayo si qoraal ahaan ah ku ogeysiyo degmada dugsiga inuu qofka soo cabanaayo rabo inuu la noqdo cabashada ama wax kasta oo loo malaynaayo inuu dhacay oo ku jiro cabashada; qofka la eedayaayo mar dambe kuma qorno ama kama shaqeeyo degmada dugsiga; ama duruufu ku filan ayaa u diidaayo degmada dugsiga inay ururiso cadayn ku filan si ay ku gaarto go'an khuseeyo cabashada.

Marka la diido, Isu-duweha Title IX ayaa si degdeg ah u diri doono ogeysiis qoran oo ka waramaayo diiditaanka iyo sababaha loo diiday, isla hal mar ayuuna u diri doonaa labada qof iyo wuxuu u sheegi doonaa xaqaa ay u leeyihii inay racfaan ku sameeyaan diiditaanka cabasho rasmii ah ama eed kasta oo ku jiro cabashada wuxuuna u sameyn doonaa si waafaqsan nidaamyada racfaanka oo lagu sharaxey qaybta "Racfaanka" oo ku taalo hoos.

Hadii la diido cabasho, waxaa laga yaabaa in waxa sameeyay weli wax looga qabto Nidaamyada Cabashada Guud.

Nidaakma Wax Xalinta Aan Rasmiga Ahayn

Marki lasoo gudbiyo cabasho rasmii ah oo faraxumeynta la xiriita galmada, waxaa laga yaabaa inay degmada dugsiga soo bandhigto nidaam wax xalin oo aan rasmii ahayn, sida dhedhexaad, waxayna sameyn kartaa xili kasta oo ka horeysa gaaritaanka go'an khuseeyo mas'uulyada. Degmada dugsiga ogama baahnaan doonto qof inuu ka qayb-qato nidaamka wax xalinta aan rasmiga ahayn ama inuu ka tanaasulo xaqaa uu u leeyahay baaritaan amaa gar-naqa cabasho rasmii ah.

Waxaa laga yaabaa inay degmada dugsiga fududeyso nidaam wax xalin aan rasmii ahayn hadii ay degmada dugsigu:

• Usuu bandhigto kooxaha ogeysiis qoran oo sheegaayo waxyabaha laga eed sheeganaayo, shuruudaha nidaamka wax xalinta aan rasmiga ahayn, xaqaa in dib looga noqdo nidaamka aan

rasmiga ahayn iyo dib loogu noqdo nidaamka cabashada rasmiga ah, iyo natijjooyinka xun ee ka imaan karo ka qayb-qadashada nidaamka xalinta aan rasmiga ahayn, oo ka mid ah in la hayn doono iyo laga yaabo in la wadaago diiwaano.

- Ka hesho kooxaha ogolaansho ikhtiyaari ah iyo qoran si ay uga qayb-qataan nidaamka wax xalinta aan rasmiga ahayn.
- Aysan soo bandhigin ama fududeyin nidaam wax xalin aan rasmi ahayn si loo xaliyo eedeymaha ah inuu shaqaale ku sameeyay arday faraxumeynta la xiriita galmaada.

Ogeysiis Qoran: Hadii la soo gudbiyo cabasho rasmii ah, Isu-duweha Title IX ayaa siin doono kooxaha la yaqaano ogeysiis qoran oo ka waramaayo:

- Nidaamka cabashada ee degmada dugsiga, oo ka mid ah nidaamka wax xalinta aan rasmiga ahayn.
- Eedeymaha laga yaabo inay ka dhashaan faraxumeynta la xiriita galmaada oo ay ku jiraan faahfaahinta la ogyahay waqtigaas, oo ka mid ah aqoonsiga kooxaha, hadii la ogyahay, oo ku lug lahaa wixi dhacay; waxa dhacay oo loo malaynaayo inuu yahay faraxumeynta la xiriita galmaada; iyo taariikhda iyo meesha, hadii la ogyahay, oo waxa loo malaynaayo inuu dhacay.
- Hadii ay jiraan eedeymo Title IX ee cusub oo aan ku jirin ogeysiiskii hore laakiin soo baxo inta lagu jiro baaritaanka, Isu-duweha Title IX ayaa u sheegi doono kooxaha eedeymaha dheeraadka ah.
- Qoraal in qofka la eedenayo loo malaynaayo inuu mas'uul ka ahayn waxa loo malaynaayo inuu dhacay iyo in go'aanka khuseeyo mas'uulyada la gaari doono dhammaadka nidaamka cabashada
- Fursada inay kooxaha leeyihii la'taliye ay dooran karaan oo laga yaabo inuu noqdo qareen iyo awooda ay ku baaraan iyo dib ugu noqdaan cadaynta.
- Mamnuucida kasoo horjeedo in iyadoo la ogyahay la sheego waxyaboo been ah ama in iyadoo la ogyahay lasoo gudbiyo macluumaad been ah inta lagu jiro nidaamka cabashada.
- Magacyada qofka wax baarayo, qofka fududeynaayo nidaam aan rasmi ahayn, iyo go'an gaaraha. Hadii xili kasta ay noqotoba ay koox qabto walwal khuseeyo iska hor imaasho danta ama eex khuseeyo mid kasta oo ka mid ah dadkaan, kooxdaas si degdeg ah ha u ogeysiiso Isu-duweha Title IX.

Hab-raaca Baaritaanka

Intuu socdo nidaamka baaritaanka, qofka qaabilan baaritaanka ee degmada dugsiga:

1. ayaa siin doonaa labada kooxba fursad siman ay ku keensadaan marqaatiyaal, oo ka mid ah marqaatiyaal waxyabaha dhabta ah iyo kuwa khabir ah, iyo cadaynta kale ee ah inculpatory (u wanaagsan kooxda eedeyneyso kooxda kale) iyo exculpatory (u wanaagsan kooxda is difaaceysyo).

2. Ma xadidi doono awooda labada koox midkoodna oo ay oga hadli karaan eedeymaha ku socdo baaritaanka ama inay uruuriyaan iyo soo bandhigaan cadayn khuseyso.

3. Ayaa usoo bandhigi doono kooxaha fursado isku mid ah oo ay ku haysan karaan dad kale oo la joogo inta lagu jiro dacwada socota.

4. Qofka soo cabanaayo ama qofka la eedenaayo midkoodna uma xadidi doono doorashada ama joogitaanka la'taliye marki lagu jiro shir kasta ama dacwo kasta oo socota.

5. Ayaa usoo bandhigi doono ogeysiis qoran oo waqtii fiican koox oo ka qayb-qadashadeeda lagu martiqaddeeyama la filanaayo oo ka mid ah taariikhda, waqtiga, meesha, dadka ka qayb-qadanaayo, iyo ujeedadha dhammaan wareysiyasha baaritaanka ama shirarka kale.

6. Soo bandhigi doono cadaynta la helay oo ka mid ah baaritaanka oo la xiriita eedeymaha lagu soo qaadeey cabashada, wuxuuna usoo bandhigayaa labada koox iyo la'taliyaashhooda. Waxay kooxaha haysan doonaan ugu yaraan 10 maalmood inay jawaab qoran ugu soo gudbiyaan qofka wax baaraayo si uu oga fikiro inta ka horeysa dhammaystirka war-bixinta baaritaanka.

7. Ayaa si eex la'an ah u baari doono dhammaan cadaynta khuseyso, oo ka mid ah kuwa u wanaagsan kooxda eedeyneyso kooxda kale oo loo yaqaano inculpatory evidence iyo mida u wanaagsan kooxda is difaaceysyo oo loo yaqaano exculpatory evidence, iyo wuxuu go'aamin doonaa aaminaada isagoo u go'aamin doono hab aan ku salaysnay xaalada qofka oo ah qof soo cabanaayo, qof la eedeynaayo, ama marqaati.

8. Ayaa sameyn doono war-bixin baaritaan oo si cadaalad ah usoo koobeyso cadaynta la xiriita iyo wuxuu u diri doonaa kooxaha iyo la'taliyaashhooda ugu yaraan 10 maalmood ka hor go'aaminta mas'uulyada.

Waxaa la ilaalin doonaa xuquuqda waxyabaha gaarka u ah dhammaan kooxaha cabashada, waaana loo ilaalin doonaa si waafaqsan sharciyada gobolka iyo dawlada ee ku haboon.

Hadii uu qofka laga soo cabanaayo uu yahay shaqaale, waxaa la isticmaali doonaa xuquuqda lagu bixiyo heshiis gorgorten ee wadajir loo yahay oo khuseeyo, waxaana loo isticmaali doonaa ilaa xadka aysan ka hor imaanin shuruudaha Title IX.

Go'aan Quran

Koormeeraha sare ama qofka u qaabilan ayaa magacaabi doono qof gaaro go'an, shaqaale aan ahayn Isu-duweha Title IX ama qof ku lug leh baaritaanka. Ka dib marki war-bixin baaritaanka loo diro kooxaha laakiin intaan la gaarin go'an khuseeyo mas'uulyada, qofka gaaraayo go'aanka ayaa siin doono koox kasta fursad uu qoral ahaan ugu soo gudbiyo su'aalo la xiilo oo la weydiinaayo koox kasta ama marqaati kasta, wuxuuna siin doonaa koox kasta jawaabaha, iyo wuxuu u ogolaan doonaa su'aalo dabo-gal ah oo dheeraad ah.

Qofka gaaraayo go'aanka ayaa siin doono kooxaha isla hal mar go'aan qoran 60 maal mood gudahooda oo ka bilaabmaayo xiliga cabashada hadii uu qofka la eedeynaayo mas'uul ka yahay ama uusan ka ahayn waxa dhacay oo lagu eedeynaayo. Waxaa laga yaabaa in xiliga la dheeereeyo hadii ay jirto sabab fiican oo la socdo ogeysiis qoran oo lagu ogeysiinaayo qofka soo cabanaayo ama qofka is-difaacaayo in xiliga la dheeereeyay iyo sababta loo qaata talaabadaas.

Markii uu gaaraayo go'aankaan, wuxuu qofka gaaraayo go'aanka adeegsan doonaa halbeega loo yaqaano "preponderance of the evidence" oo dhigayo in qofka cabanaayo laga rabo inuu muujiyo inay u badan tahay inuu qofka is-difaacaayo sameeyay waxa lagu eedeynaayo, wuxuuna u adeegsan doonaa dhammaan cabashoojinka rasmiga ah ee faraxumeynta la xiriita galmaada. Isla halbeega cadaynta ayaa loo adeegsan doonaa cabashoojinka rasmiga ah ee ku socdo ardayda iyo shaqaalaha.

Waxaa go'aanka qoran ku jiri doono:

- Garashada eedeymaha oo laga yaabo inay ka dhashaan faraxumeynta la xiriita galamada
- Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan talaabooyinka hab-raaca ee la qaata, oo ka mid ah ogeysiyyada kooxaha, wareysiyada la'lla yeeshay kooxaha iyo marqaatiyaasha, booqashada dugsiga, hababka la isticmaalay in lagu uruuriyo cadayn kale, iyo dhageysiyyada la qabtey oo ka mid ahhaa nidaamka cabashada.
- Helitaanka xaqiyooyin taageeraayo go'aanka
- Gabagabada ku saabsan ku dhaqanka xeerka dhaqanka ee degmada dugsiga ama nidaamyada xaqiyooyinka
- Qoraal iyo sababaha oo eed kasta, oo ka mid ah go'aanka la xiriira mas'uuliyada, ciqaab kasta

oo edbin ah oo ay degmada dugsiga ku soo rogtog qofka is-difaacaayo, iyo hadii waxyabaha wax lagu hagaajinaayo oo loogu talagalay in lagu soo celiyo ama lagu ilaaliyo helitaan ama isticmaal siman ee barnaamijka ama hawsha wax barashada ee degmada dugsiga ayey degmada dugsiga usoo bandhigi doontaa qofka cabanaayo

- Nidaamyada iyo asalada la ogolyahay ee degmada dugsiga ay qofka cabanaayo iyo qofka is-difaacaayo ku qaadan karaan racfaan

Racfaanka

Labada dhinac midkoodba wuxuu racfaan ka qaadan karaa go'aanka ama diiditaanka ee degmada dugsiga ee cabasho rasmii ah ama eedeyn kasta hadii uu dhinac aaminsan yahay in hab-raac aan habboonayn uu saameeyay natijada, waxaa jiro cadayn cusub oo saamayn karta natijada, ama iska hor imaa sho danta ama eex xaga Isu-duweha Title IX, qofka ama dadka wax baaraayo, ama qofka ama dadka gaaraayo go'aanka ayaa saameeyay natijada.

Hadii lasoo gudbiyo racfaan, degmada dusiga:

- Ayaa qoraal ahaan ku ogeysiin doonto kooxda kale in la gudbiyey racfaan iyo si siman ayey labada kooxba ugu hirgelin doontaa nidaamyo racfaan
- Ayaa hubin doonto inuu qofka ama dadka gaaraayo go'aanka tababaray yihiin iyo inayans ahayn isla qofka ama dadka gaaro go'aanka oo gaarey go'aanka khuseeyo mas'uuliyada ama burinta, qofka ama dadka wax baarey, ama Isu-duweha Title IX
- Ayaa siin doonto labada kooxba fursad macquul ah iyo loo siman yahay ay kusoo gudbiyan hadal qoran oo lagu taageeraayo ama looga hor imaanaayo natijada

- Ayaa bixin doono go'aan qoran oo sharaxaayo natijada racfaanka iyo sababta natijada

- Ayaa isla hal mar labada kooxba usoo bandhigi doono go'aanka qoran

Waa in racfaan si qoraal ah loo gudbiyo 10 maal mood oo jadwalka ku jiro gudahooda oo laga bilaabaayo helitaanka ogeysiiska go'aanka ama burinta, oo sheegaayo sababaha racfaanka, iyo oo ka mid ah warqad kasta oo haboon oo laguu taageeraayo racfaanka. Lama tiixgelin doono racfaanada lasoo gudbiyo xiligaan kama dambayska ah ka dib.

Waa in go'aan qoran loo soo bandhigo kooxaha inta lagu jiro 20 maal mood oo ku jiro jadwalka gudahood oo laga bilaabaayo helitaanka racfaanka. Waxaa go'aanka degmada dugsiga racfaan looga qaadan karaa Waaxda Wax Barashada Ee Kaliforniya (California Department of Education) 30 maal mood gudahood oo laga bilaabaayo go'aanka qoran.

Waxaa intaas dheer, kooxaha midkoodba wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho u gudbiyo Xafiiska Loogu Talagalay Xuquuqda Shacabka Ee Waaxda Wax Barashada Ee Mareyanka 180 maal mood gudahooda oo laga bilaabaayo taariikhda dhaqanka la eedeynaayo ee ugu dhow. Waxaa qofka soo cabanaayo lagula talin doonaa waxyaboo kasta oo lagu xalin karo xaga sharciga shacabka, oo ka mid ah, laakiin aa ku koobnay, amarada digniinta, amarada joointa, ama waxyaboo kale oo lagu xalin karo ama amaro kale oo hoos imaa do sharciyada kasoo horjeedka kala-sooc ee gobolka ama dawlada.

Si aad u hesho faahfaahin dheeear ah, tag https://sandiegounified.org/about/policies_procedures/sextual_harassment.

E. Marki La Joogo dugsiga

Maamuleha dugsi kasta wuxuu aasaasaa sharcioy iyo xeerarka dugsi oo waafqaqo Nidaamka Edbinta Dib Wax U Hagaajinta ee degmada dugsiga sida loo hubiyo inuu jawliga dugsi ka madax banaan yahay wareer iyo carqalad. Fiiri Qaybta H (Section H) si aad u hesho faahfaahin dheeeraad ah oo ku saabsan Nidaamka Edbinta Dib Wax U Hagaajinta.

Ardayda waxaa laga rabaa inay waafqaan xeerarka dugsi, adeecaan kuli amarada, inay hawsha wax barashada kari karaan, xushmeeyaan macalimiinta iyo dadka kale ee maamulka ku jiro, iyo inay ilaaliyaan isticmaalka erreyada xun iyo edeb darada ah. Ardayda waxay masuul ka yihiin siday u dhaqmaan markay usoo socdaan iyo kasii socdaan dugsiga, goobta cayaarta, dhismooyinka dugsi, xiliga fasaxa oo la cayaaro iyo wax qabadka uu dugsiga kafaalo ka yahay. Waxaa dugsiyada loo ogolyahay inay qabatimaan shuruuc labis oo mam-nuucdo labiska "dharka la xiriira burcanimada" iyo/ama oga baahan ardayda inay ku labistaan yuunifoom oo dugsiga dhan loogu talagalay.

Waalidiinta/dadka ardayda masuulka ka ah

waa inay ilmahooda dib ula fiiriyaan nidaamka dishibiliinka iyo qaanuunada iyo xeerarka dugsi. Arag waa inay Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda la shaqeeyaan shaqaalaha rasmiga ee dugsiga xaga fulinta ficiilda dishibiliinka hadey noqdaan lagamaamaarman.

Cuntooyinka Dugsiga

Waxaa dhammaan ardayda dhigato Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego la siin doonaa cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aaan xiliga sannad dugsiyeedka 2021-22. Qoysaska uma baahno inay buuxiyaan wax codsi ah si ay u helaan cuntooyinkaan dugsiga.

Waxay ardayda doorto inay ka qayb-qataan wax barashada intarneetka ka qaadan doonaa cuntooyinka meelo lagu qaybiyo oo loogu talagalay oo banaanka ah oona ku yaalo degmada dugsiga dhan.

Si taxadar leh ayaa loo qorsheeyaa dhammaan cuntooyinka dugsiga si ardayda loogu soo bandhigo nafaqo si fiican iskugu dheelitiran.

Waxay degmada dugsiga bixisa borotiino caafimaad leh oo ka mid ah waxyaboo aan hilib ahayn ama cagaar ah (plant-based), dhammaan badarka waa ugu yaraan boqolkiiba 50 badar kaamil ah, wey kooban yihiin cusbadha iyo sokorta, waxaaa caanaha kala duwan ka mid ah xulashoojinka boqolkiiba 1 (%) ama baruur la'aanta, iyo waxaa cunto kasta lagu daraa miro iyo khudaar cusub.

Maclumaad faahfaahsan oo ku saabsan liisaska cuntada, meelaha laga qaybiyo cuntada iyo waxyaboo dheeraad ah ayaa laga heli karaa www.sandiegounified.org/departments/food_and_nutrition_services.

PowerSchool

PowerSchool Parent and Student Portal waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo ardayda usoo bandhigtaa hab intarneetka lagu gelii karo oo lagu kalsoonyahay oo laga heli karo maclumaad la xiriira oo add u kala duwan sida: ogeysiyyada dugsiga; imaanshaha ardayda; jadwalada ardayda; shaqooyinka iyo buundooyinka galaaska; warqada war bixinta/

buundooyinka war bixinta horusocodka iyo faalloyinka macalinka; xiriyaasha iimaylka ee macalimiinta; iyo xulashada lagu dalbado oo lagu helo ogesiynta iimaylka ee shaqooyinka, buundooyinka, natijjooyinka galaaska, iyo wixi la mid ah. Waxaa maclumaad laga heli karaa websaytka dugsiga.

Qorshaha Amniga Dugsiga

Waxay dhammaan dugsiyada degmada dugsiga haystaan qorsho amniga dugsiga oo dhamaystiran oo fuliso wax yaabaha uu gobolka u baahan yahay sida loogu sharaxay Sharciga Wax Barashada Ee Kaaliforniya. Qorshaha amaanka waxaa ku jiro nidaamyo loogu talagalay masiibooynka, nidaamyo loo raaco soo gelitaanka dhibaatooyinka dishibiliinka oo halista ah, nidaam faraxumeeynta la xirirta galmaada, nidaam loo raaco ka war-bixinta xad gudubka ilamaha, shuruurcda labiska dugsiga iyo nidaamyada dishibiliinka dugsiga. Dugsiga ama websaytka dugsiga ayaa laga heli karaa maclumaadka ku saabsan qorshaha amniga dugsiga.

Booliska Dugsiga

Waaxda Booliska Oo Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego (San Diego Unified Police Department) waa hay'ad boolis oo si buuxdo loo aqoonsan yahay oona ka shaqayaan askar boolis la dhaariyey oona shaqeeyo waqtii buuxo iyo shaqaalaha kale ee taageerada ah. Doorkeeda koowaad waa inay ilaalso nidaamka iyo ammaanka ka jiro dhismooyinka ku yaalo dugsiga iyo kuwa u dhow.

Ka hortaga iyo dhex-galka dembiga ayaa weli asal u ah kuli shaqooyinka Booliska Dugsiga. Hadafka waa in wax la baro iyo la hoggaamiyo ardayda intay ku jiraan sannadyada ka dhigi doono dadka ay noqon doonaan, iyadoo la isticmaalayo hababka soo celinta sida loo xaliyo colada iyo in caruurtla baro daraasooyin nolosha oo wanaagsan. Waxay saraakiisha Booliska Dugsigu waqtii bixiyaan inay ardayda u soo bandhigaan mawduucyo kala duwan, oo ka bilaabmo isticmaalka daroogada ilaa amniga internetka, iyo ka caawinta dugsiyada dib u fiirinta iyo dib u bedelitaanka oo la sameeyo sannad kasta iyo dhammaystirka Qorshooyinka Amniga Dugsiga Ee Dhammaystiran.

Xaga xaaladaha dedega ah ama baahida degdega ah, waxaa Booliska Dugsiga 24 saacaadood laga heli karaa 619-291-7678. Si aad u hesho maclumaad dheeraad ah, tag https://sandiegounified.org/departments/police_services

Xiritaanka Dugsiga (Lockdowns) iyo Jawaab Celiska Dhibaatada

Waxaa laga yaabaa in marar dhif ah la xiro dugsiga si ardayda, shaqaalaha, iyo dadka soo boqdey dugsiga looga ilaaliyo waxyabaha degdega ah, oo inta badan ka dhaco meel ka baxsan dugsiga laakiin u dhow (sida gaas neefta ah oo daatey, rabsho dhacday, hanjabaaad bambo, booliska oo meel dhow ku bursanaayo qof).

Booliska dugsiga ayaa ka jawaab celiyo dugsi kasta oo la xiro, waxayna markas qiimeeyaan

xaalada jirto markas'na waxay la shaqeeyaan shaqaalaha dugsiga sida wax looga qabto waxay u baahan yihiin dhammaan ardayda iyo shaqaalaha. Waxaa kaloo laga yaabaa inay kasoo qayb-qataan wakaalado kale ee sharci fulinta. Marka ay xaaladu saamaxdo, sida ugu dhakhso badan ayaa loo ogesiyin doonaa waalidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda marki la xiro dugsi. Waxaa lagu ogesiyin doonaa taleefoonka, iimaylka, iyo/ama warbaahinta bulshada (social media) ee degmada dugsiga.

Hadii ay dhacdo in la xiro dugsi, waalidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ha is dajiyaa inta ay madaxda dugsiga iyo deegaanka ka maamulayaa xaalada. Waalidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waa in aysan imaanin dugsiga ilaa uu dugsiga u sheego inay imaan karaan. Ma jiro qof, ardaydana ay ka mid yihiin oo geli karo ama bixi karo intuu jiro xiritaanka dugsiga. Hadii ay u muuqato inuu xiritaanka dugsiga jiro doono xili dheer, ama uu dhaafi doono waqtiga laga soo baxo dugsiga, shaqaalaha dugsiga ayaa ogesiyin doono waalidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda qorshooyinka suurtagal noqon karo.

Hadii aad dugsiga ama goobaha degmada dugsiga dhexdooda ama agtooda ku aragto dhaqdhaqaq aad ka shakiso, la xirir Booliska Dugsiga oo laga heli karo 619-291-7678 (24 saacadood).

Hawlaha, Kooxaha, Barnaamijyada Iyo Ciyaarah Ardayda

Wuxuu xubinimada kooxaha ardayda u furan yahay dhammaan ardayda iyadoo aan la fiirineynin waxyabahaan soo socda oo si dhab ah u jira ama loo maleeysto oo ah abtirsiga, midabka, itaal la'aanta, jaadka uu qofka yahay, jaadka uu qofku isku tilmaamo, jaadka uu qofku muuiyo, xaalada lagu joogo wadanka (immigration status), dhalashada, jinsiyada iyo qowniyada, diinta, jinsiga, jinsiga la iska dhigo, ama la xiriirka qof ama koox leh mid ama ka badan sifooyinkaan dhabta ah ama loo maleynaayo.

Wuxuu arday ka qayb-qaadan karaa barnaamijyada iyo hawlaha dugsiga ee loo kala saaro jinsiga, oo ka mid ah kooxaha ciyaarahaa iyo tartamada, iyo wuxuu isticmaali karaa meelaha waafaqsan jaadka uu qofku isku tilmaamo asaga ama ayada, iyada oo aan la fiirineynin jaadka ku qoran diwaanka ardayga.

Ka Hortaga Iyo Wacyigelinta Is-dilka

Waxaa Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ka go'an inay dugsiyada, ardayda, iyo qoysaska ku taageerto khayraad iyo wax barasho si looga hadlo ka hortaga is-dilka. Waxaa wacyigelinta ka hortaga is-dilka ee degmada dugsiga loo qorsheeyay si looga caawino ardayda: 1) Inay gartaan iyo baaraan calaamadaha niyad-jabka iyo dhaqamada is-halaaga iyo inay fahmaan sida ay dareemada niyad-jabka, markuu qof ka dhinto, go'doomimada, ku filinaan la'aanta, iyo welwelka keeni karaan fikradaha is-dilka, 2) Inay gartaan waxyaboo ka bedelan is-dilka iyo

inay dhistaan xirfadaha la-tacaalida iyo adkaysiga, 3) Inay bartaan inay wax dhageystaan, daacad noqdaan, iyo wadaagaan dareenkooda, iyo inay helaan caawinaad marki ay la hadlayaan saxibahood oo muuiyo calaamado ujeedo is-dil, 4) Inay gartaan dadka waaweyn ee lagu kalsoon yahay, khayraadka dugsiga, iyo/ama khayraadka ka hortaga dhibaatada ee bulshada oo ay dhalinyarada ka heli karaan caawinaad iyo ay garan karaan inaysan jirin dhaleecyin la xiriito raaditaanka adeegyada caafimaadka maskaxda, ku xadgudubka mukhaadaraadka, iyo/ama ka hortaga is-dilka.

Waxay degmada dugsiga usoo bandhigtaa waalidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda wacyigelin iyo maclumaad sharaxaayo waxyaabaha halista ah iyo calaamada digniinta ee is-dilka, manhajka ka hortaga is-dilka ee degmada dugsiga, iyo talaabooin caadi ah oo lagu caawinaayo dhalinyarada rabo inay is-dilaaan oo ka mid ah kooxaha ku jiro halista badan sida dhalinyarada ku murugaysan is-dilka; dhalinyarada itaal-la'aanta, xanuunka maskaxda, ama jirooyinka ku xadgudubka mukhaadaraadka; dhalinyarda guri la'aanta ah ama kuwa ay korsadaan dad kale; iyo dhalinyarada LGBTQ. **BP/AR 5141.52**

Khadka Is-dilaaanka Ee Qaranka (The National Suicide Hotline) oo laga heli karo 800-273-TALK (8255) ayaa 24'ta saacadood ee 7'da maalmod oo bandhigto taageer lacag la'aan ah iyo qarsoodi ah oo loogu talagalay dadka dhibaateysan, ka hortaga, iyo khayraadka dhibaatada oo loogu talagalay adiga iyo dadka aad jeceshay, iyo hababka ugu fiican ee wax loo sameeyo oo loogu talalay xirfadleya.

Khadka Rabshada Guriga Ee Qaranka (The National Domestic Violence Hotline) oo laga waci karo 800-799-SAFE (7233) ayaa ah aadeeg 24'tii saacadood iyo 7'dii maalmod lacag la'aan ah iyo qarsoodi ah oo loogu talagalay dadka badbaaday, dadka wax la yeelay iyo kuwa ay saameeysay rabshada guriga, rabsho sokeysa oo ka dhex-dhaceysyo dadka xiriirka ka dhexeeyo iyo xadgudubka xiriirka. Wuxuu khadka leeyahay adeegyo gaar ahaan loogu talagalay xiriirka dhalinyarada iyo dadka aan xoog u weyneyn (young adult).

Waxaa maclumaad dheeraad ah laga heli karaa https://sandiegounified.org/departments/counseling_and_guidance/social_emotional

Barnaamijka Wacyigelinta Caafimaakda Galmada

Wax barashada caafimaadka isu-taga oo dhamaystiran waxaa bixiyo macalimiin galaaska oo tababaraa ama macalimiin caafimaadka oo jaaliyada ku salaysan oo fasalada 6'xaad, 8'xaad, iyo dugsiga sare. Manhajka fasalka 6 waxaa kamid ah akhbaar dada'ku haboon oo khuseeyso qaan-gaarka, dhismaha jirka ee dhalitaanka, jaadka qofku isku arko, nooca jinsiyada, xiriiryo xushmad leh, ka hortaga jeermiska la isugu gudbiyo galmada iyo HIV, iyo xirfadaha wada hadalka. Waxaa mawduucyadaan dheeraad ku ah manhajka fasalka 8'xaad iyo kan dugsiga sare oo ku jiro daraasooyin ku saabsan ka hortaga uur qaadida, daryeelka uruka iyo fursadaha uruka, xadgudubka ka dhex dhaco dadka xiriirka ka dhexeeyo, iyo xirfadaha wada xajoodka. Kuli

wax yaabaha ay ka kooban tahay waxaa looga baahan yahay Sharciga Dhallinyaro Caafimaad Qabto Ee Kaaliforniya (California Healthy Youth Act).

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa la'la socodsiyya ka hor intaan la bilaabin wax barashada caafimaadka la xiriiro galmaida iyo waxay dib u fiirin karaan qalabka wax barashada. Kadib markay dib u fiiriyaaan qalabka wax barashada, waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxay si qoraal ah dugsiga o'la socodsii karaan hadey jecelyihiin inay ilmahooda oga cudur daartaan wax barashada. Waxaa maclumaad laga heli karaa [www.sandiegounified.org/SHEP](http://sandiegounified.org/SHEP)

Nidaamka Wanaagsanaanta

Degmo dugsiyeed kasta oo ka qayb-qaadato barnaamijka qadada dugsiga ee qaranka oo loo yaqaano (National School Lunch Program) ama barnaamij kale oo ka socda dawlada oona khuseeyo nafaqada caruurta (federal Child Nutrition program) ayaa laga rabaa inay dejiso sharchi loogu talagalay wanaagsanaanta dugsiga deegaanka oona loogu talagalay dhammaan dugsiyada hoos imaado. Waxay nidaamyada wanaagsanaanta dhiri-gelyiyan wanaagsanaanta ardayda, ka hortagaan, iyo yareeyaan cayilka badan ee caruruu, iyo waxay bixiyaan hubin in xeerarka nafaqada cuuntooyinka dugsiga ay fuliyaan heerarka cuntada dugsiga ee dawlada ee ugu yar.

Wuxuu Sharciga Wanaagsanaanta Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ee loo yaqaano San Diego Unified's Wellness Policy ku salaysan yahay qaab-dhismeedka CDC ee loo yaqaano "Whole School, Whole Community, Whole Child" (Dugsiga Dhan, Bulshada Dhan, Cunuga Dhan). Waxaa Nidaamka Wanaagsanaanta ku jiro: nafaqada, wax barashada jir dhiska, wax barashada caafimaadka, adeegyada caafimaadka, wanaagsanaanta bulshadnimada iyo dareenka, deegaan dugsiyo oo nabab-gelyo leh, wanaagsanaanta shaqaalaha, iyo qayb-qaadashada qoyska ama jaaliyada.

Waalidiinta/dadka ardayda mas'uulka ka ah, ardayda, kuwa wakiilkka ka ah adeega cuntada dugsiga, macalimiinta wax barashada jir dhiska, shaqaalaha dugsiga ee xirfada u leh caafimaadka, Guddiga Wax Barashada, maamulka dugsiga iyo dadweynaha ayaa lagu casuumayaa inay xaga dugsiyada iyo Degmada Dugsiga ka qayb-qataan dajinta, iyo hirgelinta, iyo dib u fiirinta iyo dib wax oga bedelida, iyo casriyeenta nidaamyada wanaagsanaanta degmada dugsiga iyo goobta dugsiga. Qof kasta oo xiiseynaayo inuu ka qayb-qato ha la xiriiro koormeeraha wanaagsanaanta degmada dugsiga oo laga heli karo wellness@sandi.net. BP 5030 (a)

Warqada War Bixinta Masuuliyada Dugsiga

Kuli dugsiyada dad weynaha Kaaliforniya waxaa laga rabaa inay maclumaad kusoo bandhigaan Warqada War-bixinta Masuuliyada Dugsiga (School Accountability Report Card [SARC]) oo sannad kasta lasoo bandhigo. SARC wuxuu soo bandhigaa maclumaad ku saabsan xaalaada

yo hawl fulinta dugsi oo sannad dugsiyeedki hore. Waxaa koobiyada SARC'ga dugsi laga heli karaa dugsiga ama ciwaanka intarnetka www.sarconline.org. BP 0510

Wax Barashada Gaarka Ah

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego aqoonsataa iyo qiimeysaa dhammaan ardayda, laga bilaabo dhalashadooda ilaa da'da 21 sanno, oo laga yaabo inay qabaan itaal-la'aan oona dhex-degan xuduudka degmada dugsiga. Waxaa ardaydaan loo soo bandhigi doonaa taageer iyo adeegyo la xiriiro oo haboon oo lagu go'aamiyye qiimeyn wax barasho. Waxay dhammaan ardayda u qalmo heli doonaan wax barashada dadweynaha oo lagac la'aan ah iyo ku haboon iyo raacsan sharciyada dawlada iyo gobolka, oo kamid ah ardayda ku qoran dugsiyo gaarka ah oo lagac laga bixiyo, ardayda uu gobolka masuul ka yahay iyo ardayda aad u dhaqaaqka badan oo u baahan waxyaabo gaar ah.

Adeegyada waxaa lagu bixiyya si ku salaysan baahida shahsiga ee ardayga. Koox dad xirfad u leh wax barashada, oo la socdo waaliidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda, ayaa sameyn doono Barnaamij Wax Barasho Oo Gaar Ah (Individual Education Program [IEP]) oo ku salaysan baahida gaarka u ah ardayga iyo waxyaabo kale. IEP waa warqad sharci ah oo sharaxdo sida degmada dugsiga ay arday leh baahi ka duwan u siiso adeegyada. Adeegyada taageerka wax barashada khaaska waxaa lagu bixiyya Sharciga Wax Barashada Ee Ardayda Itaal-la'aanta (IDEA 2004).

Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, tag [www.sandiegounified.org/academics/special-education](http://sandiegounified.org/academics/special-education) ama wac 619-725-7700. BP 6164.4

Hadii ay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda raali ka noqon waayaan IEP, waxaa u banaan xulashooyinka soo socda:

- **Ombudsman:** Xafiiska Ombudspersons ee degmada dugsiga wuxuu fududeeyaa xalinta arrimaha Wax Barashada Gaarka Ah iyo Qaybta 504 (Section 504). Ombudspersons ma aha kuwo u dooda waaliidinta ama kuwa go'an u gaara degmada dugsiga laakin si eex la'aan ah ayey ola shaqeeyan dhammaan kooxaha si ay oga caawiyaan xalinta waxyaabaha laga walwalsan yahay ee la xiriira baahida gaarka ah ee ardayga. Si aad u hesho faahfaahin iyo maclumaadka xiriirka, tag https://sandiegounified.org/departments/special-education_ombudspersons.

- **Nidaamka Xuquuq Dhawrista:** Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda fayl gareen karaan nidaamka xuquuq dhawrista, waxayna u mari karaan inay la xiriiraan Qaybta Wax Barashada Gaarka Ah Ee Xafiiska Dhageysiga Maamulka Ee Kaaliforniya oo ciwaankiisu yahay California Office of Administrative Hearings, Special Education Division, 2349 Gateway Oaks Drive, Suite 200, Sacramento, CA, 95833, ama ay wacaan 916-263-0880 ama tagaan <https://www.dgs.ca.gov/%20OAH/Case-Types/Special-Education>.

- **Waaxda Wax Barashada Kaaliforniya:** Hadii kooxda iyo waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa soo bandhigi doono ogeysiin ka socoto meesha uu ardayga ka helo daryeelka caafimaadka. Waa inuu ogeysiiska cadeeyo qalabka loo qorey in lagu isticmaalo dugsiga, inuu qirto in ardayga la siiyay tilmaam

cunug loo hirgelinin si haboon ama ay qabaan eedooyin kale oo ah xad gudub sharciga wax barashada gaarka ah, waxaa si toos ah cabashooyinka looga fayl gareen karaa Qaybta Wax Barashada Gaarka Ah ee Waaxda Wax Barashada Ee Kaaliforniya oo ciwaankiisu yahay California Department of Education, Special Education Division, 1430 N St., 2nd floor, Room 2401, Sacramento, CA 95814 ama ciwaanka www.cde.ca.gov/sp/se .

ADA, Qaybta 504 Qaabila Loogu Talagalay Ardayda: Waxaa jiro waxyaabo waajib ku ah Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego oo hoos imaado Qaybta 504 (Section 504) Ee Sharciga Baxnaanista Ee 1973 (Rehabilitation Act of 1973), oo ah inay tilmaamto, dib u fiiriso iyo wax oga bedesho, qiimeysa maclumaadka, iyo soo bandhigto meelo macqul ah ay ku qaabilo karto ardayda itaal-la'aanta. Wuxuu dugsi kasta leeyahay isu-duwe Qaybta 504 (Section 504) oo bixin karo maclumaad iyo caawinaad dheeraad ah. Xafiiska degmada dugsiga ADA/504 (District ADA/501) waxaa laga waci karaa 619-725-5658. BP/AR 6164.6

Ardayda Itaal-la'aanta Waqtii Go'an Leh

AR 6183

- **Wax Barashada:** Degmada dugsiga waxay leedaday barnaamij ay ardayda itaal-la'aan waqtii go'an ku dhaco oona khasab ku noqoto inay guriga, isbataal, ama guri dhismo caafimaad oo kale ay joogaan, ugu soo bandhigto wax barasho khaas u ah. Hadii isbataalka ama dhismaha caafimadka uu ku yaalo meal banaanka ka ah degmada dugsiga, wuxuu ardayga waafaqsanaan doonaa wax yaabaha looga baahan yahay degnaanshada oo loogu talagalay degmada dugsiga oo isbataalka ama dhismaha uu ku yaalo. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waa khasab inay u sheegaan degmada dugsiga oo ardayga si ku meel gaar ah u joogo sida ardayga loo siyo wax barasho khaas u ah.

- **Wax barashada jir dhiska:** Hadii uu arday leeyahay itaal-la'aan xili gaaban ama joogta ah oo ka hor-istaagayso inuu si buuxo oga qayb-qato wax barashada jir dhiska, waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa kasoo buuxin doono meesha uu ardayga ka helo daryeelka caafimaadka (MD ama DO, NP, PA) foomka Bedelka Wax Barashada Jir Dhiska Oo Loogu Talagalay Dhaawac ama Jiro oo loo yaqaano "Physical Education Modification for Injury or Illness" oo laga heli karo dugsiga.

- **Qalab caawinaad:** Waxaa laga yaabaa inay ardayda u baahdaan inay isticmaalaan qalab caawinaayo si ay u imaadaan dugsiga, waxaana ka mid noqon kara usha uu qofka dhutinaayo isticmaalo (crutches), ama gaariga yar uu qofka curyaanka ku socdo (wheelchair), ama kababa culus ee loo yaqaano walking boots. Sida loo yareeyo khatarka ku imaan karto arday iyo dadka kale, waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa soo bandhigi doono ogeysiin ka socoto meesha uu ardayga ka helo daryeelka caafimaadka. Waa inuu ogeysiiska cadeeyo qalabka loo qorey in lagu isticmaalo dugsiga, inuu qirto in ardayga la siiyay tilmaam

ku saabsan sida qalabka loogu isticmaalo si amni leh, waa inuu ku jiro ogolaanshada waalidka oo loogu talagalay inay shaqaalah degmada dugsiga la hadlaan qofka shaqada caafimaadka xirfada u leh oo qoraalka soo sameeyey hadii caddayn loo baahan yahay, iyo waa inuu la socdo tirada waqtiga la filanaayo in loo baahnaan doon qalabka.

Ilaa ogeysiis sidaas laga helo shaqaalahaa caafimaadka xirfada u leh, ardaya guriga ama si ku meel gaar ah xafiiska dugsiga ayeey ku dhamayn karaan shaqooyin is haysto. Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardaya codsan karaan koobiga foomka lagu magacaabo "Dalabka Qalabka Caafimaadka Lafaha lyo Murqaha/Daaweynta Oo Loogu Talagalay Dugsiga" (Orthopedic/Medical Equipment Orders for School).

- Qalabka daaweynta:** Waalidiinta/dadka mas'uulka ka ah ardaya ayaa masuul ka ah inay siduu takhtarta usoo amrey u siyyaan qalabka

caafimaadka iyo qalabka caafimaadka lafaha iyo murqaha iyo qalabka la xiriira. Tusaalooyinka waxaa ku jiro caanaha ciyaalka dashey, qalabka iyo tuubooyinka kaadida qaato, xafaayadaha, kuwa lagu tir-tiro, irbadaha, meelaha lagu haayo dawoooyinka neefsiga, maasgarooyn iyo qalabka lagu qaato daawada neefsta, nidaam lagu qaato daawada lagula tacaalo cudurka kaadi-sonkorowga, iyo qalab/alaab lagula socdo sonkorta.

- Gaaryada Yar Oo Qofka Curyaanka Ku Socdo (Wheelchairs):** Xubinada shaqaalah degsiga ka tirsan bas ayaa loo ogolyahay inay arday dhaawac gaarey ku riixaan wheelchairs hadduusarn ardayga kaligii si amaan leh isku riixi karo. Ardaya kale mamnuuc ayeey ka tahay inay arday dhaawac gaarey ku riixaan wheelchair.

Mamnuuca Isticmaalka Tubaakada

Ardayda ma haysan karaan, cabi karaan, ama isticmaali karaan tubaako ama wax kasta oo leh tubaako ama badeecada walaxa sigarka ku jiro ee loo yaqaano nicotine intay joogaan dugsiga, intay joogaan hawlahu uu dugsiga ka kafaalo qaado, ama intay koormeerayaan ama maamulayaan shaqaalah degmada dugsiga. Waxaa waxyabaha mammuuca ah ka mid ah sigarka, ama sigarka loo yaqaano cigars, ama cigars'ka yayar, sigarka loo yaqaano clove cigarettes, tubaakada aan lahayn qaca (smokeless tobacco), tubaakada loo yaqaano snuff, waxyabaha la calaanjiyo ee loo yaqaano chew packets, iyo betel. Waxaa sidoo kale mammuuc ah inay ardayda haystaan ama isticmaalaan sigarka elektarooniga ah, shiishada elektarooniga ah, uu ku jiro ama uusan ku jirin waxa loo yaqaano nicotine, oo ku dayod isticmaalka waxyabaha tubaakada ah. **BP/AR 5131.62**

F. Xuquuqda Iyo Diiwaanka Ardayda

Fasaxa Akhbaarta Ardayga Iyo Waalidka/Qofka Masuulka Ka Ah Ardayga

BP/AR 5125.1

Sharciga gobolka ayaa u ogol degmada dugsiga inay macluumaadka nooca tusiyaha u fasaxaan shahksiy iyo ururo la ogolyahay. Macnaha macluumaadka tusiyaha waa macluumaadku jiro diiwaanka arday oo sida caadiiga ah aan loo arkeyn wax waxyeealaayo ama ku xadgudbaayo waxyabaha gaarka u ah ardayga hadii la sheego. (Arag Jadwal 2)

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda aan rabin in la fasaxo macluumaadka noocaaan waa inay ogeysiiaan dugsiga cunugooda iyagoo u maraayo inay calaamadeyaan meesha ay ku qoran tahay "Opt Out" (Ka Bax) oo ku jiro sanduuqa 11 (Box 11) oo Foomka Is-qoritaanka (Enrollment Form) ama inay dugsiga usoo gudbiyaan codsi qoran oo saxiixan.

Waxay sharciyada Dawlada iyo gobolka u ogol yihiin ardayda iyo waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xuquuq gaar ah oo khuseeyo waxyabaha shahksiga gaarka u ah iyo helitaanka diiwanada ardayda. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda, ardayda jiro 18 sanno iyo wixi ka weyn, ardayda jiro 14 sanno iyo wixi ka weyn oo loo garto inay yihiin guri la'aan iyo dhafinyaro aan la'lal soconin labadaba, iyo shahksiyadka buuxiyeey iyo saxiixay Qoraalka Ogalaanshada Qofka Xanaanta Bixiyo (Caregiver's Authorization Affidavit) ayaa xaq u leh inay baaraan diiwaanka, iyo inay codsadaan beddelida diiwaanka ardayga oo waalidka ama wakiilkha ama ardayga u qalmo uu aaminsan yahay inay sax ahayn, iyo inay ogolaadaan siidaynta akhbaar shahksiga lagu tilmaami karo oo ku jiro gudaha diiwaanka wax barashada ardayga waxaan ka ahayn ilaa xadka inuu sharciga

Xuquuqda Wax Barashada Qoyska iyo Sharciga Waxyaha Gaarka Ah ee loo yaqaano Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA) ku amar bixiyo siidayan iyadoo jirin ogolaansho.

Degmada dugsiga waxay isku dayi doontaa inay la xiriito waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga ka hor intay banaanka usoo saarin akhbaar iyadoo raaceysyo codsi maxkamad iyo, markay haboon tahay, amar maxkamad, hadii aan hore loo la socodsiiin ayaga.

Kuwa Ciidamada Dadka Usoo Jiido

Sharciga dawlada ayaa ka rabo degmada dugsiyada inay kuwa ciidamada usoo jiido dadka u fasaxaan macluumaadka ah nooca tusiyaha ee ardayda dugsiga sare marki ay codsadaan kuwas. Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda dugsiga dhexe iyo dugsiga sare fursad u leeyihiin inay diidhan siideynta macluumaadka tusiyaha ardayda. Waa khasab in codsiyada lagu xaddidaaya fasaxa macluumaadka tusiyaha si qoraal ah loogu gudbiyo cunug kasta dugsigiisa marki ay tahay bilowga sannad dugsiyeedka. Codsiyada waxaa lagu samayn karaa in foomka diiwaangelinta laga muujiyo "ka bixin" ("opt out") ama warqad qoran loo gudbiyo xafiiska dugsiga.

Helitaanka Diiwaanka Ardayda

Lama tixgelinaayo codsiyada macluumaadka ardayda oo ka imaado shahksiyad ama ururo intooda badan iyadoo aysan jirin ogolaansho waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga oo qoran oo lagu fasaxaayo macluumaadka. Waxaa dheeraad ah, diiwaanka lagu hoos qoray meesha ku magacaaban "Diiwaanka Ardayda" (Student Records) ayaa si toos ah loogu gudbin doonaa dugsi kale degmada dugsiga uu isku qoro

ardaya iyo dugsiyo banaanka ka ah degmada marki codsiyada uu helo ardaya dugsigiisa cusub uu aadaayo.

Helitaanka macluumaadka ku jiro diiwaanka ardayda oo aan ogolaansho laga haysanin waalid ama qof mas'uul ka ah arday ayaa la ogolaan doonaa keliya mararka ay FERPA ogolaato in banaanka loo soo saaro iyadoo aan la haysanin ogolaansho. Arintaan waxaa ku jiro laakin aan ku xadidnayn:

- Shaqaalah degsiga iyo degmada dugsiga (oo kamid ah qandaraasleyaal, la'taliyaal, ama kuwa ikhtiyaarkooda u shaqayo) oo fuliyo adeegyo wax barsho
- Maamuleyaal wax barashada dawlada iyo gobolka oo khaas ah
- Kuwa fuliyo sharciga ama wakaaladaha amaanka dad weynaha oo kale oo sharci ahaan u heli karo.

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin inay Waaxda Wax Barashada Ameerika (U.S. Department of Education) u gudbiyaan cabasho khuseeyso guul darooyinka laga eed sheeganaayo ee ah inay degmad dugsi raacd FERPA. Ciwaanka waa: Family Policy Compliance Office, U.S. Department of Education, 400 Maryland Ave., S.W., Washington, D.C., 20202. Lambarka taleefoonka waa 1-800-USA- LEARN (1-800-872-5327).

Haynta Diiwaanka Ardayda

Maamuleha dugsiga ayaa masuul ka ah haynta diiwaanka ardayda. Shaqaalah degsiga ayaa si joogta ah dib u fiiryo diiwaanka ardayda. Wax yaabaha aan mar dambe loo baahnayn waxaa lagu baabi'iyya si waafaqsan sharciga gobolka.

Diiwaanka Ardayga

Diiwaanka soo socda waxaa loo haayaa arday

JADWAL 2: SII DEYNTA MACLUMAADKA ARDAYDA

<p>Shakhsiyada iyo Ururada Loo Ogolyahay Inay Helaan Maclumaadka Ardayga <i>(Haduusan mamnuucin waalid/qofka ardayga masuulka ka ah)</i></p>	<p>Maclumaadka Ardayga Nooca Tusiyeha (Directory-Type)</p>
<ul style="list-style-type: none"> • Warbaahinta qoraalka sida joornaalada • Telefisyoon • Raadye • Ururada kale ee akhbaarta warka • PTA Ah Heerka Degmaga Dugsiga • Macalimiinta/saraakiisha dugsiga • Wakaaladaha sharciga fuliyo • Ururada ku xiran dugsiga <i>(sida, ururada dugsiga ee faa'iido la'aanta u shaqeeyo [school foundations], PTA'yaasha dugsiga [school PTAs], Ururada Goobta Dugsiga [School Site Councils])</i>, Maclumaadka Ardayga looma sheegi karo qof kasta saddexaad ku ah. • Meelaha loo shaqeeyo ama laga yaabo in loo shaqeeyo oo ardayga uu ka codsadey shaqo. • Kuwa ciidamada dadka usoo jiido • Ururada u shaqeeyo faa'iido la'aan (Non-profit organizations) • Kuwa laga rajo qabo inay deeq bixiyaan • Hay'adaha maaliyadeed oo ardayda ay ka codsadeen caawinaad maaliyadeed • PTA Ah Heerka Degmaga Dugsiga • Macalimiinta/saraakiisha dugsiga • Wakaaladaha sharciga fuliyo • Meelaha loo shaqeeyo ama laga yaabo in loo shaqeeyo oo ardayga uu ka codsadey shaqo • Ururada u shaqeeyo faa'iido la'aan (Non-profit organizations) 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Magaca 2. Cinwaanka 3. Lambarka taleefanka 4. Taariikhda dhalashada 5. Diiwaanka ka qayb-qaadashada hawlahaa iyo ciyaaraha sida rasmiga ah loo aqoonsan yahay 6. Miisaanka iyo dhererka ardayda ku jiro kooxaha ciyaaraha 7. Maalmaha uu ardayga aadey dugsiga 8. Shahaadooyinka iyo abaal-marinta la helay 9. Dugsigii ugu dambeeyey uu ardayga aadey <p>Arag Xeerka Maamulka 5125.1 (Administration Regulation 5121)</p> <p>Arday waxaa lagu qeexaa inuu yahay shaqsi kasta oo dhigto ama dhigan jiray dugsi degmada dugsiga iyo ay degmada dugsiga hayso diiwaanka ardayga. Waxaa kasoo xaadiritaanka dugsiga ka mid ah, laakiin uusan ku koobnayn, imaanshaha uu qofka si toos ah u imaanaayo ama qoraal warqad, kulan fiidhoy, qalabka loo yaqaano satellite, Intarnetka, ama tegnooloji kale oo ah maclumaad elektaroonig ah iyo wada xiriirkal lagu wado xiriilo qalab tegnooloji (telecommunication) oo loogu talagalay ardayda aan si toos ah u joogin galaaska, iyo xiliga u qofka ka shaqeynaayo barnaamijka loo yaqaano work-study oo ah shaqooyinka laga shaqeeyo dugsiga. Diiwaanka ardayda waa shay kasta oo maclumaad ah (gacan ku qoran, daabacan, cajalad ah, filim ah, kumbuyutar ah, ama wax kale oo loo isticmaalo hawlahas) oo lagu uruuriy degmada dugsiga gudaheeda ama banaankeeda oo si toos ah ola xiriilo arday la tilmaami karo iyo ay ilaalso degmada dusiga, oo loo baahan yahay inuu qof shaqalo ah haayo iyadoo ay tahay fulinta shaqadiisa ama shaqadeeda, ama uu haayo qof ama koox matalaayo degmada dugsiga. Maclumaad kasta oo loo haayo ujeedada inuu qof kale oo la xiriira fiiryo ayaa loo arkaa inuu yahay diiwaan arday. Waxaa diiwaanka ardayda ka mid ah diiwaanka caafimaadka ardayga. Diiwaanka ardayda ma ku jiro: 1) Maclumaadka Tusiyeha, 2) Qoraalkaan rasmiga ahayn uu isku geeyo qof ka shaqeeyo dugsiga una haayo qofka sameeyay, ayaa loo isticmaalaa inuu noqdo wax caawinaayo xusuusta shakhi gaar ah keliya, mana heli karaan ama lama tusi karo qof kasta oo kale, waxaan ka ahayn shaqalo bedelay shaqalo kale, 3) Diiwaanka qaybtu fulinta sharciga ee degmada dugsiga, 4) Diiwaanka ay sameysay ama ay heshay degmada dugsiga markuusaa mar dambe qofka ahayn arday ka dib iyo aan si toos ah ola xiriirin imaanshaha uu shahsiga u imaanayo arday ahaan, 5) Natijjooyinka warqadaha ay aasaagooda siyileen natijjada intuusan macalinka uruurin iyo gelinin diiwaanka ka hor. Diiwaanada ardayda ee joogtada ah oo Waajibka Ah (Mandatory) waa diiwaanada oo weligood la haaynaayo iyo waa kuwa uu sharcii, ama dardaaran maamul ee gobolka u sheegayo dugsiyada inay uruuriyaan.</p>

kasta:

- Maclumaadka is-qoritaanka (enrollment), oo ka mid ah taariikhda uu dhashay ardayda iyo meesha uu ku dhashay iyo ciwaankiisa ama maclumaadka meesha uu degan yahay
- Diiwaanada kasoo xaadiritaanka dugsiga iyo caafimaadka
- Isku darka diiwaanka naatijooyinka imtixaanada, fasalada, mawduucyada, iyo koorsooyinka la qateey iyo calaamado dishibiliin, hadey haboon tahay
- Diiwaanada loogu baahan yahay barnaamijiyada wax barashada khaas ka ah
- Daawashada macalimiinta oo khuseeyso horusocodka iyo qayb-qaadashada barnaamijika wax barashada ee ardayda.

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda dib u firin karaan iyo kala hadli karaan diiwaanada shaqaalaha dugsiga xiliga maalinka dugsiga ee caadiga ah ayagoo u maraayo inay qabsadaan balan. Degmada dugsiga waxay soo bandhigi doontaa si lagu heli karo diiwaanka ardayda shan maalmood oo shaqo ah gudahood ka dib taariikhda codsi. Shaqalo u qalmo ayaa loo heli karaa inay turjumaan diiwaanada hadii la codsado. Waxi walwal oo khuseeyo saxnaanta ama haboonka wax kastoo diiwaanada waa in lagala hadlo maamuleha.

Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah ama ardayda u qalma ayaa ka codsan karo dugsiga inuu wax ka bedelo diiwaanka ay aaminsan yihiin inuu qaldan yahay. Codsi qoran oo si cad u tilmaamayo qaybta diiwaanka ay rabaan la beddelo iyo sababta ayaa ah inuu aado maamulaha dugsiga. Hadii uu dugsiga go'aansodo inuu sida wax looga codsadeed oga beddelin diiwaanka, go'aanka uu gaarey ayuu dugsiga ogeysiin doonaa waalidka ama qofka ardayda masuulka ka ah ama ardayda u qalmo iyo wuxuu u sheegi doonaa inay xaq u leeyihiin dhageysi (hearing). Waxaa lasoo bandhigi doonaa maclumaad dheeraad ah oo khuseeyo nidaamyada dhageysiga.

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo ardayda jiro 18 sanno ayaa heli karo koobiyada diiwaanada ardayda. Hadii ay soo codsan degmad dugsi kale, waxaa diiwaanka ku qoran kor loo diri doonaa ardayda dugsigiiisa cusub tobant maalmood ee la dhigto dugsiga gudahood oo laga bilaabaayo codsiga diwaanka.

Helitaanka Kaarka War Bixinta (Report Card) Ama Qoraalka Buundooyinka

Kaararka war bixinta iyo qoraalda buundooyinka ee dugsiyada hoose, dhexe iyo sare waxaa lagu heli karaa in la'la xiriir dugsiga ardayda uu dhigto. Ogolow shan maalmood oo ah maalmaha la shaqeeyo si looga shaqeeyo codsiyada. Marki aysan dugsiyadu furneyn, la xiriir Xafiska Diiwaanka Ardayda (Student Records Office) oo laga heli karo 619-260-2426 ama iimaylka studentsrecords@sandi.net. Waxaa codsiyada intarneetka laga sameyn karaa

ciwaanka <https://sandiegoca.scriborder.com/>.

U Kuurgalyaasha

Ogolaansho qoran oo ka imaado waalid ama qof mas'uulka ka ah arday ayaa loo baahan yahay ka hor intaa arday lasiiniin tiro-koob, baaritaan ama qiiimays oo soo saaro maclumaad shakhsiga oo xasaasi ah sida siyaasada uu raacsan yahay ama wax yaabaha uu aaminsan yahay; dhibaatooyinka madaxa ama maskaxda; hab-dhaqanka galmeda ama aragtida laga qabo galmeda; akhlaaqda sharciga kasoo horjeed, bulshada aan raacsanay, shakhsiga isku markhaatfuraayo iyo dadka hoos u dhigaayo; qiiimaynta khatarta ah oo shakhsiyada kale oo qofka jawaabta ka bixinaya oo la leeyahay xiriir qoys oo dhow; wada xiriirka leh nasiib gaar ahaaneed ama isu yara eg oo sharciga aqoonsan yahay, sida kuwa abukaatayaasha, dhakhtarada iyo wadaadada kaniisadaha; wax yaabaha ardayga ama waalidka ardayga ay dhiin ahaan u samayaan, raacsan yihiin, ama aaminsan yihiin; ama dakhliga aan ahayn mid uu sharciga u baahan yahay sida loo garto u qalanka loogu talagalay qayb-qaadashada barnaamija. Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda dib u firin karaan u kuurgalyaasha ay sameyso koox saddexad oo loo isticmaalo in lagu aruuriyo maclumaadka shakhsiga gaarka u ah.

OGOW: Sharciga Wax Barashada Ee Kaliforniya wuxuu abuuraa ka-reebitaan ku socda waxa loo baahan yahay oo kor ku yaalo asagoo u maraayo in la ogolaado ardayda in la siyo tiro-koobyo ah qarsoodi iyo ikhtiyaarka qofka oo su'aalaayo akhlaaqda caafimaadka iyo halisooyinka. Ka dib marki laga war helo u kuurgalka, hadii uu waalid ama qof mas'uulka ka ah ardaya dhigto fasalka 7-12 "ka bixi waayo", ardaya wuu ka qayb-qaadan doonaa tiro-koobka ayadoo loo maraayo ogolaansho "kasoo horjeed weyn lahayn" oo waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa xaq u leh inay dib u fiiriyan u kuurgalka.

Barnaamija Biilasha Medi-Cal Ee LEA

Degmada dugsiga, iyadoo la shaqayneyso Waaxyaha Adeegyada Daryeelka Caafimaadka (Departments of Health Care Services [DHCS]), ayaa ka qayb-qaadato barnaamij oo u sababaayo degmada dugsiga in lacagta Medicaid oo dawlada dib loogu celijo wixi kharash oo ka imaadey adeegyo caafimaad oo la doortay oo dugsiga laga siiyey ardayda ku qoran Medi-Cal. Lacagta laga helo barnaamijkaan si toos ah ayaa dib loogu maal-geliya in lagu ballaariyo iyo horumariyo adeegyada caafimaadka iyo bulshada oo loogu talagalay kuli ardayda.

Anagoo waafaqsan qaunuunada gobolka iyo dawlada iyo xeerarka u dejisan, waxaan waa ogeysiin in laga yaabo in qaar maclumaadka laga fasaxo diiwaanka arday oona loo fasaxo iibiyaha dib looga helaayo lacagta dib na loogu soo celinaayo, Paradigm Healthcare Services, LLC, iyo Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaadka (DHCS) anagoo u samayneyno inaan waxayna sheegano bas (waxaana laga

yaabaa in la eego ilmahaaga Medi-Cal kiisa ama keeda ayadoo la hubinaayo). Waxaa maclumaadkaan la fasaxa keliya hadii ay degmada dugsiga heshay ogolaanshaha waalid ama qof mas'uul ka ah arday.

Ogolaanshaha waalid ama qof mas'uul ka ah arday, ama ogolaansho la'an, ma saamayneyo adeegyada uu heli karo iyo loo soo bandhigo cunug iyo waa in aysan saamayn ku yeelin faa'iidooyin Medi-Cal. Foomka Is-qoritaanka (Enrollment Form) waaye meesha lagu codsado ogolaanshaha. Waxaa laga yaabaa in ogolaansho la siiyey degmada dugsiga inta lagu jiray hawsha sameynta iyo dib-u firinta iyo dib u hagaajinta IEP/IFSP (hadii ay khuseeyso). Dhammaan maclumaadka la wadaago waxaa lagu xoojiyaa cilmi farsamo (encrypted) iyo si ammaan leh ayaa loogu gudbiyya kuwa wax ka ibinaayo (vendor) degmada dugsiga iyo DHCS labadaba.

Diiwaanada wax barashada oo laga yaabo in la wadaago waxaa ka mid ah magaca ardayga, taariikhda dalashada iyo baaritaanka la xiriira caafimaadka, ka hortaga, iyo akhbaarta gudbinta (loogu talagalay adeegyada laga helay dugsiga) iyo

qoraalada takhtarka oo la xiriira adeegyadaan caafimaadka iyo maclumaad khaas ah oo ka imaado IEP/IFSP'ga ilmahaaga (hadii ay ku haboon tahay).

Waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda xaq u leeyihiin inay la noqdaan ogolaanshaha lagu fasaxaayo maclumaadka ardaygooda xili kasta. Ardayda looma diidi doono adeegyo loogu baahan yahay dhigashada dugsiga, iyo in waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda weligood loo soo diri doonin biil ka socda degmada dugsiga oo loogu talagalay adeegyo lasitiyey iyadoo sababtoodu tahay ogolaansho ama ogolaansho la'an.

Iyadoo Medi-Cal ay kharash loogu talagalay adeegyo caafimaad oo khaas ah dib ugu soo celineyso degmada dugsiga, waa in aanay saamayn faa'iidooyinka Medi-Cal uu haysto cunug. Waxay degmada dugsiga oga qayb-qaadato barnaamijkaan si ay u hesho maal-gelin ka socoto dawlada oo loogu talagalay adeegyada caafimaadka Medi-Cal oo lacagtooda la soo celin karo oo horey looga qabanaayey dugsiga iyo u adeegsataa maal-gelintaan in lagu ballaariyo adeegyada ay heli karaan dhammaan ardayda.

Qarsoodiga Iyo Gaarnimada

Kan wax ka iibyo degmada dugsiga oo dib looga helo lacagta dib loo soo celinaayo wuxuu ku jiraaheshiis oo ku jiro qodobo khaas ah sida qarsoodi looga dhigo diiwaanada ardayda, taasoo hubineyso in aan maclumaadka loo isticmaalin iyo loo sheegin si aan habooneeyn. Waxay kuwa wax naga iibinaayo (vendor) waafaqsan yihiin HIPAA. Waxaa kale oo dheeraad ah, waxay degmada dugsiga iyo DHCS ku jiraan heshiyo oo ka mid ah qodobyo khaas ah oo ku saabsan isticmaalka akhbaarta lagu wadaago barnaamijkaan, iyo maamulka maamuuska ammaanka.

Masuuliyada Qofka

Saddexaad (Third Party Liability)

Hadii uu arday ku qoran yahay Medi-Cal iyo uu haysto caymis kordheer ku ah (third party insurer), waxaa laga yaabaa in DHCS ay isku daydo inay dib u kabsato mas'uuliyada qofka saddexaad hadii ay ayada bixiso dalab ku salaysan dugsiga oo ay gudbisey degmada dugsiga. Dhictaanka arrintaan waxaa sababo meelaynta xuquuqda masuuliyada qofka saddexaad oo la soo bandhigey marki codsigaada Medi-Cal la ogolaadey.

Heshiiska Williams (Williams Settlement)

Sharciga loo yaqaano Williams Settlement Legislation wuxuu u baahan yahay qalab wax barasho oo ku filan oo ku baxo cilmiga la xiriira Luuqada Ingirisiga, xisaabta, sayniska iyo taariikhda/sayniska bulshada, caafimaadka iyo luuqada aduunka oo fasalada 9-12; qalabka shaybaarka oo loogu talagalay galaasyada shaybaarka ee fasalada 9-12; inay dhismooyinka degmada dugsiyada ahaadaan kuwa nadiif ah iyo ammaan leh oona wax ka haleysnayn; iyo in la qaato tallaabooynin oo lagu balanqaado in kuli ardayda ay hystaan macalimiin u qalmo.

Waxyaabaha uu sharciga u baahan yahay waxay saamaynayaan dhammaan dugsiyada degmada dugsiga. Waalidiinta, dadka mas'uulka ka ah ardayda, ama ardayda oo ka walwalsan in waxyaabaha u baahan yahay Williams aan la fulineynin, dugsiga ayey ka codsan karaan Uniform Complaint Form, ama waxay ka heli karaan Xafiiska Sharciga ee degmada dugsiga.

Ardayda Ay Haysato Guri La'aan

Sharciga loo yaqaano The McKinney-Vento Homeless Assistance Act ayaa ah sharchi dawladeed oo hubiyo xuquuqda iyo ilaalinta wax barashada caruurta iyo dhalinyarada ay haysato guri la'aan.

Waxaa caruurta iyo dhalinyarada guri la'aanta ah lagu qeexaa inay yihiin kuwa aan haysanin meel habeenki la joogo oo go'an, joogto ah, iyo ku filan, oo ka mid ah caruurta laga yaabo inay:

- La nool yihiin saaxiib, qaraabo ama qof kale maadaama ay waayeen gurigooda ama ay awoodin guri ay deegaan
- Joogaan hoteelada yar-yar ama kuwa weyn ama meelaha dhuulka banaanka oo habeenkii la seexan karo (camp ground) maadaam ay haysanin meel ka duwan ay deegaan oo ku filan
- Ku nool yihiin meel si deg-deg loogu hoydo ama ku meel gaar ah ama meel looga hoydo rabshadaha qoyska ama sugaayaan in loo geeyo dad koriyo
- Joogaan deegaan habeenki oo ah kooda koowaad oona ah meel gaar ah ama dad weynaha u furan oo aan loo qorsheyin amcaadi ahaanta aan loo isticmaalin deegaan si joogta ah uu u seexan karo qof insaan ah

- Ku nool gaari, goobta caagaraha (park), boos dad weynaha, sar laga tagay, bas ama garoonka tareenka ama goob lamid ah
- Aan la'la soconin, oo si toos ah u haynin waalid/qof mas'uul ka ah, sida kor loogu qeexay ku jiro xaalad ku meel gaar ah

Is-qoritaanka: Ardayda Ay Haysato Guri La'aan iyo Dhalinyarada Ay Dad Kale Korsadaan

Waxay ardayda ay haysato guri la'aan iyo dhalinyarada ay dad kale korsanayaan xaq u leeyihiin inay joogaan dugsigooda asalka ahaa. Degmada dugsiga, inti xad oo macquul u ah waa inay ardayda ku jiro xaalad ku meel gaar ah ku hayso dugsigoodi hore (dugsiga uu ardayga dhiganaayey marki ugu dambeysey uu meel joogto ah dagnaa, ama dugsigii uu marki ugu dambeysey ku qornaa), haddiaysan ka hor imaaneyn wuxuu jecel yahay waalidka/wakiilka/Midka Haayo Xuquuqda Wax Barashada* (Ed Rights Holder*).

- Ardayda wey joogi karaan dugsigoodi hore xiliga dhan ay ku jiraan xaalad ku meel gaar ah iyo ilaa dhammaadka sannad dugsiyeed kasta oo ay u guuraan meel ay si joogto ah u degaayaan ama ilaa arrintooda ah inay dad kale korinaayaan (foster care) laga soo xiraayo. Ardayda dugsiga sare wey joogi karaan dugsigooda asalka ahaa ilaa ay ka qalinqabinaayaan.
- Degmada dugsiga oo la shaqeyneyso dugsiyada, ayaa soo bandhigi doonto taageerka gaadiidka sida loogu baahan yahay si loo baabi'iyo carqaladaha is-qoritaanka, qayb-qaadashada iyo dib ugu celinta dugsiga.

- Waxay ardayda dooran karaan inay isku qoraan dugsi kasta oo loogu talagalay dadweynaha oo ku yaalo meesha looga soo xaadiro dugsiga uu ku yaalo gurigooda ku meel-gaarka ah. Hadii arday oo ku jiro xaalad ku meel gaar ah uu doorto inuu isku qoro dugsiga ku yaalo xaafada uu ku yaalo meesha uu ku meel gaarka u degan yahay asaga ama ayada, dugsiga xaafada ayaa ardayga u noqonaayo dugsiga xaafada u degan yahay ama degan tahay ama dugsigooda hore hadii ay imadaan isbeddel dheeraad ah xaga deegaanka.
- Hadii arday loo diro dugsi aan ahayn kii hore ama dugsiga uu codsadeye waalidka/wakiilka/Midka Haayo Xuquuqda Wax Barashada (Ed Rights Holder), degmada dugsiga ayaa soo bandhigi doonto sharax qoran iyo xaq loo leeyahay in racfaan laga sameeyo, hadii uu waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga ama Qofka Haayo Xuquuqda Wax Barashada (Ed Rights Holder) ka doodo meesha ardayga la geeyey. Inta la xalinaayo khilaafka, wuxuu ardayga xaq u leeyahay inuu joogo dugsiga asalka ahaa.
- Qofka degmada dugsiga oo xiriiryo (liaison) ardayda ku jiro xaalad ku meel-gaarr ah ayaa ka caawini karo dhalinyarada guri la'aanta ah

oo aan la'la soconin inay doortaan iyo isku qoraan dugsi ka dib marki uu ka fikiro wuxuu ardayga jecelyahay. Qofka xiriiryo ardayda iyo dugsiyada ayaa siyo ardayda ogeysiiska xaq inay racfaan ka qaataan doorasho is-qoritaan oo lid ku ah waxay jecelyihii.

- Waxay dhalinyarada ay dad kale koriyaan iyo dhalinyarada ay haysato guri la'aan xaq u leeyihiin qoritaan degdeg ah, xitaa hadii uu ka maqan yahay warqado loogu baahan yahay is-qoritaanka. Degmada dugsiga iyo dugsiga ayaa ka taageeri doono qoysaska inay helaan warqadaha loo baahanyahay iyadoo isla markaaba ardayga lagu qoraayo dugsiga.

- Waa khasab inay dhalinyaro kasta oo ay dad kale koriyaan oo ka yar 18 sanno leeyihiin qof haayo xuquuqda wax barashada, oo looga baahan yahay inuu gaaro go'aamada wax barashada oo ah kuwa ay ku jirto danta ugu fiican ardayda.

S'uallaha la xiriira wax barida ardayda guri la'aanta ah iyo ardayda ay dad kale koriyaan ha laga xiriiryo Xafiiska Dhalinyarada Iyo Carurta Ku Jiro Xaalad Ku Meel-gaar Ah (Office of Children & Youth in Transition) oo laga heli karo 619-725-7652 ama cyl@sandi.net.

Ardayda Xaaska Ah, Uurka Leh, Waalidiinta Ah

Degmada dugsiga ma takoorto arday kasta si ku salaysan xaalada guurka, uurka, dhalitaanka, uur been ah, joojinta uurka, ama soo kabasho la xiriirto. Waxyaaboo macquul ah ayey degmada dugsiga usoo bandhigtaa ardayda uurka leh ama waalidiinta ah sii loo siyo awood ay ku qaataan barnaamijka wax barashada. Wuxuu ardayda uurka leh fursad u heli doonaa aadeeg kasta oo ay heli karaan ardayda kale oo leh itaal-la'aan waqtii go'an ama xaalado caafimaad.

Waxyaaboo macquul ah ayey usoo bandhigtaa ardayda nuujinaayo marki ay joogaan dugsiga si ay usoo saaraan caano, caano u siyaan cunug dhashay, ama wax ka qabtaan baahida kale oo la xiriira nuujinta. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, tag <https://sandiegounified.org/departments/sandapp>. BP 5146(a)

Diiditaanka In Wax La Yeelo Ama La Baabi'iyo Xayawaanka

Arday kasta oo anshax guud dartiis u diidaayo inuu jaro ama sida kale waxyeelo ama burburiyo xayawaanka ayaa xaq u leh inuu ka haro ka qayb-qaadashada wax barashada ay ku jirto hawlaho noocaa ah iyo lama takoorayoo iyadoo ay sababtu tahay go'an uu gaarey oo ah inuu ku dhaqmo xaaqan. Ardayga rabo inuu ka haro wax barashada noocaa ah ayaa u sheegi doono macalinka iyo wuxuu siin doonaa warqad ka socoto waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga oo cadayneyo wuxuu diidaayo. AR 5145.8

G. Shuruudaha Caafimaadka Iyo Wanaagsanaanta

Baaritaano Caafimaadka/ Araga

Baaris maqalka iyo aragtida ayaa lasoo bandhigi doonaa sida looga baahan yahay sharciga gobolga xaga heerarka soo socda:

- Baaris maqalka oo loogu talagalay kuli ardayda ku jiro fasalada K, 2, 5, 8.
- Baaris aragtida oo loogu talagalay fasalada K, 2, 5, 8
- Vision to Learn ayaa baari doonto ardayda dhigato dugsiyo la doortay oo ku jiro fasal kasta.
- Ardayda cusub iyo ardayda ay soo gudbiyeen waalidiinta ama shaqaalahu dugsiga xataa waa la baari karaa.

Fadian ogoow:

- Waxaa laga yaabaa inuu baaritaanada araga sameeyo kal-kaaliyaha caafimaadka ee degmada dugsiga, ama shaqaalo tababar oo ka socdo Vision to Learn ama UCSD Eyemobile.
- Waxaa laga yaabaa in dugsiyada qaarkood loo helo dhakhtarka indhaha (optometrist) sida loo baaro caruruutu ku dhaco baaritaankooda aragtida, waxaana laga yaabaa in loo helo ookiyaale hadii la go'aamio in loo baahdo.
- Qaar ka mid ah dugsiyada lacag lagama qaadi doono ardayda marki la firinaayo aragtidooda, baaraayo aragtidooda ama la siinaayo ookiyaalayaasha.

Hadii uu qof rabo in loo soo celiyo lacag uu ku bixiyey baaritaan loogu sameeyey aragtida ama ookiyaale wuxuu lacagta ka raadsan karaa Medi-Cal ama barnaamijka loo yaqaano Children's Health Insurance Program. Caymis la'aanta macnaheedu ma aha inaan la heli doonin adeegyada.

Ka-reebista Baarista: La xiriir kal-kaaliyaha caafimaadka dugsigaaga ama maamulaha dugsigaaga hadii aad rabto in cunugaaga laga reebo mid ka mid ah baaritaanadaan.

Shuruudaha Tallaalka

Sharciga gobolka wuxuu u baahan yahay in kuli ardayda ka yar da'da 18, ka hor fasalka barbaarinta caruruutu yar-yar ilaa fasalka 12, in laga tallaalka qaar cuduro haddaysan sababo caafimaad fasax ogahayn. Waqtiga isku qoritaanka dugsiga, dugsiga waxaa laga rabaa inuu haysto caddayn inuu cunug helay kuli tallaalada la rabo xiliga taagan. Degmada dugsiga waxay ka qayb-qaaadataa Arkifiyada Tallaalada Deegaanka ee San Diyeego (San Diego Regional Immunization Registry [SDIR]), oo ah nidaam kumbuyutar oo qofka qarsoodi u ah iyo ka jiro wadanka dhan oona la socdo ama lagu haayo tallaalada. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ha wareystaan dhakhtarka cunugooda, dhakhtarka qoyskooda ama bukaan eegta caafimaadka si ay u hubiyaan

inay cunugooda u dhammaystiran yihiin talaaladiisa. Waa in cunug laga reebo dugsiga intarneetka ama tooska ah hadii aan la fulinin shuruudahaan.

Tallaalada Loo Baahan Yahay Marki Loo Fiiryo Da' iyo Fasal

Waxay Ardayda Ku Quran Fasalka Barbaarinta Ee Ku Meel-gaarka Ah (TK)/Fasalka Barbaarinta (K) Ilaa Fasalka 12'naad U Baahanyihiin Talaalo Ku Xiran Fasalka:

• Diphtheria, Tetanus, iyo Pertussis (DTaP, DTP, Tdap, or Td) — 5 qiyas

(4 qiyas daawo waa caadi hadii hal xabo lasiyyay markey ahayd ama ka dib sannad-guurki 4raad.)

3 qiyas daawo waa caadi hadii hal xabo lasiyyay markey ahayd ama ka dib sannad-guurki 7'baad.)

Xaga ardayda fasalada 7'baad ilaa 12'naad, ugu yaraan 1 qiyas talaaluu ku jiro pertussis ayaa loo baahan yahay marki la gaaro ama inta ka horeysa sannad-guurki 7'baad)

• Polio (OPV ama IPV) — 4 qiyas

(3 qiyas daawo waa caadi hadii hal xabo lasiyyay markey ahayd ama ka dib sannad-guurki 4'raad)

• Hepatitis B (Hep B) — 3 qiyas

(Looguma baahno gelitaanka fasalka 7'baad)

• Measles, Mumps, and Rubella (MMR) — 2 qiyas

(Waxaa labadaba lasiyyaa markey tahay ama ka dib sannad-guurka 1waad)

• Varicella (Chickenpox) — 2 qiyas

Taariikh cudur ama natijo shaybaar oo wax muujineyso MA fuliyanan shuruudaan

Waxay shuruudahaan talaalada khuseeyaan ardayda cusub iyo kuwa soo wareego oo dhigto dhammaan fasalada, oo ka mid ah fasalka barbaarinta ee ku meel-gaarka ah (transitional kindergarten), iyo ardayda oo hore u haystay talaalo laga dhaafay. Waxay dhammaan waxyabaha la dhaafay waqtigooda dhaci doonaan dhammaadka fasalka xannaanada ee loo yaqaano preschool iyo dhammaadka fasalka 6'xaad.

Sidoo Kale Waxay Ardayda Bilaabaayo Fasalka 7'baad U Baahan Yihii:

• Tetanus, Diphtheria, Pertussis (Tdap) — 1 qiyas

(La siiyaa da'da 7 ka dib)

• Varicella (Chickenpox) — 2 qiyas

Taariikh cudur ama natijo shaybaar oo wax muujineyso MA fuliyanan shuruudaan.

Laga soo bilaabo Janaayo 1, 2016, mar dambe looma ogola waalidiinta ama dadka mas'uulka

ka ah ardayda inay soo gudbiyaan cafiska qofka looga caafinaayo wuxuu shakhxi ahaan aaminsan yahay oo loogu talagalay talaalada loo baahan yahay xiliga la joogo. Qofkii rabo in laga dhaafio arrintaan isagoo sabab ka dhiganaayo wax la xiriira caafimaadka wuxuu u baahan yahay warqad si gaar ah oga socoto dhakhtar ka shariyeesan Kaaliforniya (MD/DO) BP 5141.3

Imtixaanka Jirka Ee Fasalka Barbaarinta

Barnaamijka Caafimaadka Carrurta Iyo Ka Hortaga Itaal-la'aanta Ee Kaaliforniya (California's Child Health and Disability Prevention [CHDP]) wuxuu u baahan yahay kuli ilmaha jiro da'da dugsiga inay sameeyaan baaritaan jirka oo dugsiga diiwaan ka haayo. Degmada Dugsiga Midaysa Ee San Diego waxay waxaan loo baahan yahay u dajisey fasalka barbaarinta. Waa in dugsiga loo soo gudbiyo koobiga baaritaanka caafimaadka ee cunug marka lagu qoraayo fasalka barbaarinta ama marki ugu horeeyso oo la dhammaystiro intuu socdo xiliga fasalka barbaarinta. Waxaa waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda lagu dhiriil-gelinaya qaadashada baaritaanka inta ka horeysa bilowga fasalka barbaarinta si ay u hubiyaan inuu cunugooda caafimaad qabo iyo inuu diyaar u yahay inuu wax barto. Ardayda dhigato fasalka ku-meelgaarka barbaarinta oo soo gudbiyo baaritaan jirka waxay fulineyaan waxaan looga baahan yahay oo loogu talagalay fasalka barbaarinta.

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda oo u baahan caawinaad inay fuliyanan waxaan loo baahan yahay waxay wici karaan 1-800-675-2229. Hadii baaritaanka jirka uu kasoo horjeedo waxaa shakhxi ahaan la aaminsan tahay, waa in dugsiga laga saxiixo foomka dhaafitaanka ee loo yaqaano CHDP. Ardayda aan fulinin wax yaabahaan loo baahan yahay ka hor taariikhda ku haboon waa laga joojin karaa imaanshaha dugsiga waqtii gaaraayo ilaa shan maalmood.

AR 5141.32

Baaritaanka Caafimaadka Afka Ee Fasalka Barbaarinta (Kindergarten Oral Health Assessment [KOHA])

Wixi laga bilaabo Janaayo 1, 2007, Baaritaan Caafimaadka Afka (Oral Health Assessment [OHA]) uu sameeyo qof xirfad ku leh caafimaadka ilkaha la xiriira oo Kaaliforniya ka shariyeesan ayaa laga rabaa caruruutu marki koowaad galaayo dugsiga dad weynaha, xaga heerka fasalka barbaarinta ama fasalka koowaad. OHA waa in la dhameeyo iyo loosoo celiyo dugsiga intaa la gaarin Maajo 31 oo sanad dugsigaas koowaad. Baaritaanada la sameeyo 12 bilood ka hor intaa dugsiga la gelin xataa wey fulineyaan shaygaan loo baahan yahay. Foomka ka hel dugsiga ama meesha laga helo caafimaadka ilkaha la xiriira. Ardayda ku-meelgaarka fasalka barbaarinta oo soo gudbiyo

JADWAL 1: TALLAALADA LOO BAAHAN YAHAY MARKI LOO FIIRIYO DA' IYO FASAL
Waxay Ardayda Ku Qoran Fasalka Xannaanada (Preschool) U Baahanyihiiin Talaalo Ku Xiran Da'da:

DA'DA	TIRADA WADARTA EE QIYAASTA DAAWADA EE LOOGA BAAHANYAHAY TALAAL KASTA
2 ilaa 3 Bilood	1 Polio 1 DTaP 1 Hep B 1 Hib*
4 ilaa 5 Bilood	2 Polio 2 DTaP 2 Hep B 2 Hib
6 ilaa 14 Bilood	2 Polio 3 DTaP 2 Hep B 2 Hib
15 ilaa 17 Bilood	3 Polio 3 DTaP 2 Hep B 1 Varicella Marki la gaaro ama la dhaafo sannad-guurka 1'waad: 1 Hib 1 MMR
18 bilood ilaa 5 sanno**	3 Polio 4 DTaP 3 Hep B 1 Varicella Marki la gaaro ama la dhaafo sannad-guurka 1'waad: 1 Hib 1 MMR

baaritaan caafimaadka afka wey dhameystiri doonaan shayaan loo baahan yahay. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxay saxixi karaan dhaafitaan loogu talagalay shayaan loo bahan yahay oo ku yaalo foomka OHA oo laga heli karo dugsiga. Ma jiro wax ganaax ama ka joojin hadii waxaan loo baahan yahay aan la fulinin. Waxay waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah wici karaan 1-800-675-2229 hadii ay rabaan in laga caawino helitaanka meelaha laga bixiyo OHA.

COVID-19

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego qaadateen talaabooyin ay aad ugu dadaaleysyo inay amni ka dhigto wax barashada dugsiga. Si kastaba ha noqotee, waxaa weli jiro halis, iyo waxaa laga yaabaa inay ardayda ka qaadaan COVID-19 meel ka mid ah dugsiga. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah arayda qabo xaalado caafimaad oo hooseeyo (underlying health conditions) ama ku nool guri uu joogo qof ka mid ah qoyska oo halis aad ah ku jiro, ayaa mas'uul ka saaran yahay inay la tashtaan meesha ay ka helaan daryeelka caafimaadka oo goonida u ah, oo ay kala tashtaan hadii ay aaditaanka wax barashada dugsiga tahay waxa ay danta ugu fiican ugu jirto ardayda.

Marka la doorato wax barashada dugsiga, waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda iyo ardayda ballan-qaadayaan inay raacaan amarada caafimaadka dadweynaha ee jiro hadadaan, shuruudaha, sharciyada, xeerarka, xeerarka degan ay farayaan Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Kaliforniya (California Department of Public Health), Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Deegaanka San Diyeego (San Diego County Public Health Department), degmada dugsiga, iyo maamulka kale ee dawlada si loo yareeyo faafitaanka cudurka COVID-19. Waxaa laga yaabaa in waqt kasta la bedelo amarada caafimaadka dadweynaha, shuruudaha, iyo wixi la mid ah.

Waa inay ardayda fuliyan shuruudaha loogu baahan yahay kusoo noqoshada dugsiga ka dib marki la dareemo calaamado, infekshin, la baaro oo laga helo cudurka, ama la karantiilo, sida lagu qeexay sharciyada caafimaadka dadweynaha ee jiro xiliga la joogo. Shaqaalahaa caafimaadka ee degmada dugsiga ayaa la socodsii doono qoysaska waxyaa baha loo baahan yahay. Waxaa laga yaabaa inay ardayda u baahdaan inay joogaan guriga 10 maalmood ka dib calaamadaha hadii-uusan ardayga isku baarin baaritaanka loo yaqaano PCR COVID test uuna baaritaanka muujin in laga waayey cudurka iyo ay baaba'an calaamadaha. Waxaa laga

yaabaa inay shaqaalahaa xafiiska caafimaadka ee Degmada Dugsiga u baahdaan iyo waa loo ogolaan doonaa inay la xiriiraan xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ardayda ee u qalmo si ay oga helaan waxay u baahan yihiin in loo cadeeyeo.

Hadii arday laga helay COVID-19 ama laga baaray oo laga helay COVID-19 inta lagu jiray lixdii bilood ee lasoo dhaafay, waxaa laga yaabaa inuu dhakhtarka ardayga rabo inuu ardayga ka haro hawlahu u baahan ka shaqeysiinta jirka, sida ciyaaraha, wax barashada jir dhiska, JROTC ama kooxda muusikada (band), ilaa lix bilood. Waa mas'uuliyada waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayda inuu ka hubiyo meesha uu cunuga ka helo daryeelka caafimaadka wax kasta oo loo baahan yahay in la bedelo ama la xadido. Hadii uu arday u baahdo barnaamij wax laga bedelay, waa inay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda u sheegaan kal-kaaliyaha caafimaadka ee dugsiga iyo macalinka, la'taliyaha, ama agaasimaha ardayga si loo hubiyo in la sameeyo bedelka.

Si aad u hesho maclumaad COVID-19 ay cusbooneysiiso degmada dugsiga, tag https://sandiegounified.org/covid-19_status.

Maamulka Cudurada La Is

Gaarsiin Karo

Degmada dugsiga waxaa laga rabaa inay la shaqeyso Waaalala Caafimaadka iyo Adeegyad Dadka Ee Deegaanka San Diyeego (County of San Diego Health and Human Services Agency) sida looga hortago iyo maamulo cudurada la is gaarsiin karo oo ku dhaco carruurta jiro da'da dugsiga. Marki uu jiro sabab fiican oo lagu aamino inuu arday qabo cudur la is qaadsiin karo ama faafi karo, waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga ayaa la'l xiriir doonaa iyo ardayga gurigaa loo diri doonaa. Ardayga wuu kusoo laaban karaa dugsiga marki uu fiicnaado iyo/ama soo fasaxo takhtar. Hadey jirto sabab lagu aamino ardayga inuu xanuun ku haayo cudur la is qaadsiin karo ama faafi karo oo la garanaayo, ardayga waa laga joojin doonaa dugsiga ilaa shaqaalaha rasmiga ee dugsiga ay ku qanqaa ardayga inuu mar dambe qabin cudurka la is qaadsiin karo ama faafi karo **BP/AR 5141.22**

Khiddada Pediculosis (Injirta Madaxa)

Dhibaatada injirta madaxa (pediculosis) waa mid socda iyo noqon kara dhib sida looga maamulo guriga iyo dugsiga. Injirta madaxa iyo ukunta (nits) halis u ma aha caafimaadka laakiin waa dhib iyo wareer. Waa in si dhakhs oo loo daaweyyo ardayda lagu arko injirta madaxa si loo hubiyo inuu wax barashadooda ka qasmin. Marki arday loo aqoonsado inuu qabo injirta madaxa, guriga ayaa loo diri doonaa ardayga marki uu dhamaado maalinta dugsiga sida loo daaweyyo. Waxaa waaye masuuliyyada waalidka ama qofka mas'uulka ah ardayga inuu daaweyyo iyo maamulo injirta madaxa markey madaxa qabsato. Shayga muhiimka u ah in lagu guuleysto iska ilaalinta injirta madaxa waxaa waaye in la guro dhammaan ukun teeda ka dib marki la isticmaalo daawada loo yaqaano pediculicide.

Kadib marki guriga lagu daaweyyo, waa khasab inuu ardayga kusoo laabto dugsiga maalinta ku xigta si looga baaro xafiska caafimaadka. Ardayga waa laga yaabaa inuu kusoo laabto galaaska hadii la helo in injirta madaxa la daaweyey iyo inay jirin injir timaha ku dhex nool, xataa hadii ukumaha (nits) ay wili jiraan. Waa inay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda sii wadaan saaritaanka ukumaha ilaa dhibaatada laga xalinaayo.

Ma jiro cadayn muujineyo in baaritaanka dugsiga dhan ama galaas dhan lagu ilaal karo faafitaanka injirta madaxa ama dib u faafinteeda. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxaa lagu dhiiri-galinaa inay baaritaanka ilmahooda timahooda qayb ahaan ugu daraan nadaafad-dooda joogtada ah oo caadiga u ah. **BP 5141.33**

Helitaanka Salbatiibooyin

Cudurka loo yaqaano HIV, iyo jeermisyada kale ee la isugu gudbiyo galmaada (sexually transmitted infections [STIs]), iyo uurka aan lagu talo gelin ayaa ah waxyaabo aad looga fikiro jaaliyadeena gudaheeda. Tira-koobyada iyo warbixinada ku saabsan caafimaadka dad weynaha ayaa muuninaayo in tira badan ee ka mid ah dhalinyarada da'da yar (early teens) ayaa sameynaayo waxyaabo halis galinaayo oo u keeni karo waxyaabo u daran caafimaad kooda

(sida jeermiska la isugu gudbiyo galmaada [STIs] iyo/ama uur aan lagu talo galin).

Waxay degmada dugsiga soo bandhigtaa wax barasho oo lagu adkeynaayo inuu ka fognaanahsha (abstinence) arrimahaan yahay habka keliya ee boqolkiiiba boqol looga hortagi karo jeermiska iyo/ama uurka. Sidoo kale waxay degmada dugsiga fahansan tahay inaysan dhammaan ardayda noqon doonin kuwa ka fogado waxyaabaha laga hadlaayo iyo waa in loo sheego in salbatiibo si sax ah loo isticmaalo laga helo wax ay isaga ilaal karaan isu gudbinta HIV/STI's oo la isugu gudbinaayo galmaada iyo uurka aan lagu talo gelin. Iyadoo la'l shaqeynaayo madaxda caafimaadka dad weynaha iyo daawada, lacag la'aan ayey ardayda codsato ku heli karaan salbatiibooyinka hadii-uusan waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga kala noqonin ogolaanshaha mooyee, adigoo kala noqoshahaas u maraayo inaad kal-kaaliyaha caafimaadka dugsiga waqt kasta usoo gudbiso warqad qoran oo saxiixan. Degmada dugsiga mas'uul kama aha wixi imaan karo maadaama ay soo bandhigayso salbatiibooyinka. **BP 5141.25**

Daawooyinka, Hababka Wax Loo Sameeyo Iyo Waxyaabaha Lagu Caawino Ardayda Oo La Xiriira Caafimaadka

Sharciga Wax Barashada Ee Kaliforniya (E.C. 49422, 49423) wuxuu dhigayaa in arday kasta oo rabo daawo ama nidaam la xiriir caafimaadka uu dhakhtar usoo qoray inuu qaato ama lagu daaweynaayo inta dugsiga la dhiganaayo, waxaa caawini karo kal-kaaliyaha caafimaadka ee dugsiga ama shaqaalo kale ee dugsiga oo u xilsaaran hadii degmada dugsiga ay hesho:

- Hadal qoran oo ka socda dhakhtarka oo sharaxaayo habka, tirada, iyo jadwalada waqtiga oo la rabo in la siijo daawada ama loo sameeyo waxa lagu daaweynaayo, iyo
- Hadal qoran oo ka socda waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga oo u ogolaanayo degmada dugsiga inay siiso daawada ama u sameeyo waxa lagu daaweynaayo.

Kuli dawooyinka waa inay ku jiraan weelka farmashiyaha oo asalka u ahaa oona leeyihiin warqada rijeetada asalka u ahayd oo ku dhagan weelka. Ardayda wey wadan karaan iyo shakhsi ahaan u qaadan karaan (qofka daawada leh bas) daawada epinephrine oo la isku duri karo oo rijeeto u haystaan iyo daawada neefta la qaato hadii nooc wax yaabaha loo baahan yahay la fuliyo. Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah ee codsado inay shaqaalaha dugsiga daawo siyyaan ardaygoda, ama u sameeyaan wax kale oo lagu daaweynaayo ama u sameeyaan waxyaabo kale ee la xiriir caafimaadka intay joogaan dugsiga ayaa la rabba inay ogaadaan inay shaqaalaha dugsiga la xiriir doonaa dhakhtarka ama qofka kale ee xirfada u leh ee daawada u soo qorey ardayda hadii ay shaqaalaha u baahdaan in loo cadeeyo waxa lagu daaweynaayo ardayga, ama waxa kale ee loo sameynaayo ama sida loo siinaayo daawada.

Ma jiro dawooyin rijeeto leh ama toos loo gato, fiitamiin, geedo, ama dawooyin kale ay ardayda ku wadan karaan jirkooda, boorsa ama weel kale waxaa ka ahayn sida kor lagu tilmaamey iyo la socdo aqoon ka bixinta iyo ogolaanshada kal-kaaliyaha caafimaadka dugsiga. Dawooyinka toos loo gato oo kooban waa laga yaabaa in laga helo qaar goobaha dugsiyada iyo waxaa siin karo bas kal-kaaliye caafimaad dugsiga oo shahaado u leh ama qof tababar u leh farsamo caafimaad ayadoo la haysto ogolaanshada waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga.

La xiriir kal-kaaliyaha caafimaadka dugsiga hadaa qabtid su'aalo. Foomamka loogu talagalay siinta daawada ama waxa kale ee lagu daaweynaayo ardayga ayaa laga heli karaa dugsi iyo websaytka oo ciwaankiisa yahay sandiegounified.org/departments/nursing_and_wellness_program. **BP/AR 5141.21**

Dawooyinka guriga

Waalidka ama qofka mas'uulka ka ah arday si joogta ah u qaato daawo socota marki uu guriga joogo waxaa laga rabaa inuu kal-kaaliyaha caafimaadka dugsiga ama shaqaale dugsiga oo kale oona shahaado haysto oo u xilsaaran u sheego daawada uu qaadanaayo, inta qyaasta ay tahay iyo magaca takhtarta kormeero. Akhbaarta waxaa sannad kasta lagu aruuriyaa foomka Is-dhaafka Akhbaarta Caafimaadka (Health Information Exchange) oo la qaybiyo biloowga sannad kasta. Hadii la bilaabo daawooyin cusub waqt kasta inta lagu jiro sannad dugsiyeedka, waa inay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ogeysiyaan dugsiga.

Imtixaanka Jirka Ee Ciyaaraha Dugsiyada U Dhexeeya (Interscholastic Sports Physical Exam)

Imtixaan ama baaritaan jirka oo sannad kasta ayaa looga baahan yahay kuli ardayda dugsiga sare oo ka qayb-qaato barnaamijiyada ciyaaraha dugsiyada u dhexeeya. Tababaraha ama kal-kaaliyaha caafimaadka dugsiga ayaa dugsiga ka habayn karo baaritaanada caafimaadka. Waxaa lagu talineyaa baaritaano jirka oo dhamaystiran oo uu sameeyo takhtarka shahksiga.

Waxaa dheeraad ah, degmada dugsiga waxay ku talineysaa in ardayda cusub ay soo gudbiyan war bixin ku saabsan baaritaanada jirka ee ugu dhawaa marki ay dugsiga galaan. Waalid ama qofka mas'uulka ka ah arday wuxuu maamuleha dugsiga u gudbin karaa hadal qoran, iyo saxiisan oo sheegaayo in waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga uu ogolaaneyn baaritaanka jirka ardayga.

Shoog-maskaxeedka (Concussions)

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxaa laga rabaa inay kal-kaaliyaha caafimaadka dugsiga u sheegaan marki uu ardayga ku dhaco shoog-maskaxeed. Xiliga maalmaaha ama asbuucyada ku xiga shoog-maskaxeed, ardayda waxay u baahan yihiin daawasho dheeraad ah markey joogaan dugsiga sida loo garto haday

haysato dhibaatooyin u baahan in laga hadlo. Haduu arday dareemo calaamadaha ah shoog-maskaxeedka asagoo joogo dugsiga, waalidka ama qofka mas'ulka ka ah ardayga ayaa mar kasta loo sheegi doonaa. Marki uu arday muujiyo calaamadaha shoog-maskaxeedka waa laga war heyn doonaa intuu joogo dugsiga iyo waxaa la'l socon doonaa heerarkooda waxqabadka siday dhigayaan hab-maamuuska degmada dugsiga. AR 6145.21

Wax Barashada Caafimaadka

Wax barashada caafimaadka xaga meelaha sida nafaqada, caafimaadka ilkaha la xiriira, habkuu u dhaco cudurka, ku noolaanshaha nabadgelyo, aragtida iyo maqalka, daroogada, qamrada, tubaakada, caafimaadka jaaliyada, dhiska jirka, caafimaadka maskaxda-dareenka, ka hortaga is-dilka, dhalmada insaanka, iyo cudurada la isugu gudbiyo isu-taga oo kamid HIV, waxaa waaye qayb kamid ah manhajka dugsiga.

Intaa wax la dhigin ka hor waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxay fursado u leeyihiin inay hore u fiiryaan alaabaha wax barashada iyo dhawaaqa-muuqaalka oo la xiriira wax barashada dhamaystiran oo caafimaadka isu-taga iyo ka hortaga HIV. Waxaa laga yaabaa in arday laga fasaxo wax barida la xiriira wax barashada dhamaystiran oo caafimaadka isu-taga iyo ka hortaga HIV iyo imtixaanada la xiriira wax barashadaas hadii uu waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga si qoraalka ahaan ku codsado.

Caymis

Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ma bixiso caymis caafimaad ama caymis caafimaadka ilkaha la xiriira oo loogu talagalay ardayda dhaawac ku gaarey dhulka dugsiga, ayagoo hoos joogo maamulka dugsiga ama

ayagoo ka qayb-qaadanaayo wax qabasho degmada dugsiga. Waxaa laga yaabaa inuu jiro caymis kooban oo ah dhaawac si fursad ah isaga dhacey oo loogu talagalay ardayda ka qayb-qaadanaayo safarada banaanka oo uu dugsiga kafaalo ka yahay iyo amar'na loo haysto. Hadii uu dhaawac dhaco, wixi su'aalo khuseeyo caymiska safarada banaanka kala xiriir Maamulka Khatarta (Risk Management) oo aad ka wici kartid 858-627-7345. Qoysaska aan laheyn caymiska caafimaadka ama caafimaadka la xiriira ilkaha ayaa gadan karo caymis gaar u ah ardayda oo ay qiiimooyin macquul ah oga gadan karaan shirkhad caymis oo gaar ah. Hadii aad rabto faahfaahin, waxaad wacdaa 1-800-367-5830 ama tag www.studentinsuranceusa.com.

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego leedahay karraaniga is-qoritanka oo sharchieesan oo ka caawini karo qoysaska inay helaan wax ka daboolo caafimaadka (health coverage) oo qiiimo yar ah ama lacag la'an ah. Waxaa xulashooyinka caafimaadka ka mid ah Medi-Cal ama Covered California. Si aad u hesho faahfaahin, wac 619-571-3332 ama 619-665-0619. BP 5143

Ka War-heynta Macdanada Aan Dabku Karin (Asbestos)

Degmada dugsiga waxay samaysey barnaamij lagu maamulo asbestos oo xaqiqi ah si ay u addeecdo Asbestos Hazard Emergency Response Act (AHERA). Dadaalka waxaa kamid ah ilaalin lixdi billoodba wareegto, dib u baaris seddexdi sanno oo khasab ah oo ay samayneyaan kuwo wax baaro oo haysto shahaadada EPA iyo hawl fulin iyo wax qabad dayactir oo socota sida loo hubiyo ilaalinta dadka ku jiro sararka, shaqaalaha nadaafada iyo dayactirka siday EPA ugu talisey iyo taageertey.

Koobi ah qorshaha maamulka goobta oo ku haboon ayaa laga heli karaa dugsi kasta iyo dhismo kasta ee degmada dugsiga iyo waxaa dib loogu eegi karaa in la'l xiriir maamuleha ama maamuleha sare ee goobta.

Su'aalahaa khuseeyo qorshooyinka maamulka ama xaaladaha asbestos xataa waa inay ka hadlaan Waaxda Amaanka, Tababarka, Addeecida Shaqaalaha lyo Deegaanka (Safety, Training, Personnel and Environmental Compliance Department) oo lambar koodu yahay 858-627-7174. AR 3514

Isticmaalka Sunta Cayayaanka

Waxay degmada dugsiga waafaqsan tahay sharciga loo yaqaano California Healthy Schools Act, oo u baahan isticmaalka hababka maamulka cayayaanka oo ugu sun yar, iyo sida loogu talagalax wax u taraayo. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxay codsan karaan ogeysiis hore oo sunta cayayaanka gaarka ah ee laga isticmaalo dugsigooda iyo waxaa loo sheegi doonaa ugu yaraan 72 saacadood ka hor intaan la isticmaalin sunta cayayaanka. Si aad isku qorto, buuxi Foomka Ogeysiiska Isticmaalka Sunta Cayaanya (Pesticide Use Notification Form) oo ku yaalo buuggaan gadaashiisa ama iska qor cinwaanka intartek: sandiegounified.org/departments/integrated_pest_management/pesticide_use_notification_request

OGOOW: Marka uu wax degdeg ah dhaco, shaqaalaha dugsiga ayaa loo sheegi doonaa iyo waxaa la dhejin doonaa calaamado; laakiin, kuwa ku qoran arkiifiyada looma sheegi doono. AR 3514.2

H. Nidaamka Edbinta Dib Wax U Hagaajinta (Restorative Discipline Policy)

BP 5144

Nidaamka Edbinta Dib Wax U Hagaajinta ee Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ayaa dejiso qaab-dhismeed ee loogu talagalay abuurinta, sifaynta, iyo hir-gelinta dhaqan edbin dib wax u hagaajin oo u roon wax barashada ka jirto dugsi kasta Waxaa qaab-dhimeedkaan aasaas u ah inuu dugsiga dhan ka jiro taageerka akhlaaqda, iyo dhaqan farsamooyin jawaab-celin wanaagsan, iyo inuu dugsiga dhan ka jiro xeerar si taxadar leh oo aqoonsadey oo u dhisan qaab lagama-maarmaan u ah hirgelintooda oo ah mid daacad ah iyo siman. Muhiimada taageeraha akhlaaqda wanaagsan oo ka jiro dugsiga dhan, iyo jawaabaha dib wax u hagaajinta ayaa waafaqsan xeerarka amniga, mas'uuliyada, xushmada, mahad-naqa kala duwanaanshaha, daacadnimada, iyo wax barashada nolosha dhan.

Waxay dugsiyada ilaalin doonaan xeerarka soo socda si ay ugu guuleystaan hirgelinta Nidaamka Edbinta Dib Wax U Hagaajinta iyo ay u haystaan bulshooyin dib wax u hagaajin:

- Kala qayb-qaad ardayda wax barasho la xiriirta, oo la socdo heshiisyod oo ku saabsan is-dhexgalka la isla sameyn doono
- Abuur meelo amni leh oo ku yaalo dugsiga dhan iyo galaasyada oo loogu talagalay dhammaan ardayda iyo isticmaal hab cadaalad dib wax u hagaajin ka dib marki ay dhacaan waxyaabo khatar ku ah amniga ay dareemayaan
- Dib u hagaajin iyo dib usoo celi xiriiryada ka dhexeyo ardayda iyo/ama dadka waaweyn ka dib marki wax la yeelo si dib loogu sameeyo meelo amni leh oo loogu talagalay dhammaan
- Ku dhiiri-geli dhammaan shaqaalaha inay ardayda la dhisaan xiriiryo wanaagsan iyo inay si firfircoo oga qayb-qataan nolosha iyo wax barashada tacliinta ee ardaydooda
- Kordhi la socodka akhlaaqda ardayda oo la xiriiryo dhaawaca culus, dhibaatada, itaal-la'aanta, waxyaabaha caadiga u ah dhaqanka, ama xaaladaha caafimaadka, iyo fahan waxyaabaha
- Kiciyo akhlaaqyaashaas si in si ka fiican wax looga qabto baahida ardayda
- Dhiirigeli heerar sare oo akhlaaqda iyadoo loo maraayo in la dhigo, muujiyo, iyo la'l socdo akhlaaqda
- Edbinta dugsiga ku lammaan wax barashada dhaqanka iyo dareenka oo macno leh oo usoo bandhigto ardayda haggitaanka lagama-maarmaanka ah si ay wax oga bartaan qaladaadkooda iyo ay si wanaagsan wax ugu kordhiyan bulshada dugsigooda
- Hubi inay ardayda haystaan qof weyn oo lagu kalsoon yahay "oo u doodo" si loogu taageero nidaam burin ama cayrin oo dib wax u hagaajin ah oo cadaalad ah, dhammaystiran iyo ay ku lug leeyihiin waalidiinta. Dadka u doodo (champions) waxay garab taagan yihiin ardayda talaabo kasta ay qaataan iyo waxay helaan tababar oo ku saabsan hababka dib wax u hagaajinta iyo sidoo kale daryeelka uu wargeliyo dhaawac culus.

Sida loo hubiyo xiriyo xaqqi ah iyo wada hadal ku filan xaga arrimaha dishibiliinka ardayda, waa inuu jiro tixelin iyo xushmo loogu talagalay:

- Xuquuqda waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda in loo sheego marka uu cunugooda ku wajahayo talaabo edbin ah
- Xuquuqda ay ardayda u leeyihiin inay kulan aan rasmi ahayn la yeeshaan maamulaha ama qofka u xilsaaran.
- Xuquuqda ay waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga ama ardayga u leeyihiin in racfaan ka qaataan ka joojinta dugsiga, cayrinta, iyo u gudbinta dugsiyo ka duwan

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ku dadaashaa inay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ku lug lahaadaan iyo ay warhaayaan. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood waxaa haboon iyo lagama-maarmaan ah inay shaqaalaha dugsiga ee rasmiga ah iyo/ama askarta fuliyo sharciga la hadlaan ardayda iyagoo aan marka hore u sheegin waalidkood ama qofka mas'uulka ka ah. Shaqaalahaan rasmiga ah ma looga baahno inay helaan ogolaanshada waalidiinta ka hor intay ardayda kala hadlin arrimo khuseeyo dugsiga.

Ka Joojinta Dugsiga

Dugsiga la iska joojiyo waa wax halis ah iyo, marki la fiiriyoo nooca ay tahay, waa ficiil la isku khilaaf oo ah in si taxadar iyo iska xannibid ah loo isticmaalo ka dib marki si taxadar ah wax loo baaro iyo marki wax yaabo ka duwan oo macquul ah la waayo. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo khuseeyo xad gudubyo gaar ah oo laga yaabo inay sababaan ka joojin dugsiga iyo nidaamayaada la xiriira, tag sandiegounified.org/about/policies_procedures/student_discipline. BP/AR 5144

Cayrin

Sharciga Wax Barashada Ee Kaaliforniya wuxuu caddayayaa shan xad gudub oo u baahan inuu maamule si waajib ah ku taliyo cayrin:

- Haysashada, iibinta, ama soo saarka hub
- Mindi dhinaca qof kale lagu taago
- libinta sharci darada ee shay la maamulo
- Sameynata ama isku dayida in la sameeyo weerar isu-tag ama samaynta faraxumeyn isu-tag

- Haysashada wax qarxo

Kuli talooyinka kale oo loogu talagalay cayrinta waxaa ikhtiyaar u leh maamuleha iyo waa inay ka hadlaan wax yaabaha dheeraadka oo la helay sida loogu sheegay Sharciga Wax Barashada Ee Kaaliforniya. BP/AR 5144

Wuxuu sharciga gobolka dhigayaa in la soo jeediyo in ardayda toos looga ceyriyo dugsiga hadii la ogaado inay taabteen qof aan rabin iyadoo ay taabashaduna tahay mid la xiriira galmaada ama hadii ay qof aan raali ka ahayn ka taabtaan meel ka mid ah meelaha gaarka ah ee la xiriira galmaada; hase yeeshaa wuxuu sharciga maamnuucayaa burintu ama ceyrinta tooska ah ee ardayda ku jiro Fasalka Barbaarinta (K) ilaa fasalka 3'xaad. Iyada oo ku xiran nooca falalka la xaqiijiye, xaqiqaad gaarka ah, iyo da'da ilmaha ku jira, waxaa laga yaabaa inay dhacdo cunaqabatayn kala duwan in loo isticmaalo. Dishibiliin ku haboon waxaa si ku saleysan gaar ahaan u go'aamin doona goobto dugsiga oona loogu talagalay falalka khuseeya ardayda ku jira fasalka 3 iyo wixi ka sareeyo.

I. Kasoo Xaaddiritaanka Dugsiga (Attendance)

Sharciga Wax Barashada Ee Kaaliforniya ayaa u baahan inuu arday kasta oo u dhexeeyaa da'da 6 sanno iyo 18 sanno uu dhigto dugsi maalin kasta. Baaritaan la sameeyay ayaa muujinaayo in soo xaaddiritaanka ardayda ay kordhiso guusha ardayda.

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa masuul ka ah imaanshaha dugsiga ee ardaydooda iyo waa khasab inay la socod siyaan dugsiga hadii ilmahooda uu joogin dugsiga iyo sababta. Sababaha loo aqbalaayo maqnaanshaha la cafinaayo waxay ku qoran yihiin hoos. Maqnaanshaha oo sababtoodu tahay wax qabab sida ilmo lahaayey, waalidiinta oo loo raaceey adeeg-gaabban iyo aaditaanka riwaayado ama dhacdooyin ciyaaro ah waa kuwa aan la cafineynii.

Dugsiga oo laga maqan yahay shan maalmood ama ka badan waa la cafinayaa hadii waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga u codsado heshiis loogu talagalay wax barasho madax-bannaan ugu yaraan hal asbuuc ka hor maqnaanshada. Ilmaha waa khasab inuu waqtiga la dajiyey gudahiisa ku dhamaaystiro heshiiska. Kadib maqnaansho walbo, waalidiinta waxaa laga codsanayaa iray xafiiska dugsiga u keenaan caddayn maqnaanshada marku ardayga dugsiga kusoo laabto. Ma jiro arday oo sababta maqnaansho la cafiyey darteed asaga/ ayada buundadiisa hoos loo dhigaayo ama buundo weynayyo. Arday haysto maqnaansho la cafiyey waa loo ogolaan doonaa inuu dhameeyo kuli shaqooyinka iyo imtixaanada uu seegay xilgii uu maqnaa. Marki si lagu qanci karo loo dhamaaystiro shaqada ama imtixaanka, xili macquul ah gudaheeda, waxaa ardayga la siin doonaa buundo buuxdo. Imtixaanada iyo shaqooyinka waxay si macquul ah lamid ahaan doonaan, laakin lagama-maarmaan ma aha

inay si toos isku mid u ahaadaan, imtixaanada iyo shaqooyinka uu ardayga seegay xilgii uu maqnaa.

Maqnaanshaha Cudurdaarka Leh

BP/AR 5113

Ardayga waa laga fasaxayaa dugsiga marki ay maqnaanshada sababtiisu tahay:

- Jirro ama dhaawac shakhsiga ku dhacey
- Karantiil oo haggistiisa ka imaadey shaqaalo caafimaad oo rasmi ah ee deegaanka ama magaalada
- In loo sameeyo adeegyo caafimaad, caafimaadka ilkhaa la xiriira, daaweynta la xiriira indhaha (optometric) ama daaweynta meelaha jirka isku xir-xiro (chiropractic)
- In la helo adeegyo caafimaad oo qarsoodi ah ayadoo la haysanin ogolaanshaha waalidka ama qofka ardayga masuulka ka ah (siduu dhigaayo sharciga iyo xeerarka Title X)
- Aaditaanka aaska qof ka tirsan qoyska dhow (immediate family); Hal maalin hadii uu aaska yahay Kaaliforniya gudaheeda iyo saddex maalmood hadii uu ka baxsan yahay Kaaliforniya
- Shaqada xeerbeega habkuu usoo bandhigay sharciga
- Marki uu cunug uu ardayga mas'uul ka yahay (custodial parent) xanuunsan yahay ama leeyayah ballan dhakhtar xiliga la dhigto dugsiga
- Markuu waqtii la qaadanaayo qof ka tirsan

qoyska dhow, oo ah qof ku jiro ciidamada, oona loogu yeeray inuu shaqeeyo, fasax laga soo siiyey, ama xiliga hada taagan kasoo laabtey meel dagaal ka socdo ama boos lagu taageero dagaal.

- Ka qayb-qaadashada shaqooyinka gaarka ah ee maaweeleenda sida loogu qoray gudaha Sharciga Wax Barashada. Ardayga haysto rukhsadahaan shaqada waxaa la fasaxi karaa muddo aan ka badney shan maalmood oo isku xigta, waxaana ugu badan oo la fasaxi karaa shan mar sannadkii.

Sababaha shakhsiga loo cudurdaari karo waxaa ka mid ah, laakin aysan ku koobneyn, aaditaanka maxkamad, aado aas, fulinaayo ciid ama xaflad diiniyan ah, joogo meel diiniyan la isugu tago ama joogo kulan shaqo markuu maqnaanshada ardayga uu wato codsi qoran oo ka imaadey waalidka iyo ogolaanshada maamuleha ama wakiil u xilsaaran.

Wuxuu sharciga Kaaliforniya ku qeexaa dadka ka tirsan qoyska dhow (immediate family) inay yihiin hooyada, aabaha, ayeeyada, awoowaha, ama qofka ay is-qabaan ardayga, iyo wiilka, gabadha, walaalka, ama walaasha ardayga, ama qaraabo kasta oo degan guriga uu degan yahay ardayga.

Ka Maqnaanta Dugsiga Jiro Darteed

Ardayda qaar kood oo leh dhibaatooyin caafimaad oo soo noqnoqda ama socda waxay gafi karaan dugsiga maalmo badan. Markii uu arday xanuun dartis u gafo dugsiga boqolkiba 10 (10%) maalmood ama ka badan, waxaa laga yaabaa inay shaqaalaha dugsiga oga baahdaan waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda

inay keenaan wax ka socda dhakhtarka oo sharaxaayo arrimaha la xiriira caafimaadka oo sababey inuu ardayga imaan waayo dugsiga. Wuxuu xiriiriyahaan ka caawinnaa shaqaalaha caafimaadka dugsiga inay fahmaan arrinta caafimaadka ee wax sababeyso si ay u baaraan sida loo dabooli karo baahida ardayga ee caafimaadka iyo wax barashada. Shaqaalaha caafimaadka iyo wax barashada ee dugsiga ayaa la shaqeyn doono ardayga waalidkiisa ama dadka mas'uulka ka ah iyo dhakhtaradiisa u maamulo caafimaadka sida loo qorsheeyo qorshe gaar u ah oo fulinaayo baahida caafimaadka iyo wax barashada ardayga.

Goo-goysnimada Badan (Truancy)

Siduu dhigaayo Sharciga Wax Barashada Ee Kaaliforniya, ardaygii hal sannad dugsiyeed ka

maqan dugsiga saddex maalmo oo buuxo asagoo aan haysanin sabab sax ah ama soo daaho ama maqan waqtii ka badan xili 30 daqiqi ah intuu dugsiga socdo maalinkii asagoo hal sannad dugsi gudahiis saddex jeer oo xiliyaasha ka mid ah u haysanin sabab sax ah, ama si walbo oo la isugu daro kuwaas, waa in loo garto inuu goo-goys badan yahay (truant). **BP/AR 5113.1**

Qoysaska ayaa laga yaabaa inay dugsiga ama degmada dugsiga ka helaan Warqada Ogeysiinta Qoondaynta Goo-goysnimada Badan (Notification of Truancy Classification Letter), ayagoo sababta ay u helayaan ay tahay arday fulinaayo macnahaan goo-goysnimada badan (truant). Taageer ayaa diyaar u ah ardayda iyo qoysaska la dhibaatoonaayo waxyaabaha caqababaha ku ah imaanshaha joogtada ah.

Hadii goo-goysnimada badan ay noqoto arrin socota inkastoo lagu dadaaleyn in la dhex-galo,

waxaa laga yaabaa in ardayga loo arko inuu yahay mid goo-goysnimada caadystey (habitual truant), waxaana laga yaabaa in la diro Warqada Ogeysiinta Labaad Oo Goo-goysnimada Badan (Cadaystey) (Second Notification of Truancy [Habitual] Letter). Marki la gaaro waqtigaan, la'taliyaha dugsiga ama qof kale oo dugsiga u xil saaran ayaa ka codsan doono waalidka (waalidiinta) ama wakiilka sharciga (wakiilada) iyo ardayga inay la shiraan sida looga hadlo arrinta imaanshaha iyo sida loo samayo qorshe looga hadlo iyo loogu horumariyo imaanshaha.

Hadii goo-goysnimada badan ay noqoto arrin socota, waxaa laga yaabaa in ardayda loo diro barnaamij dhex-dhexaadinta ama ka jeedinta goo-goysnimada badan iyadoo la raacaayo Sharciga Wax Barashada Ee Kaaliforniya.

J. Tegnoolojiga

Hawsha degmada dugsiga ee loo yaqaano San Diego Unified's 1:1 initiative ayaa abuurto fursado wax barasho oo loo siman yahay iyadoo u marayso inay dhamaan ardayda siiso qalab loogu talagalay in lagu isticmaalo galaaska gudahiisa ama banaankiisa. Istmicalka qalabka intarnetka ee waqtii kasta la isticmaali karo iyo meel kasta laga isticmaali karo ayaa ah shay wax bedelaayo. Wuxuu u ogolaadaa macalmiinta, ardayda, iyo qoysaska inay isla shaqeeyaan iyo ay ka faa'iidaystaan fursado cusub oo loogu talagalay wax barasho gaar u ah qofka. Iyadoo uu farahooda u joogo isticmaalka tegnoolojiga, waxay ardayda oga qayb-qataan wax barashada hawlo khuseeyo si ay u noqdaan kuwa si hal-abuur leh u xaliyo dhibaatooyinka iyo kuwa la xiriiro aduunka iyadoo la joogo aduun mar kasta is bedelaayo. Si aad u hesho maclumaadka iyo taageerka tegnoolojiga, tag <https://sites.google.com/sandi.net/instructionalcontinuityit/technology-support-for-families>.

SBP 6163.4

Waxay degmada dugsiga hirgelineysaa hab guriga loogu qaato qalab oo loogu talagalay sannad dugsiyeedka 2021-22 oo laga maamuli doono dugsi kasta. Ardayda ayaa laga filanayaan inay noqdaan dadka keliya oo isticmaali doono koontadooda(qalabkooda, si haboon u daryeelaan qalabka, iyo ay keenaan dugsiga maalin kasta isagoo batarigii buuxo. Waxaa ardayda laga filanayaan inay raacaan hababka dhaqanka fiican ee intarnetka iyo inay qalabka u isticmaalaan ujeedooyin wax barasho. Hadii ay dhibaatooyin ka imadaan qalabka, waxay ardayda u baahan yihiin inay si degdeg ah ciladaahaas ugu sheegaan dugsiga.

Istmicalka nidaamka elegtarooniga ah ee degmada dugsiga (SandiNet), intarnetka iyo qalabka elegtarooniga ah waa mudnaan, ama aha xaq. Istmicalka aan haboonayn ayaa keeni doono talaabooyin wax lagu sasaayo oo gaaraayo iyo ka mid ah joojitaanka mudnaantaas. Maamulaha dugsiga ama maamulaha nidaamka degmada dugsiga ayaa xad u sameyn karo, diidi karo, la laaban karo, ama joojin karo isticmaalka qof gaar ah.

Ardayda waxay heli doonaan:

- Maclumaad, keydad maclumeed oo laga helo intarnetka (online databases), iyo warar ka imaado meelo kala duwan iyo hay'ado baaris ah
- Barnaamijaya lagu isticmaalo kumbuyutarka oo loo yaqaano software iyo software'ka dad weynaha u banaan (public domain) ama la wadaagi karo (shareware) oo ah noocyoo badan ay soo bandhigto Degmada Dugsiga
- Barnaamijyo software iyo intarnetka ku salaysan (web-based) oo kala duwan sida wax (content) loogu soo saaro intarnetka
- Barnaamijyo intarnetka ku salaysan oo iskaashi ah oo loogu talagalay ujeeddada wax barasho mashruuc ku salaysan
- Koorsoojin iyo manhaj intarnetka, software tacliimeed, iyo khayraad wax barasho oo elektaroonig ah

Waxay kaloo ardayda fursad u haystaan isticmaalka iimayl, kooxo wada hadal oo ka wada hadlaayo waxyaabo kala duwan, wax ku xayeyisinta websaytyada qaarkood, warbaahind bushada oo kooban, iyo khayraad dheeraad ah ay soo bandhigaan dugsiyo gaar ah ama macalmiinta.

Waxaa arday kasta la siin doonaa koonto la isticmaalo oo gaar ah oo loogu talagalay ujeedooyinka ah helitaanka barnaamijyo iyo adeegyada intarnetka. Waxay degmada dugsiga ka qori doontaa koontada ardayga meelaha laga bixiyo adeegyada oo kala duwan iyo waxaa laga yaabaa inay bixiso maclumaadka qofka gaarka u ah oo caadi ah, sida loogu baahdo helitaanka adeeg. Marka ay shuruudaha adeega kan wax bixinaayo iyo/ama sharciga u baahdaan, waxaa laga yaabaa inay degmada dugsiga bixiso ogolaansho si ay ardayda ka yar da' cayiman oga dhigto adeegyada wax la heli karo.

Marki ay ardayda ka tagaan degmada dugsiga, waa la joojin doonaa koontadooda iyo dhamaan waxyaabaha ku jiray oo kaydsanayaa ayaa laga yaabaa in la tirtiro. Waxaa ardayda lagu dhiiri-

geliya inay koobi ka sameystaan waxyaabaha ugu jiro oo gaarka u ah oo ay rabaan inay haystaan intay tagin ka hor.

Masuuliyadaha

Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diego ayaa u taxadarto si macqul ah siday u xaddido helitaanka "waxyaboo waxyeel xun leh" ("harmful matter") iyo qalabka aan taageerin ujeedooyinka wax barashada oo la ogolyahay. Macalmiinta iyo shaqaalaha ayaa dooran doono khayraadka intarnetka oo ku haboon wax barashada galaaska iyo/ama baaritaan loogu talagalay baahida, baaluqniimada, iyo awooda ardayda. Degmada dugsiga ma qaadeeyo wax masuuliyad ah xaga saxnaanta amaya tadaan maclumaadka ka imaado intarnetka. Istmicalida wixi akhbaar ah oo laga helo intarnetka, wax walbo oo khatar oo ka imaato waxaa qaadanayo qofka isticmaalay (user's risk).

Istmicalida Mamnuuca Ah

Gudbinta wixi alaab oo ku xad gudbeyso wixi sharci ee dawlada ama gobolkha, iyo nidaamka degmada dugsiga waa mamnuuc. Waxaa ka mid ah, laakiin aysan ku koobnayn, qaybinta

- Maclumaad ku xad gudbo ama jebiyo xuquuqda qof kasta oo kale
- Xoog-sheega Intarnetka (Cyberbullying)
- Waxyaboo ridaayo sumcada, aan haboonayn, xad gudub ah, fisqi ah, nijaas ah, u jajaban isu-taga, hanjabid ah, jinsiyada u gefeyso ama sharci doro ah
- Xayasiisyo, tuugida loo maraayo wax gad, ganacsiga isku biimeynta ah ama ololyanta siyaasada
- Maclumaad dhiiri-geliyo isticmaalka waxyaboo la maamulha (controlled substances) ama
- Istmicalka nidaamka iyadoo loo isticmaalay ujeeddada ah in dambi la kiciyo

- Wax yaabaha ku xad gudbo sharciyada xuquuqda daabacaada. BP 6162.6, AR 6162.6
- Wax kharribka, isticmaalka aan la ogoleyn, "jabsiga" ("hacking") ama faragalinta qalabka (sida mashiihada) ama software, oo kamid ah soo bandhigida "fayrusyo" ("viruses") ama software lasoo dhacey, si adag ayey mamnuuc u tahay (Sharciga Ciqaabta, Qaybta 502)
- Isticmaalka mid ka mid ah nidaamyada kumbuyuutarada isagoo aan qofka loo ogoleyn, xitaa hadii uu isticmaalayo aqoonsi (credentials) uu qof kale leeyayah

Isticmaalka aan haboonayn waxaa laga yaabaa inuu sababo burinta fursadaha gaarka ee nidaamka isku xirxiran. Mar kasta ayaa la xiriri karaa koonto hadii ay noqoto lagama-maarmaan Ayadoo ku xiran khatarta gefka, waxaa la fulin doonaa mid ka mid ah khidda/nidaamyada soo socda: Sharciga Wax Barashada, nidaamyada degmada dugsiga, edbinta dugsiga, xeerarka nidaamka isticmaalka nidaamka isku xirxiran ama u gudbiita kuwa fuliyo sharciga.

Qaanuunada Iyo Aadaabta Nidaamka Isku Xirxiran

Isticmaalka SandiNet iyo intarnetka waxay u baahan yihiin ardayda inay u hogaansanaadaan qaanuunada degmada dugsiga ee isticmaalka nidaamka isku xirxiran iyo aadaabta:

- Edeb lahoow. Qofna ha u dirin fariino xad gudub ah
- Isticmaal luuqad haboon. Wixi ku saabsan wax qabad sharci daro ah si adag ayuu mamnuuc u yahay
- La ilaaliyo qarsoodiga. Ha muujinin ciwaanka, lamabarada taleefoonada, boggaga intarnetka ama musuwirada shahsiga ee adiga ama dad

kale. Waa inuu dugsiga haysto fasaxa waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga oo u ogolaanayo gelitaan ka hor intaan intarnetka lasoo gelinjin sawirkha, magaca koowaad, ama shaqada arday.

- Xushmeey xuquuqda daabacaada. Waxaa dhammaan maclumaadka iyo wada xiriirkha laga heli karo nidaamka intarnetka ee isku xirxiran (network) loo arkaa inay yihiin wax uu iska leeyayah qofka soo geliyey, ma na la isticmaali karo hadii uusan asaga ama ayoda ogoleyn.

Cyberbullying waxaa waaye isticmaalka qalab wada hadal oo elektaroonik ah sida loo gudbiyo fariin nooc walbo ah (qoraal, masawir, hadal, ama fiidyow) oo qof kale cabsi galiso, dhibaateyso, ama sida kale loogu talagalay in qof kaas wax lagu yeelo, caayo, ama ceebeeyo si kas ah, soo noq-noqod, ah ama hab colaad iyo aan la rabin ah. Isticmaalka qalab wada hadal oo shahsiga gaar u ah ama hantida degmada dugsiga si xoog loogu sheegto intarnetka waa wax si aad mamnuuc u ah iyo waxaa laga yaabaa inay sababto burinta fursadaha gaarka ee nidaamka isku xirxiran iyo/ama facil dishibiliin ah. Waxaa xoog-sheega intarnetka (Cyberbullying) ka mid noqon karo, iyadoo uusan ku koobneyn:

- Qaybinta akhbaar ama masawiro sida qof loo ceebayo
- Muran kulul oo ka dhaco intarnetka oo aan isku si loo murmeyn waxaana la socda dhihiitaanka hadal akhlaaq xun, ama aflagaado, ah ama edeb daran
- Shakhsi gooni in looga saaro asaga ama ayada kooxiisa ay iskufilka yihiin
- In la isticmaalo magaca intarnetka ee qof kale ayadoo la iska dhigaayo in la yahey qofkaas
- In la gudbiyo maclumaad ama sawiro loogu

talagalay inay ahaadaan qarsoodi

Wax kharibka wuxuu sababi doonaa burinta fursadaha gaarka ah. Waxaa ka mid ah laakiin aysan ku koobneyn, in nidaamka lasoo gelijo ama la sameeyo fayrusyada kumbuyuutarada, ama in la soo weeraro nidaamyada degmada dugsiga, ama in la isku dayo in la helo wax ka mid ah khayraadka la bixiyo iyadoo aan la ogoleyn ama facil kasta oo sababaayo carqaladaynta adeegyada nidaamka isku xirxiran ee ula kac ah.

Taleefoonka Gacanta iyo Qalabka Xiriirkha Mobaylka: Waxaa ardayda loo ogolyahay inay haystaan iyo isticmaalaan taleefoonada gacanta, qalabka loo aadeegsado wicida taleefoonka (pager) iyo qalabka kale oo seenyaale bixiyo ee elektarooniga ah marki ay joogaan dugsiyada iyo ay saaran yihiin basaska dugsiga, hawlahu uu dugsiga kafaalo ka yahay, iyo marki ay kormeerayaan iyo maamulayaan shaqaalaha degmada oo hoos imaado xaaladaha soo socda:

- Dhammaan ardaya (Fasalka Barbaarin [K] ilaa Fasalka 12) dugsiga wey ku isticmaali karaan qalabkaan ka hor intuusani bilaabanin dugsiga iyo ka dib markii uu dugsiga dhamado
- Ardayda ku jiro dugsiga sare, fasilada 9-12, wey isticmaali karaan wax yaabahaas xiliga xiisada qadada
- Qalabyada waa in lagu haayo meel aan laga arki karin iyo la damiyo xiliga barnaamijka wax barashada iyo galaaska dhexdiisa
- Isticmaal aan loo ogolayn wuxuu sababi karaa inuu shaqaalo rasmi ah oo dugsiga, oo ka mid macalimiinta galaaska uu qaado qalabka. **BP 6980**

K. Luuqada Iyo Barnaamijyada Barashada Luuqada

Waxaa waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda Baranaayo Ingiriiska (English Learners [EL]) la siin doonaa maclumaad khuseeyo barnaamijyada aqonta Ingiriisiga ee kooban, oo ka mid ah sababta ardaygooda loogu tilmaamey inuu yahay ardayda baranaayo Ingiriisiga (EL), sababta loo baahdhey in la geeyo barnaamij wax barasho oo lagu dhigaayo luuqada; heerka uu maraayo aqonta Ingiriisiga ardayga iyo sida loo qiimeeyey heerka; xaalada ay taagan tahay guusha wax barashada ardayga; hababka wax lagu dhigo ee laga isticmaaley barnaamijka jirey; siduu barnaamijka la soo jediyeey u fulinaayo baahida ardayga; hawl fulinta barnaamijka iyo isku qoritaanka koowaad; iyo qiyasta la rajeynaayo inay u wareegi doonaan galaas aan ahayn mid lagu baranaayo Ingiriiska (non-EL classroom).

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego soo bandhigtaa barnaamijyo barasho luuqadeed iyo barnaamijyo luuqadeed. Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda aya dooran karo barnaamij sida ugu fiican u haboon cunugooda.

Barnaamijyada Barashada Luuqada waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo inuu barashada Ingiriiska u dhaco sida ugu dhakhsaha badan iyo uguna guul badan ee suurtagalka ah. Ardayda baranaayo Ingiriiska ayey usoo bandhigaaan wax barasho iyadoo ay ku salaysan tahay heerarka waxyaabaha ku jiro tacliinta la dhigaayo uu ogolaaday gobolka, oo ka mid ah horumarka luuqada Ingiriiska. Waa inay dhammaan dugsiyada degmada dugsiga usoo bandhigaaan ardayda ku qoran ee baranaayo Ingiriiska dookha barnaamijka lagu mashquulinaayo ardayda luuqada Ingiriiska oo loo yaqaano Structured English Immersion.

Barnaamijka Ku Mashquulinta Ingiriiska Ee Habaysan (Structured English Immersion Program):

Barnaamij lagu barto luuqada oo loogu talagalay ardayda baranaayo Ingiriiska oo in ku dhow dhammaan waxa lagu baranaayo galaaska lagu

bixiyo Ingiriis, laakiin manhajkiisa iyo sida wax loo soo jeedinaayo loo qorsheeyay ardayda baranaayo Ingiriiska. Waxaa ugu yaraan loo soo bandhigaa ardayda horumarinta luuqada Ingiriiska ee loo yaqaano Designated ELD oo ah mid waqtii gaar ah la taageero ardayda, iyo waxaa loo soo bandhigaa ardayda fursad ay ku heli karaan maadada tacliinta ay baranayaan oo leh horumarinta luuqada Ingiriiska ee loo yaqaano Integrated ELD oo ah mid waqtiga caadiga ah la taageero ardayda.

Barnaamijka Ku Mashquulinta Labo Luuqad (Ingiriis/Isbaanish/Faransiis) (Dual-Language Immersion [DLI])

Barnaamij lagu barto luuqada, oo sidoo kale loo yaqaano Mashquulint Labo Dhinac (Two-Way Immersion), oo bixiyo barashada luuqada iyo wax barida tacliinta oo loogu talagalay ardayda ku hadlo iyo u dhashay luuqada Ingiriiska iyo

Nooca Barnaamijka	Sifooyinka
Barnaamijka Barashada Luuqada (Ardayda Baranaayo Ingiriiska)	<p>Qaybta 11309 ee Nidaamka Xeerarka Ee Kaaliforniya (California Code of Regulations) ayaa u baahan in barnaamij kasta oo lagu barto luuqada oo lasoo bandhigo:</p> <ul style="list-style-type: none"> La qorsheeyo iyadoo la isticmaalayo cilmi-baarlis ku salaysan cadayn iyo waa inuu ku jiro horumarinta luuqada Ingiriiska ee waqtiga gaar ah la taageero ardayda (Designated English Language Development) iyo horumarinta luuqada Ingiriiska ee waqtiga caadiga ah la taageero ardayda (Integrated English Language Development) labadaba Ay hay'ada wax barashada deegaanka (local educational agency [LEA]) u qoondeeyso khayraad ku filan si loogu hirgeliyo si guul leh, oo ay ku jiraan, laakiin aysan ku koobnayn, macalimiin shahaado haysto iyo haysto ogolaansho ku haboon, qalabka wax barashada ee lagama maarmaanka, horumarinta shaqaalaha oo haboon oo loogu talagalay barnaamijka la soo jeediyey, iyo fursado ay waalidiinta ama bulshada wax ka qayb-qaadan karaan si loo taageero hadafyada barnaamijka lasoo jeediyey Xili macquul ah gudahiis, keeno: <ul style="list-style-type: none"> -Aqoonta Ingiriiska ee ah heerka fasalka, iyo, marka uu nooca barnaamijka ku jiro luuqad kale oo wax loogu dhigaayo ayaa la rabaa aqoonta luuqadaas kale -Ku guuleysiga heerarka tacliinta la baranaayo ee Ingiriiska uu gobolka aqbaley, iyo, marka uu nooca barnaamijka ku jiro luuqad kale oo wax loogu dhigaayo ayaa la rabaa ku guuleysiga heerarka tacliinta la baranaayo ee luuqada kale uu gobolka aqbaley

Barnaamijka Luuqada (Ardayda Aan Baraneynin Ingiriiska)	<ul style="list-style-type: none"> Barnaamijyada luuqada ayaa usoo bandhigo ardayda aan baraneynin Ingiriiska fursado oo wax loogu dhigo luuqado aan ahayn Ingiriiska. Waxaa laga yaabaa inay keenaan aqoonta luuqado kale aan ahayn Ingiriiska.
--	--

ardayda ku hadlo iyo u dhashay luuqad kale iyadoo ay ujeedooyinka yihiin tacliinta oo si sare loogu guuleysto, aqoonta luuqada koowaad iyo luuqada labaad, iyo fahamka dhaqamada kala duwan. Wuxuu barnaamijkaan ka bilaabmaa Fasalka Barbaarinta Ee Ku Meel-gaarka Ah (Transitional Kindergarten/Fasalka Barbaarinta (Kindergarten) (TK/K) iyo wuxuu socdaa ilaa fasalka lixaad. Barnaamijyada Labada Luuqadood (Dual Language Programs) ayaa abuuuraan fursado ay ardayda ku dabaaldegaan iyo sharfaan kala duwanaanshaha iyo inay isticmaalaan waxyabaha ay kala kulmayaan galaaska oo ay ka dhigtaan fursad ay ku sameyn karaan wada xiriir xaga bulshada iyo tacliinta. Waxay ardayda ku qoran barnaamijyadaan heli karaan shahaadada California State Seal of Biliteracy oo ah shahaado la isku siiyo akhriska iyo qoraalka labo luuqad. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga heli karaa www.cde.ca.gov/sp/el/er/sealofbiliteracy.asp.

Barnaamijka Ku Hadalka Labada Luuqad Ee Ku Meel-gaarka Ah (Ingiriis/Isbaanish)

Barnaamij lagu barto luuqada oo loogu talagalay

ardayda baranaayo Ingiriiska oo loogu soo bandhigo ardayda wax barasho oo akhriska iyo qoraalka iyo wax barashada tacliinta loo adeegsanaayo Ingiriis iyo luuqada uu u dhashay ardayga, oo siineyso ardayga baranaayo Ingiriiska awooduu ku helo aqoonta Ingiriiska iyo uu ku gaaro hadafyada guusha tacliinta uu gobolka aqbaley. Wuxuu barnaamijkaan ka bilaabmaa Fasalka Barbaarinta Ee Ku Meel-gaarka Ah (TK)/Fasalka Barbaarinta (K) wuxuuna socdaa ilaa fasalka saddexaad oo ay ardayda u gudbaan wax barasho lagu dhigo Ingiriisi keliya.

Barnaamijka Horumarinta Labada Luuqad (Ingiriis/ Isbaanish) (Developmental Bilingual Program)

Barnaamij lagu barto luuqada oo loogu talagalay ardayda baranaayo Ingiriiska oo loogu soo bandhigo ardayda wax barasho oo akhriska iyo qoraalka iyo wax barashada tacliinta loo adeegsanaayo Ingiriis iyo luuqada uu u dhashay ardayga, oo siineyso ardayga baranaayo Ingiriiska awooduu ku helo aqoonta luuqada iyo uu ku gaaro hadafyada guusha tacliinta ee gobolka. Wuxuu barnaamijkaan ka bilaabmaa Fasalka Barbaarinta Ee Ku Meel-gaarka Ah (TK)

Fasalka Barbaarinta (K) wuuna sii socdaa iyadoo uu hadafka yahay akhriska iyo qoraalka labada luuqad ilaa fasalka lixaad.

Barnaamijyada Wadada Labada Luuqad Ee Dugsiga Dhexe

Waxay dugsiyada soo socda bixiyaan shaqo koorso oo taageero barnaamijyada labada luuqad ee dugsiga hoose. Waxyaabaha lagu dhigaayo koorsooyinka ayaa ardayda loogu dhigaa luuqada la rabo inay bartaan ardayda oo u dhiganta. Ardayda ku qoran barnaamijyadaan ayaa laga yaabaa inay haystaan fursad ay dugsiga sare ku heli karaan shahaadada California State Seal of Biliteracy oo ah shahaado la isku siiyo akhriska iyo qoraalka labo luuqad.

- Isbaanish:** Dugsiga Dhexe Bell, Dugsiga Dhexe Clark, Golden Hill K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), Dugsiga Dhexe Innovation, Longfellow K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), Dugsiga Dhexe Millennial Tech, Dugsiga Dhexe Montgomery, Muir Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), Dugsiga Dhexe Pershing, Dugsiga Dhexe

Roosevelt iyo Dugsiga Dhexe Wilson

- **Faransiis/Isbaanish:** Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad)

- **Mandarin:** Dugsiga Dhexe Pacific Beach

Barnaamijyada Luuqada

Barnaamijo lagu hadlo luuqado badan oo lagu soo bandhigo fursado loogu talagalay in ardayda wax loogu dhigo luuqado aan ahayn Ingiriiska.

Barnaamijyada ku baxa luuqad ajnabi ah keliya ee loo yaqaano Foreign Language Immersion Programs), oo sidoo kale loo yaqaano One-Way Immersion Programs ayaa ah barnaamijo wax loogu dhigo arday ku hadlo hal luuqad keliya, waxaana loo qorsheeyay inay ardayda ku hadlo Ingiriiska ku bartaan luuqad labaad. Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego bixisa barnaamijyada wax loogu dhigo arday ku hadlo hal luuqad keliya (One-Way Immersion Programs):

- **Isbaanish:** Dugsiga Hoose Boone, Dugsiga Hoose Gage, John Muir Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), Longfellow K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), iyo Dugsiga Hoose Tierrasantaa

- **Faransiis:** Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad)

- **Mandarin:** Dugsiga Hoose Barnard Mandarin Magnet iyo Dugsiga Dhexe Pacific Beach

Ku Qornaansho Barnaamij Luuqada iyo/ama Barnaamij Barashada Luuqada: Dadka degan meesha dugsi looga soo xaadir karo ayaa si toos ah isugu qori karo barnaamij iyagoo jooga dugsiga. Dadka aan degnayn oo jecel inay ardaygooda ku qoraan barnaamij lagu barto luuqada ama barnaamij luuqada, iyo/ama qoysaska xiiseynaayo barnaamijyada loo yaqaano Magnet oo ah barnaamij xoog lagu saaro waxyaboo khaas ah ayaa laga rabaa inay soo gudbiyan codsiga dookha ee loo yaqaano Choice iyo waa in lagu aqbalo bakhtiyaanasiibka Dookha ee loo yaqaano Choice lottery si ay isugu qoraan. Isku qoritaanka barnaamij luuqad fasalka koowaad ka dib ayaa laga yaabaa inuu u baahdo baasitaanka imtixaan aqoon.

Dugsiyada soo socdo ma laha xuduud: Dugsiga Hoose Barnard Mandarin, John Muir Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), Language Academy K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad), iyo Longfellow K-8 (Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka 8'daad). Waxaa ardayda la qori karaa keliya hadii lagu aqbalo bakhtiyaanasiibka Dookha (Choice lottery).

Waalidinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa la xiriiri karo dugsiyada gaarka ah si ay u helaan maclumaadka is-qoritaanka ee gaarka u ah dugsiga. Si aad u hesho maclumaadka is-qoritaanka guud iyo Dookha (Choice), tag <https://sandiegounified.org/departments/>

[neighborhood_schools_and_enrollment_options](#) ama la xiriiri Xafiiska Dugsiyada Ku Yaalo Xaafadaada iyo Xulashooyinka Is-qoritaanka (Neighborhood Schools and Enrollment Options office) oo laga heli karo (619) 260-2410 ama eooptions@sandi.net.

Sida Loo Codsado In Dugsiga Laga Aasaaso Barnaamij Cusub

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa xaq u leh inay cunugooda u codsadaan barnaamij lagu barto luuqada. Si dugsi looga codsado barnaamij, waxay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda usoo gudbin karaan xafiiska weyn ee dugsiga codsi hadal ah ama qoran. Waa inay dugsiyada meel ku qoraan codsiyada barnaamijka lagu barto luuqada ee qoraalka ah ama hadalka ah iyo waa inay haayaan meel ay ku qoran yihiin dhammaan codsiyada lasoo gudbiyo sannad kasta. Hadii ay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah 30 arday ama in ka badan dugsigiiiba, ama ay 20 arday ama in ka badan dhigato fasal kasta ay codsadaan barnaamij lagu barto luuqada ama barnaamij luuqada, waxaa dugsiga laga rabi doonaa inuu soo bandhigo barnaamij noocaa ilaa intii suurtagal ah.

Qayb-qaadashada Waalidka Iyo Bulshada

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa soo bandhigi karo talooyin khuseeyo barnaamijyada barashada luuqada iyo/ama barnaamijyada luuqada inta lagu jiro sameynta Qorshaha Masuuliyyada iyo Xukunka Deegaanka (Local Control and Accountability Plan [LCAP]). Hadii aad xiiseyneyo barnaamij ka duwan kuwa ku qoran kor, waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ayaa iimayl u diri karo Xafiiska Barashada Luuqada (Office of Language Acquisition [OLA]) oo lagala xiriiri karo ola@sandi.net si ay u helaan faahfaahin dheeraad ah.

Nidaamka Diiditaanka Oo Looga Saaro Ardayda (Opt-Out Waivers)

Inkastoo dugsiyada waajib ku tahay inay wax u qabtaan dhammaan ardayda baranaayo Ingiriiska (EL), waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda baranaayo Ingiriiska ayaa xaq u leh inay diidaan ama ka baxaan barnaamij ardayda baranaayo Ingiriiska (EL) ama adeegyada ardayda baranaayo Ingiriiska (EL) ee dugsi. Waa in sannad kasta dugsiga laga buuxiyo foomka ka saaritaanka adeegyada ardayda baranaayo Ingiriiska (EL). Waxaa foomamka ka saaritaanka laga heli karaa <https://sandiegounified.org/departments/ola>.

Hadii ay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ka baxaan barnaamijka ardayda baranaayo Ingiriiska (EL) ee dugsiga ama adeegyo gaar ah oo ka mid ah kuwa loo qabto ardayda baranaayo Ingiriiska (EL), xaalada cunugooda oo ah mid baranaayo Ingiriiska ayaa sii ahaan doonto sideedi hore iyo waa inuu sii

waado qaadashada imtixaanada Isu-geynta Aqonta Luuqada Ingiriiska Oo Loogu Talagalay Kaafiliyaa oo loo yaqaano Summative English Language Proficiency Assessments for California (ELPAC) oo la bixiyo sannad kasta ilaa looga garanaayo inuu yahay arday si fiican u yaqaano Ingiriiska.

Waxaa weli waajib ku ah dugsiga inuu qaato talaabooyinka xaqiijinta uu u baahan yahay Title VI ee Sharciga Xuquuqda Shacabka Ee 1964 ee loo yaqaano Civil Rights Act of 1964 iyo talaabooyinka ku haboon uu u baahan yahay Sharciga Fursada Wax Barasho Loo Siman Yahay Ee 1974 ee loo yaqaano Equal Education Opportunity Act of 1974 si loo siyo ardayda baranaayo Ingiriiska (EL) fursad ay ku qaataan barnaamijadeeda wax barashada.

L. Foomamka iyo Tilmaamaha

Universal Form'ka oo loo baahan yahay iyo foomka *Pesticide Use Notification* oo ikhiyaarka ah waxay buugaan oga jiraan boggaga soo socdo. Dugsiyada qaarkood waxay si gooni ah usoo bandhigaan foomam kaan daabacan si adiga laguugu fududeeyo.



Universal Form (Return Required)

Signature Verification of Receipt of Documents/Release of Information

Student Name (Last name, first name)	Parent Name (Last name, first name)	Grade
Address	Home Phone	School
City, Zip Code	Parent/Guardian Work Phone	Teacher (Grades K-5 only)

After reviewing the Facts for Parents booklet, student and parent/guardian must check each section, sign the last section, and return this form to the school office.

<p>1. DISCRIMINATION, HARASSMENT, INTIMIDATION, & BULLYING POLICIES <i>(Facts for Parents: Section B)</i></p> <p>By checking each circle and signing below, I acknowledge the following:</p>	<p>3. UNIFORM DISCIPLINE PLAN (<i>Facts for Parents: Section C</i>)</p> <p><input type="radio"/> I acknowledge that my student has read the Uniform Discipline Plan, and that my student and I understand the consequences should my student violate the policy.</p>
<ul style="list-style-type: none"> <input type="radio"/> My student and I have read and understand the Discrimination and Harassment Policies section. <input type="radio"/> My student and I understand the consequences should my student violate the policy. <input type="radio"/> I have been informed of these rights. 	<p>4. HEALTH REQUIREMENTS (<i>Facts for Parents: Section D</i>)</p> <p>California law requires that parents/guardians of each pupil acknowledge having been informed of their rights as explained in "Health Requirements" in <i>Facts for Parents</i>.</p> <p><input type="radio"/> I acknowledge that I have been informed of these rights.</p>
<p>2. PHOTOGRAPHY/VIDEO/MEDIA RELEASE*</p> <p>During the school year, schools host events where representatives of the news media may be on campus to gather photographs and/or video footage.</p>	<p>5. TECHNOLOGY-NETWORK USE GUIDELINES (<i>Facts for Parents: Section K</i>)</p> <p>The "Network Use Guidelines" for San Diego Unified School District is a contract and must be signed by students and parent/guardians before the student is given access to technology, the internet and other San Diego Unified networks.</p>
<p>In addition, parents and students may take photos of events in classrooms or around schools. These photos may be posted on the Internet, on social media or otherwise distributed without the permission of the school. Your child's participation in these events is valued, and parent permission is needed to include him or her in events where photography may take place.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <input type="radio"/> STUDENT: I understand and will abide by the rules and conditions outlined in Section K about access to technology, the internet and other San Diego Unified networks. <input type="radio"/> PARENT OR GUARDIAN: I give my student permission to use technology, and access the internet and other San Diego Unified networks.
<p>Parents/Guardians who prefer that their child not be photographed or video recorded must notify their school by using this form. Schools make every effort to ensure the wishes of the parent/guardian. Please be aware that photographing and video recording by devices such as a mobile phones may take place without the knowledge of the teacher, principal or district staff.</p>	<p>6. SIGNATURES</p> <p>By completing sections 1 – 5 and signing below, I, the student, and I the parent, have read, understand and acknowledge the policies and rights outlined above and described in detail in <i>Facts for Parents</i>.</p>
<p>PARENTS OR GUARDIANS: Indicate your level of permission OR use the last circle to opt out completely.</p>	<hr/> <div style="display: flex; justify-content: space-between;"> <div style="width: 45%;"> <p>Student Signature</p> </div> <div style="width: 45%;"> <p>Date</p> </div> </div> <hr/> <div style="display: flex; justify-content: space-between;"> <div style="width: 45%;"> <p>Parent/Guardian Signature</p> </div> <div style="width: 45%;"> <p>Date</p> </div> </div>
<p><input type="radio"/> I give my permission (select all that apply).</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> To have my student interviewed, photographed, and/or video recorded by news media. <input type="checkbox"/> To have my student photographed and/or video recorded by the district/school. Photos and videos may be used on school/district websites, brochures, social media, etc. <input type="checkbox"/> To have my child's name published in order to credit his or her work. <input type="checkbox"/> To have my student's photograph included in the school yearbook. 	
<p><input type="radio"/> I DO NOT want my child's name, photo or video published publicly.</p>	

* Update your release preferences at any time by contacting your school office

Revised: January 2019

Foomka Guud (Universal Form)

FADLAN BUUXI IYO USOO CELI: Dugsiga ilmahaaga.



Foomka Ogeysiinta Iisticmaalka Sunta Cayayaanka (WAA IKHTIYAARI)

Dib Loo Eegay April 28, 2017

Foomka Ogeysiinta Isticmaalka Sunta Cayayaanka

FADLAN BUUXI, HADII AY KUGU HABOON
TAHAY, MARKAASNA U SOO CELI:

Physical Plants Operation Center

4860 Ruffner St

San Diego, CA 92111-1522

Attn: Kooxda Maamulka Cayayaanka Oo Isku
Dhex Jiro



Universal Form (Return Required)

Signature Verification of Receipt of Documents/Release of Information

Student Name (Last name, first name)	Parent Name (Last name, first name)	Grade
Address	Home Phone	School
City, Zip Code	Parent/Guardian Work Phone	Teacher (Grades K-5 only)

After reviewing the Facts for Parents booklet, student and parent/guardian must check each section, sign the last section, and return this form to the school office.

1. DISCRIMINATION, HARASSMENT, INTIMIDATION, & BULLYING POLICIES

(*Facts for Parents*: Section B)

By checking each circle and signing below, I acknowledge the following:

- My student and I have read and understand the Discrimination and Harassment Policies section.
- My student and I understand the consequences should my student violate the policy.
- I have been informed of these rights.

2. PHOTOGRAPHY/VIDEO/MEDIA RELEASE*

During the school year, schools host events where representatives of the news media may be on campus to gather photographs and/or video footage.

In addition, parents and students may take photos of events in classrooms or around schools. These photos may be posted on the Internet, on social media or otherwise distributed without the permission of the school. Your child's participation in these events is valued, and parent permission is needed to include him or her in events where photography may take place.

Parents/Guardians who prefer that their child not be photographed or video recorded must notify their school by using this form. Schools make every effort to ensure the wishes of the parent/guardian. Please be aware that photographing and video recording by devices such as a mobile phones may take place without the knowledge of the teacher, principal or district staff.

PARENTS OR GUARDIANS:

Indicate your level of permission OR use the last circle to opt out completely.

- I give my permission (select all that apply).
 - To have my student interviewed, photographed, and/or video recorded by news media.
 - To have my student photographed and/or video recorded by the district/school. Photos and videos may be used on school/district websites, brochures, social media, etc.
 - To have my child's name published in order to credit his or her work.
 - To have my student's photograph included in the school yearbook.
- I DO NOT want my child's name, photo or video published publicly.

3. UNIFORM DISCIPLINE PLAN (*Facts for Parents*: Section C)

- I acknowledge that my student has read the Uniform Discipline Plan, and that my student and I understand the consequences should my student violate the policy.

4. HEALTH REQUIREMENTS (*Facts for Parents*: Section D)

California law requires that parents/guardians of each pupil acknowledge having been informed of their rights as explained in "Health Requirements" in *Facts for Parents*.

- I acknowledge that I have been informed of these rights.

5. TECHNOLOGY/NETWORK USE GUIDELINES (*Facts for Parents*: Section K)

The "Network Use Guidelines" for San Diego Unified School District is a contract and must be signed by students and parent/guardians before the student is given access to technology, the internet and other San Diego Unified networks.

- STUDENT: I understand and will abide by the rules and conditions outlined in Section K about access to technology, the internet and other San Diego Unified networks.
- PARENT or GUARDIAN: I give my student permission to use technology, and access the internet and other San Diego Unified networks.

6. SIGNATURES

By completing sections 1 – 5 and signing below, I, the student, and I the parent, have read, understand and acknowledge the policies and rights outlined above and described in detail in *Facts for Parents*.

I give my permission (select all that apply).

- To have my student interviewed, photographed, and/or video recorded by news media.
- To have my student photographed and/or video recorded by the district/school. Photos and videos may be used on school/district websites, brochures, social media, etc.
- To have my child's name published in order to credit his or her work.
- To have my student's photograph included in the school yearbook.

I DO NOT want my child's name, photo or video published publicly.

Student Signature _____ Date _____

Parent/Guardian Signature _____ Date _____



San Diego Unified School District
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103

619-725-8000

www.sandiegounified.org